# MASHRUUCII
## La Dagaallanka
# NUURKA



Cabdiraxmaan Cismaan Jaamac

*Mashruucii La Dagaallanka Nuurka*

*Cabdiraxmaan Cismaan Jaamac*

Xuquuqda Qoraalka

Xuquuqda © 2020 Cabdiraxmaan Cismaan Jaamac

Xuquuqda Buuggani waa mid dhowrsoon. Qaybo ka mid ah lama dhallan rogi karo, looma qaadan karo, loomana isticmaali karo sifo ka baxsan xuquuqda qoraalku leeyahay. Qoraalka buuggan ku dhigan lama soo saari karo iyada oo aan oggalaanshiyo laga haysan qoraaga. email abdiosman9@yahoo.com.

Daabacaddii 1aad: 2020

ISBN 978-1-64826-399-6

HIIL PRESS
contact@hiilpress.com

Jeldiga waxa qaabeeyay: Mustafe Mahad

Waxaad ka heli kartaan barta caalamiga ah Amazon

Hibayn

Buuggan waxaan u hibeeyay saaxiibkay Cadnaan Nuux Gahayr oo ah astaanta dadnimada iyo gobonnimada.

# Mahadnaq

Waxaan halkan ugu mahadnaqayaa dadkii gacanta ka geystay in buuggu ifka usoo baxo. Ugu horrayn aan u mahadceliyo xaaskayga aan jeclahay Sahra-Kiin Cabdiraxmaan Axmed oo igu dheerigelisay in aan buuggan qoro, gacan weyn ka geysatay tafatirka buugga. Saaxiibkay Cadnaan Nuux Gahayr oo gacan laxaad leh isna ka geystay buugga soona akhriyay intii aan la daabicin ka hor iyo Maxamed Axmed Dooxajoog ayaa isna aan mahadnaq gaadhsiinaayaa oo qayb libaax isna ka qaatay hirgelinta buuggan. Waxaa buugga sidoo soo akhriyay Cabdirashiid Cabdilaahi Yuusuf oo tallo ku darsaday qaab qoraalka. Ugu danbayn halkan waxaan uga mahadnaqayaa garyaqaan Yuusuf Biixi Muxumed oo tallo sharci ka bixiyay humaagyada buugga ku jira qaar u baahan iftiimin.

Afeef

Sheekada buuggan ku qoran maaha mid ka hadlaysa naftayda iyo qof kale toonna; waase humaagyo rumaad ku tusaya dunida qarsoon ee aad ku dhex nooshahay. Jilaha buuggu waa sida qof hurdo kaa kiciyay habeen madow oo doonaya in uu ku tuso khatar kugu xeersan oo aadan ka warhayn.

## Qaybtii 1-aad

Waxaan safar gaaban ku imid magaalada London Cariga Ingriiska, anigoo u socdo ka qaybgalka xaflad aroos oo ehelkayga ah. Saddex cisho markaan joogay ayuu ila soo hadlay nin ka tirsan urur ka mid ah kuwa sida qarsoon u shaqeeya. Wuxuu igu balamiyay maqaaxi caan ka ah magaalada London kuna taal South Kensington oo la yidhaa Gails Bakery.

Waan imid anigoo werwer yar igu jira oo isweydiinaya wuxuu iga rabo. Markaan cabaar fadhiyey ee aan bun iyo macmacaan meeshii ku cunay ee aan kolba saacadda hoosta ka eegayo.

Waxa si kedis ah ii soo dul istaagay nin cad, wuxuu ii sheegay in la ii soo diray oo uu ii qaadayo hudheel. Waan soo raacay gaadhigii oo wuxuu i keenay hudheelka Riverbank Park Plaza oo ku yaala badhtamaha London. Qof baa ii sii taagnaa albaabka oo si diiran iigu soo dhaweeyay hudheelka. Wuxuu ii kaxeeyay qol albaabkiisa ay ku qornayd tirada 322. Qolka markii aan galay ayaan sariirta ku dul arkay suudh madow, shaadh madow iyo kabo madow.

Waan maydhay, sidii la ii tilmaamay ayaan dharkii madoobaa ku labistay. Cabbaar ayaan daawaday London Eye oo toos ugu beegan daaqada qolka aan ku jiro. Waa meel ka mid ah meelaha ugu bilicsan magaalada London, dalxiisayaal badana way joogeen.

Gabalku wuu sii dhacayaa anna weli waxaan taaganahay daaqada. Garaac xooggan ayaa albaabkii la igu soo tumay, haddana waa la

iska furay annoo yaaban ayuu igu yidhi, 'mudane, waxaa bilaabmaysa soo dhawayntaadii.' Waan soo raacay, waxaanu i fadhiisiyay miis maro madow lagu sharaxay, shaqaalahu dhammaan dhar madow ayey ku labisnaayeen.

Miiska waxaa saarnaa khamri cas, waraaq sida saddex-xagalka u taal oo ay ku qoran tahay "welcome to the brotherhood" ku soo dhawaw walaaltinimada, iyo sidoo kale waxaa taala hees magaceedu yahay 'welcome home'. Ku soo dhawaw guriga. Markiiba gabadh dhar madow xidhan ayaa masraxa soo fuushay waxaabay qaadaysaa heesta midhaheedu ay miiskayga saaran yihiin. Waxaa ka mid ahaa erayadeeda:

Welcome to where
time stands still,
No one leaves and no
one will

Moon is full,
never seems to change
Just labeled
mentally deranged

Dream the same thing
every night,
I see our freedom
in my sight

No locked doors
No windows barred,
No things to make
my brain seem scared

Keep him tied,
it makes him well.
He's getting better,
Can't you tell?

Leave me be!

Just leave me alone...

Heeskaas oo i laabqaaday misana cabsi igu abuurtay ayuu mid madow ii yimid isagoo madaxa hoos u foorarinaya ayuu igu yidhi, 'mudane, waa kuu diyaar gaadhigii ku qaadi lahaa.' Dabaqa hoose ee hudheelka ayaa la i geeyay, waxaa igu sugayey gaadhi kala jiidan. Markaan guddaha u galay waxaan kula kulmay saaxiibkay.

Waan ku naxay oo waxaan ku idhi, 'waar maxay sidani tahay', isna wuxuu iigu hal celiyay waadigii muddo daba-socday inaad nagu soo biirto ee ay codsigaaga laba jeerba ay diideen Club of Rome iyo Scottish Temple. Hadda, waxa timid fursad aad isku muujin karto, haddii aad daacad ka noqoto hawlaha laguu igmanayo waxaad heli xubinnimo buuxda.

Magaalada waan ka sii baxaynaa, waxaan gaadhay dhisme dhulka hoostiisa ka dhisan oo aad yaabayso qaabka loo dhisay. Saaxiibkay gaadhigii ayuu ku hadhay, anna laba nin oo xidhan dhar madow oo ay qoortooda sudhan tahay saddex-gees cas ayaa intay garbaha i qabteen ayay ii kaxeeyeen qol madow oo iftiinka qudha ee ka baxaya yahay shamac.

Waxaa goob madow soo fadhiyey nin darajadiisu tahay 33 oo magiciisa iigu sheegay Paul McMillan. Wuxuu i weydiiyey in aan ku qanacsanahay in aan ku soo biiro ururkooda Dark Marrow. Anna hore ayaan ka aqbalay. Habeenkii halkaas ayaa xaflad weyn la iigu sameeyay.

Saddex habeen ka dib anigoo sidii meeshii ugu jira ayuu Paul ii kaxeeyay qol madow, deeto ileys ayaa lagu qabtay gidaarka

waxaana la i tusay khariirad madow oo ay cad yihiin laba meelood. Wuxuu i weydiiyay Paul labadaa meelood ee cad miyaad garanaysaa. Waxaan ku idhi mid waa Geeska Afrika ta kalena waa Barriga dhexe. Paul ayaa igu yidhi, 'Waa dhulka Soomaalida', ta kalena waa Shaam. Wuxuu ii raaciyay in khariiradaa la sameeyay shirkii Berlin ka dhacay 1884.

Wuxuu kale oo uu ii sheegay arrin argagax igu riday, Paul McMillan wuxuu yidhi, 'shirkaas waxa fadhiyay kii samada ka soo dhacay... markuu arkay in aanan fahmin ayuu iigu macneeyay...(idinku Shaydaan ayaad u taqaanaan).

Wuxuu noo sheegay in dhulka Soomaalida iyo Shaam ba ay yihiin labada Nuur ee u baahan in lala dagaallamo si qorshahayagu u fulo.'

## Qaybtii 2-aad

Markaas ayaa cabsi igu abuurantay. Waxaan jeclaystay in aanan halkan iman, waxaase cod guddaha igala hadlay igu yidhi, "xog badan aad ogaatide adkayso." Cidda ila hadlaysaa ma garan ee berri danbe ayaan ogaan doonaa in uu igu shaqaysanayo xoog ka awood badan kuwan aan ku biiray oo iyaguna iga lahaa ujeedo.

Paul wuu i dareemay in buuq igu furan yahay, waxaanu ii sheegay markaan koro salaanka kala saraynta in cabsidu iga baabi'i doonto laakiin la iiga baahan yahay naf-hurid laxaad leh.

Wuxuu si toos ah iigu sheegay baahida xilligan keentay in loo baahdo dad Soomaali ah oo

guddaha ka dagaallama oo noqda gacanta qarsoon ee noo fulisa danaha walaalaha madow.

Waqtigan waxaa nagu adkaatay in aan dibedda kala dagaallano, weliba wax walba waxay isbeddeli doonaan marka la gaadho Diisambar, 21, 2016. Waxaan jeclaystay in ogaado sabbabta xilligaas wax walba isku beddelayaan.

Waxaad moodaa inuu maqlayo faqa guddahayga ka socda, wuxuu ii sheegay in xog badan oo aan loo sheegi jirin xubnaha Dark Marrow aan nasiib u helay in la ii furo. Sirtan waxaa la siin jiray inta darajadoodu ugu hoosayso 21, cidda fashilisana xukunkoodu wuxuu ahaa dil, adna maanka ku hay inaad ilaaliso.

Wuxuu igu yidhi, 'hadda, sixirkii aanu dhulkaas kula dagaallami jirnay wuu naga istaagay,

2012-kii waxa kor u kacay quwada ruuxda Aadamaha oo halis weyn ku haysa qorshaha weyn ee aanu ku dhaxlayno awoodda dunida.' Diisambar, 21, 2016-ka marka la gaadhana waxaa cirka ka soo muuqanaya xiddig cusub oo awood badan, xiddiggaasi markuu soo daahiro ma shaqayn doono qorshe kasta oo aannu ka leenahay dhulka Soomaalida.

Dagaalkii hore ee noo qorshaysnaa waanu fulin doonaa inta aan la gaadhin 2016. Dhulka Soomaalida waxaanu qorshaynay in 5 maamul loo qaybiyo, waxaa sidoo kale 1884 aanu miiska soo dhignay in marka la gaadho 2020 aanu dhulka Soomaalida ka samayno 10 dawladdood oo mid kastaa cadow ku tahay ta jaarka la ah una diyaar tahay in ay daadiso dhiiggooda.

Halkaas, markuu marinayo ayuu joojiyay hadalkii, waxaanu ii sheegay in xogta inta

hadhay la i siin doono markaan fuliyo hawlgalka koowaad ee qorshaha gacanta la iga saaray. Qolkii madoobaa ayuu iga soo saaray. Waxaanu i keenay qol dhiig ka soo urayo. Biyo ayuu madaxa igaga shubay. Waxaanan markii koowaad usoo dhoofay dalkayga anigoo cadow ku ah dadkii aan ka dhashay.

21 July 2007 ayaan ka soo dagay madaarka Hargeysa. Cabsi ayaa dabooshay qalbigayga, waxaase ay hore iigu soo sheegeen waddanku in aanu lahayn sirddoon difaaca. Qolada qudha ee la igu dardaaray in aan ka feejignaado waa qolo waddanka ilaalisa oo suuqa iska joogta, dadkuna aanay aqoon awooddooda iyo wejiyadoodaba.

Judhiiba laba guri ayaan ka kiraystay Masalaha iyo Jigjiga yar waa labada xaafadood ee aad hawlahaaga si fiican uga fushan karto, ogolna in cid kale ku dhex

shaqaysato.

Waxaan ku tallo jiraa in aan hantiyo dhallinyar badan oo gabdho iyo wiilal ba leh. Waxaan ku kasbanayaa lacag iyo indho-sarcaad. Mustaqbal qurux badan ayaan u sawirayaa. Labadaas gurri ayaan kullan ugu qabtaa.

Hawlihii oo meel fiican ii maraya ayuu ila soo hadlay, waxaana la igu amray in aan tago gobolka Sanaag oo aan fuûlo buurta Cirshiida. 2:00-dii habeennimo ayaan fuulay, subaxii ayay farriin ii soo direen oo ay igu yidhaahdeen xalay waxaad fuushay buurta sida sirta waddankaas. Waxaase la ii soo diray digniin la igu farayo in aan degdeg uga soo baxo dalka oo noloshaydu khatar ku jirto.

Dhaadhaca Daallo markaan marayo ayuu nin cawlan nagu joojiyay buurta hoosteeda wuxuu igu yidhi, 'Adiga iyo kuwa ku soo diray Sanaag ayay awooddoodu ku idlaan, haddaad mar

danbe timaadana waad eedi, haddana farriinta gaadhsii walaalahaaga madow.' Cabsi ayaa igu dhacday, waanan baqayay ilaa aan ka degay madaarka Heathrow ee magaalada London.

Paul McMillan ayaan ku booqday xaruntii ururka, si diiran ayuu ii qaabilay wuxuu ii sheegay in aan gaadhay meel ay iyagu ka baqaan. Wuxuu ku daray in ay Sanaag qorshe ka leeyihiin. Hadda, waxaan kuu furayaa bog kale oo sir ah. Wuxuu yidhi, 'intii aan ku mashquulsanayn dagaalkii Ciraaq halkan waxaa laga taagay calan Tawxiid leh.' Waanu garan waynay halka ay naga hoos martay.

1998 ayaanu ogaanay in awood ka soo baxayso halkaas. Arrintii ayaa ay ka wada hadleen Maraykanka, Ingiriiska iyo Israa'iil. Ingiriiska iyo Israa'iil waxay yidhaahdeen hadda aan la dagaallano, Maraykankuna

wuxuu yidhi aan eegno sida ay u soo baxayso. Hadda, waanu garan laa'nahay si aannu yeelno.

Wuxuu iigu daray in ay ciidamo geyn doonaan badda cas, iyagoo abuuraya budhcad baddeed ay ka dhigtaan foodsaaro iyo sabbab ay ciidamadooda ku keenaan badda. Waxaan arkayaa qorshihii oo u fulaya siddii Paul McMillan iigu sii sheegay.

Taas waxa ka daran ta maanta socota, wuxuu si cad iigu sheegay 2016-ka in ay Soomaalilaan ka soo weerarayaan dhinaca bari.

## Qaybtii 3-aad

Waxaa i luraya in aan ogaado sabbabta uu u rabo ‘dagaalka bari’, annoo aad moodo in jiidhku ii damqaday dadkayga ayaan la soo booday waakan dhacaya ee maxay ilaa xadkaa muhiim idiinku noqotay inaad weerarkan qaadaan. Paul, isaga oo aan ii jawaabin ayuu eegay ergay kale. Wuxuu igu yidhi, ‘walaal Berg ayaa kuu furi doona boggaas.’

Berg ayaa hadalkii qaatay, wuxuu yidhi:

Waxaan ka fikiraynaa in aannu isku beegno qaska Sanaag iyo qabsashada Qudus. Waxaan weydiiyey waa maxay xidhiidhka ka dhaxeeya Sanaag iyo Qudus. Wuxuu ii

sheegay markii u horaysay dunida in ay ku guulaysteen faafinta jahliga iyo qarinta

Way yar yihiin cidda taqaan cilmiga sida dhacdooyinka dhulku isku saameeyaan iyo muhiimada dhuleed ee ka dhaxaysa Sanaag iyo Qudus. Qoladan Muslimka waxaa loo sii sheegay in marka ay camiranto Qudus iyo Yatrib (Madina) ay xidhmayso -sirtan waxa haya inyar oo ka mid ah dadka awoodda laga ilaaliyo.

Paul McMillan ayaa ku soo noqday isagoo wardoonkayga ka jecel in aan amarradiisa qaato:

Wuxuu igu yidhi, 'dhawaan ayaad dalkii ku noqonaysaa, waxaanu kuu boqri doonaa mataan.' Degdeg ayaanu u rabnaa in aan beerno midho aynu mustaqbalka dhow goosano. Si aydun u sumaysaan quluubaha

madhan waa in aydun adeegsataan qalabkan aan ku siiyay. Wuxuu igu yidhi markaad doonaysid in aad biiso dalaga beeraha shinnida ayaa la beddelaa, marka aad doonayso in aad xumayso hab fikirka wanaagsan wax dadku akhrisanayo ayaa la abuuraa.

Xikmaawi Shiinays ah ayaa laga hayay, 'haddii qorshahaagu yahay 1 sanno bariis beerro, haddii uu yahay 10 sanno dhir beer, haddiise uu yahay 100 sanno carruur wax bar.' Innaga qorshaha Ina eryayaa waa ka duwan yahay taa, waxaanu ka cararaynaa cadceed galbeed ka soo baxaysa oo aan la garanayn goor ay dilaaci.

Waxaa gebbi ahaanba isbeddelaya 2012 qorshe 300 sanno noo soo shaqeeyay. Way adag tahay in aanu maamulno xataa doqmihii, wax walba waxay u shaqaynayaan si lid nagu ah. Ma garanayno siday wax u dhacayaan.

Waxaan dalka ka soo degay aniga oo sita buug badan oo falsafad ah oo ay qoreen ragga ay ka mid yihiin Aristotle, Plato, Socrates, Hegel, Locke, Tolstoy iyo qaar kale oo badan. Kulannadii oo halkoodii ka sii socda ayaan buugta u qaybiyay dhallinyar dhowr ah, waxaan ku idhaahdaa erayo beer-lawaxsi ah oo aan qalbigooda ku xadayo.

Waxaan ugu yeedhaa Platahii Soomaalida ayaad tahay, waxaan dareemayaa in ay qab gelisay; waxaanse ogahay kuwa gashada kabaha falsafada iyagoon aqoon fiican u lahayn in ay galaan mugdi oo ay garashadu ka lunto.

Markii ugu horaysay qolo aan dalka ka bixin ayaa baraha bulshada ku soo qortay erayo ceebayn ku ah asalka diinta Islaamka, waxaanay shaki geliyeen iimaankooda. Arrintaas ururku si weyn ayuu iigu soo

hambalyeeeyay, Paul McMillan ayaa ii soo qoray fariin gaaban oo aanan wada fahmin:

"Waxa la gaadhay waqtigii uu soo bixi lahaa BOQORKII QARSOONAA. Sug oo u diyaar garow."

Fariinta markaan akhriyay ayay anoo arkaya is masaxday iyadoo gubanaysa. Argagax iyo cabsi ayaan dareemay -wadnahayguna wuu gariirayaa. Waxaan weydiiyay waxa fariintii gubay. Wuxuu ii sheegay in ay Jinka heshiis kula jiraan oo ay arrimo badan ka wada shaqeeyaan.

Qabiilooyin kala duwan ayay leeyihiin hadda reerka noo qaabilsan Internet-ka waxaa la yidhaa ZILLA...halkaa markuu marayo ayuu is-maray oo ka cadhooday inuu sirtaas sii dhexgalo.

Waxaan la xidhiidhay Koonfurta anigoo

doonaya in mashruuca ku faafiyo dhulka Soomaalidu degto. Muqdisho hawsheeda wiil yar ayaan u dirayaa ayaan ku idhi Paul, wuxuu igu yidhi, 'Muqdisho waxaan u naqaan Vatican City, markaa wakiillo badan ayaa noo jooga.' Halkaa ayaan kaga hadhay oo waxaan ogaaday in aanan keli ku ahayn dagaalka dahsoon.

Maalintii danbe anigoo hudheel cunto ka cunaya ayaa nin baahan uu na soo dul istaagay, waxba ma hayno ayaan ku idhi, wuxuu igu yidhi, 'waxba ma haysid oo waa la hubaaye, Muqdisho waxaa loogu magac daray Ismaaciil Maqaadishi; waa nin Awliyo reer sheekh Isaxaaq ah, hawlihiinuna waa fashil.' Naxdin ayaan qaaday, cuntadii ayaa iga degi wayday.

Habeenkii waan seexan kari waayay, waxaan garwaaqsaday in ay jirto cid og tallaabo kasta oo aanu qaado. Subixii ayaan dalbaday

wastaad laban ku xaniba daaqadaha guriga aan ka degannahay Hargeysa, waana la iga xidhay.

## Qaybtii 4-aad

Waxaan ka cawday in aanan ku noolaan karin cabsi joogto ah. Paul wuxuu igu qanciyay oo uu igu dajiyay in ay dhawaan dalka keeni doonaan ciidan difaaca danahayaga iyo wakiillada qarsoon ee noo adeegga. Waan ku niyadsamaaday balanqaadkaas, ha yeeshee waxaan mar walba ku noolaa cabsi iyo werwer joogto ah, anigoo ka baqo qabay in aan ku dhinto hawlaha khatarta badan ee gacmaha la galay.

Marka kasta oo qof i salaamo, waxaan dareemi jiray naxdin sidii oo uu og yahay arrimaha aan faraha kula jiro. Qof kasta oo aqoon u leh akhrinta wejiyada ayaa sawiran karayay hawlaha aan wado -si aanay taasi u

dhicin mar keliya indhaha ma siin jirin cidna.

Fariin ayaa ii soo dhacday la igu farayo in aan madaarka ka soo qaado gabadh. Gabadhu maaha mid ka tirsan ururka laakiin waxay iigu sheegeen in ay tahay kuwa taabacsan mabaadiida aannu aaminsannahay. Sidii baan yeelay, subixii ayaan soo qaaday gabadh xijaaban oo ay ka muuqato dhowrsanaan. Waxaa isku kay qabanwayday muuqeeda iyo waxa la iiga sheegay, hoos ayaan u idhi muuqaalka waxaa lagu siraa kuwa indhaha la'.

Waxaan ka warsaday sabbabta ay dalka u timid, waxay ii sheegtay in ay ka qaybgalayso kulan samofal ah iyadoo ay soo casuuntay ha'yad ka mid ah kuwa waddanka jooga. Kullankii ayey ka qaybgashay iyadoo aan u fahmay in la doonayo in ay hablaha tusaale u noqoto. kulanno hoose ayaa loogu sii balamiyay in ay la qaadato hablo gaar ah.

Markay hawlaheedii dhamaysatay ayaanu habeenkii casho la qaadanay islaan cad oo madax ka ah ha'yadda. Iyadoo dhaqankeedii beddeshay ayay farxad isku qaabileen islaantii. Anigu waan daawanayaa siday iskula jaanqaadeen, waxaanse madax wareer ka qaaday oo igu weynaatay waxa afkeeda ka soo baxay gabadhii. Si toos ah ayey afka iigu balaadhisay iyadoo islaantii ku leh aan kuu bushaareeyo, islaantii ayaa ku hal celisay iga farxi.

Waxay tidhi ku bishaarayso "hadda ka dib, Jiilkani khatar innaguma aha." Waxay sii raacisay in hayso oo ay farta ka saarayso xogtii laga ururiyay Internet-ka oo cadaynaysa in ay kor u kacday ilaa xad dhallinyarta daawata filimada xun iyo waxay ku magacowday 'porno'. Fajaciso ayaa igu dhacday oo waxaan garwaaqsaday in jiil dhan

nuurkii qalbiga ay madoobaysay daawashada xumaanta iyo sinnada lagu faafiyo internet-ka.

Waddanka Kiiniya ayaannu isku raacnay subixii xigay. Markay gababdhii magaalada Nairobi gaadhay waxay la soo baxday dhaqan cusub oo ahaa kii aan ka malaysanayay. Maryihii ayay tuurtay oo intay sidii hablaha reer galbeedka u labisatay ayay dhex gashay gaalo badan. Waxyaabaha ay samaynaysay waan ka tacajabay.

Anigu Nairobi wax badan kuma hakan, waxaan u sii dhaafay Lisbon oo la igu soo casuumay shir qarsoon oo lagaga arrinsanayo siduu u eekaan doono mustaqbalka siyaasaddeed ee Soomaalida Koonfureed.

Shirkii waxaan kula kulmay Berg oo ahaaba shaqsiga guddoominayay hawlaha la hayo. Waxay isla soo qaadeen sidii Soomaalidu loogu samayn lahaa nidaam Federaal oo sii

murgiya mushkiladaha ay hadda dhex dabaalanayaan.

Sidoo kale waxay is tuseen in Federaalku yahay hab aynu ku joojin karaan calanka Tawxiidka leh ee ay reer Soomalilaan saarteen; waxay yidhaahdeen calankaas ayaynu ku dul dhisaynaa calanka buluuga ah. Qolo xagjir ah ayaa ku dooday in Soomaalida laga qaado xaqa aayo-ka-tashiga oo gacanta loo geliyo Qarmada Midoobay ama wadamada jaarka gaar ahaan Ethiopia iyo Kenya.

Markuu shirkii dhammaaday waxaa la isla qaatay in Soomaalida loo sameeyo nidaam Federaal oo qas ku salaysan. Berg ayaa si gooni ah iigu sheegay in ay meel dhigteen go'aanka ah in Soomaalida laga ilaaliyo laba:

**1.** In ay Soomaalidu isku maamusho shareecadda Islaamka oo ay qaataan

shareecada.

**2.** Iyo in Soomaalidu yeelato dawlad dhexe oo adag.

## Qaybtii 5-aad

Wuxuu Berg aaminsan yahay haddii Soomaalidu qaadato shareecada Islaamka in dhibootooyinkooda oo dhammi ay u milmi doonaan sida cusbadu ugu milanto biyaha. Sidoo kale waxay helayaan MIDNIMO taas oo siinaysa quwad iyo sharaf. Sideen u aqbali karnaa in dhulka kheyraadka intaas leeg leh inuu gacanta u galo cid naga mabda duwan.

Way ku jiraan Soomaalida rag leh hammiga ay ku yagleelaan dawlad dastuurkeedu yahay Qur'aanka Kariimka, waxaanse ka xignaa dagaal.

Wuxuu yidhi, waxaanu nahay qoom wax

akhriya oo wax dersa. Qur'aanka ayaanu baadhnay, waxaanu ka helnay sir 'Suurada 2-aad, Aayadda 120-naad', taas oo aannu kala baxnay in haddaan Soomaalida ku qancino in ay raacaan nidaamkayaga in ay waayayaan Gargaarka iyo Guusha ALLE. Markaanu taageerayno doorashooyinka Soomaalilaan iyo hirgelinta Federaalka nagama aha jacayl ee waxay naga tahay in aannu kala dhexgalno iyaga iyo Rabbigoodii u gargaari lahaa.

Berg wuxuu sidoo kale carabka ku dhuftay in ay Soomalilaan Federaalka ku dirqin doonaan. Marar danbe oo aan iskaga dabqaadayay London, Hargeysa, Ankara iyo Nairobi ayaan ogaaday in kaaliyihii xoghaya arrimaha dibedda waaxda Afrika Johnnie Carson in laga codsaday in uu madaxweyne Barack Obama ku qanciyo in Somaliland lagu soo daro ciyaarta Federaalka ama lagu dirqiyo midnimo danbe.

Waxaa la unkay guddi uu hoggaaminayo senator Donald Payne oo ah xubbin ka tirsan aqalka sare ee odayada. Wuxuu soo casuumay dhammaan darafyada Soomaalida, waxaase shirkaas diiday oo ku gacan saydhay Daahir Rayaale Kaahin. Senator Payne wuxuu shirka kaga hanjabay luuqad ka arradan diblamaasiyada isagoo yidhi, "Soomaalilaan waanu ciqaabi doonaa oo waxaanu ku sandulayn doonaa Federaalka."

Shirkaas ka dib waxaa u dusay xoghayihii arrimaha dibedda ee xisbiga Kulmiye Dr. Maxamed Cabdilaahi Cumar oo kullan qarsoodiya la qaatay Payne. Markii danbe January 2010 waxaa Washington tagay guddoomiyihii xisbiga Kulmiye Axmed Maxamed Maxamuud Siilaanyo.

Iyadoo halkaas marayso ayuu kornayl Cabdilaahi Yuusuf Axmed BBC-da uu waraysi

siiyay isagoo Siilaanyo ku duray inuu weligii aaminsanaa fikirka gooni-u-goosadka.

Wuxuu BBC u sheegay, 'Waqtigii aan madaxda ka ahaa SSDF ayaan Siilaanyo oo guddoomiyihii SNM ahaa u soo jeediyay in aannu midowno. Wuxuu igu yidhi Siilaanyo midoobi mayno oo xisaab lixdankii iga khaldantay ayaan saxayaa. Markaa ninkaa Siilaanyo weligii ba gooni-u-goosad ayuu aaminsanaa.'

Axmed Siilaanyo ayaa maalintii xigtay iska difaacay idaacadda VOA-da isagoo leh anigu weligayba Federaal ayaan aaminsanaa oo xataa warqadii aan Federaalka ku soo jeedinayay waxaan qoray 1991 oo waa la heli karayaa. Arrintaas iyo dabaylihii Siilaanyo ku kacay isagoo musharrax madaxweyne ahaa iyo sidii loo maareeyay ee bulshada loo jiheeyay waxaan u dhaafayaa taariikhyannada.

Si kasta oo loo dedaalay haddana rabitaankii Federaalku si wacan ugama hirgellin Somaliland. Waxaanu garan waynay waxa hortaagan, qoladaydu se waxay tuhunsan yihiin in ay halkan ka taliso awood qarsoon oo tooda ka xoog iyo xeelad badan. Si kedis ah ayaa la iigu diray in aan hawl ka soo fuliyo caasimada dalka Yugaandha ee Kamaabla.

Waxaa la doonayay in lagu qanciyo dhallinyarta wax ka barata Yugaandha sidii ay ugu biiri lahaayeen ciidamo loo dhisayo Soomaaliya. Waxaan fadhiistay xaafadda Soomaalidu u badan tahay ee Kisenya si aan u ugaadhsado dhallinyar han leh oo aan ciyaarta soo geliyo.

Dhallinyar badan kumay niyadsamayn in ay fikirkaa ila qaataan. Si kasta oo aan ugu beer-lulo Museveni ku dayda isagoo dhallinyar ah ayuu Yugaandha qabsaday, ma helin cid ii soo

dabacda oo aqbasha qorshaha aan ula imid ee aannu rabno in aan ugu diyaarino in ay dhaxlaan tallada ummada Soomaaliyeed ee u baahan cid hoggaanka u qabato misna ka soo saarta hogga dheer ee ay ku jirto muddada dheer.

Ujeedka iyo qorshuhu wuxuu ahaa in la helo 500 oo wiil ama ugu yaraan 200 isku aragti ah loona leyliyo saraakiil ciidan oo markii loo baahdo dalka xukunkiisa qabsan kara.

Si looga sii xijaabto Shiinaha oo faro kulul kula jira Geeska ama in uun uu qorshe labaad ugu noqdo madaxda maqaarsaarka ah ee Soomaalida Koonfureed haddii ay ka leexdaan jidka loo jeexay in ay ku maamuulaan ummadda.

Waxaan ka soo dhoofay anigoo ku hungoobay isku daygaygii. Inkasta oo aanan hawsha keli ku ahayn sidoo kale ay dedaallo kuwan la mid

ah ay ka socdeen Djibouti, Itoobiya iyo Sudan. Mar danbe ayay gabadh af-hayeen u ahayd wasaaradda arrimaha dibedda ee Maraykanku ay shaacisay in lagu guulaystay qorshe Soomaalida loogu dhisayay ciidamo xirfad leh.

## Qaybtii 6-aad

Waxaa la iigu soo hambalyeeyay sida hagar la'aanta ah ee aan u wado hawlaha ururka. Iyadoo la iigu bushaareeyay in la i siin doono mashruuca qaybtiisii hore oo ay ku baxayso lacag dhan 5 malyuun oo doolar sannadkiiba wuxuu socon doonaa ilaa 2022-ka inta laga gaadhayo. 2.5 malyuun Hargeysa ayaa lagaga hawlgelayaa, 1.25 Muqdisho iyo 1.25 malyuun oo Garoowe ah ayaa loo qoondeeyay.

Paul wuxuu iga rabaa in Soomaalida laga maydho diin Jacaylka. Wuxuu yidhi Soomaalidu waa dad diintooda difaaca xataa iyaga oo aan ku dhaqmin. Dadka dhaqankaas leh way adag tahay in laga lib keeno. Mashruucu waa inuu talaabo talaabo u tirtiraa

dhaqankaas wanaagsan ee ay Soomaalidu leeyihiin.

Waxaanu xarumo ka furnay Hargeysa, Muqdisho iyo Garoowe. Dadka dhullalkaas ku nool ma dareensana waxa aanu la nimid waxaanay noo soo dhaweeyeyeen sidii dad soo kordhiyay curin cusub.

Markii hore waxaanu doonay in aanu u bixino mashruuca 'maanfur bulsho', ha yeeshee magac bixintaasi markii aanu u dirnay ururkii way nagu diideen oo waxay sheegeen in ay kicin karto dad badan oo sas ka qaba soo dhoofinta wax kasta oo cusub.

Waxay nagula taliyeen in aanu ula baxno "Geediga bulsho-san". Waxay yidhaahdeen erayga 'bulsho-san' ayey ku qanci doonaan oo waxay u qaadan inaad wanaagooda wadaan. Ha yeeshee, qolo wax is-weydiin badan ayaa su'aal ka keeni 'geeddiga', xaggee dadka loo

rarayaa ayay odhan, waxaad ku tidhaahdaan xagga san. goortay ogaadaan waa mar aynu fushanay danteena oo iyaguna aanay dabaqaban Karin dhaawaca dhaqan ee soo gaadhay.

Sannadkii koowaad ayaanu qabanay hawshii u horaysay oo si weyn ayey bulshadu u soo dhawaysay. Lacagta waxaa la noo soo mariyay ha'yaddaha waddanka jooga. Inta ugu badan waxaanu ka qaadan jirnay ha'yadahaas caalmiga ah iyagu lacagta nama siin jirin ee waxaa noo soo marin jiray shirkaddaha shidaalka oo mashruucan maalgelintiisa lahaa. Waxay doonayaan in bulshada loo sii bisleeyo sidii ay u aqbali lahayd khaniisnimada, quumuluudnimada, ilxaadka iyo dhaqan kasta oo bidix oo lid ku ah dhaqanka suuban ee Soomaalida.

Soomaalidu dhaqannada bidix ma aqbali

karaan oo dil iyo dagaal bay ka xigaan, kaas ayaa la rabaa in la oggolaysiiyo oo ay caadi u arkaan. Mar baan is idhi weydii madaxdii aann u shaqaynayay su'aal ahayd: miyaan Soomaalida lala ganacsan karin iyadoon la beddelin dhaqankooda. Ma weydiin, mar danbe ayaan ogaaday in ay qayb ka tahay nidaamkooda. Meel na ma maalgeliyaan ilaa ay dhaqan dooriyaan ama ku qasbaan in ay qaataan dhaqannadooda bidix iyo dhaqaalahooda ribbada ku dhisan.

Waxaan hoos nafta ugu sheegay malaha Shiinaha ayaa kuwan dhaama. Shiinuhu maalgelinta uu bixinayo shuruudo dhaqan kuma xidho, xagga dhismaha iyagaa uga wanaagsan Afrika marka reer galbeedka la barbardhigo. Shiinuhu hal iin ah ayuu leeyahay taas oo ah in aanu lahayn awood ciidan oo uu ku difaaca danihiisa iyo danaha dawladdaha soo dhawaysta bal eeg uun Suudaan,

Neyjeeriya iyo Itoobiya waxa ka dhacay mashaqo.

Guushaa aan guddaha ka gaadhnay ka dib ayaa la igu soo casuumay shir ka dhacayay Nairobi. Shirku wuxuu daarnaa sidii wax la isaga weydiin lahaa sirta nidaamka Somaliland oo guurtida ah iyo sidii doorashooyinka ay guusha ka gaadheen looga faa'idaysan lahaa in ay noqoto fursad bulshada lagu qaybin karo.

Guurtida cadaawad weyn ayay u qabeen oo waxay aaminsan yihiin in ay tahay golle lagu kala babdaaday oo nabadda ka shaqeeya.

Waxay soo jeediyeen in dacaayad lagu furo si marka danbe sirtooda loogu dhaxal wareejiyo si fudud loona doorto sida wakiillada oo kale. Waxay is tuseen haddii ay taa ku guulaystaan in ay luminayaan xikmadda loo aasaasay gollaha guurtida. Ta doorashooyinka waxay soo direen in daraasad laga sameeyo si loo

abuuri karo aragti cusub abuuraysa in beello kala guulaystaan. Soomaalida dhexdeedana beel u adkaysan karta in laga badiyay way adag tahay. Daraasaddaa waxaa maalgelisay ha'yadd ay astaanteedu ahayd laba qof oo iska soo horjeedda oo ka hawlgali jirtay waddanka.

Shirkaa waxaan usii dhaafay London oo aan ku soo qaatay bil nasasho ah. Markaan soo dhoofayay ayaan cagta soo geliyay xaruntii ururka, waxay igula kaftameen in Soomaalidu tahay dad adkaysi badan oo asal ah oo ay adag tahay in la beddelo.

Wuxuu ii sheegay waqtigii gumaystaha in ay u yimaadeen Afrika oo inteeda badan muslim tahay haddana si dhibyar ayaanu u doorinay. Soomaalidana dhowr qof mooyee waanu ku guuldaraysanay in aanu dhaqankooda ka kaxayno.

## Qaybtii 7-aad

Kulan sannadeed kasta waxaan u keenaa toddobo ilaa sagaal khaniis. Mid ama laba ayay ka gartaan oo ay ku furaan buuq yar oo aan ka badnayn saddex cisho -marka danbena sida xunbada ayuu iska degaa buuqaasi, anaguna hawshayada ayaanu iska wadanaa. Keenista Quumu-Luudka waxaanu uga dan leenahay waa in aanu ubadka soo koraya uga dhigno tusaale ay ku daydaan.

Kulanno hoose ayaanu ugu diyaarinaa in ay dhallinyarta kula hadlaan, waxaanay u jeediyeen hadallo u badan dhiirigelin ay dhallinyarta ku farayaan in ay jabiyaan darbiga dhaqanka, fikirka duugga ah iyo wax ay ugu yeedhaan dib-u-socodnimada. Waxay ku

beerlaxawsadaan maskax furnaada oo aqbala waxa cusub si aydun dunida cusub ula jaanqaadaan.

Qof, laba ilaa saddex waanu doorinay ilaa hadda, waxaase aanu khaati ka taagannahay dhowr wadaad. Berg ayaan habeenkii danbe ka helay isagoo ku jira bartiisa Skype. Cabaar ayaanu is xaal waraysanay, markii danbe ayaan u sheegay waxa naga haysta wadaado caqabad ku ah mashruucayaga. Berg isma dhibin ee wuxuu igu yidhi kuwaa 'laambadoodii' way bakhtiday ee ha ka baqan.

Wuxuu yidhi, waxaanu nahay qoom sahan dirta marka ay dan leeyihiin iyo markasta oo ay dal ku duulayaan. Waqtigii aanu qorshaynay in aanu dumino khilaafadii Islaamka ayaanu sahan u soo dirnay nin oday ah oo caqli badan. Wuxuu safar ugu baxay caasimadii Islaamka ee Qunusdandiiniya, intii

aanu magaalada gelin ayuu la kulmay caruur badan oo duleedka magaalada u joogta tartan.

Mid ooyaya ayuu ku yidhi, Adeer, maxaa kugu dhacay ee aad la ooyaysaa. Wuxuu ugu jawaabay, toban leeb ayaan ganay oo mid ayaan la waayay halkii aan shiishayay. Odaygii wuxuu ku yidhi oo sagaal baad la heshee maxaa kaa oohiyay, wiilkii yaraa ee muslimka ahaa wuxuu yidhi, gamuunkaa tobnaad ee aan la waayay waxa ku badbaadaya cadowga islaamka, taas baan ka ilmaynayaa.

Halkii buu odaygii sahanka ahaa ka soo noqday oo sheegay in aanay dhawayn xilligii la qabsan lahaa khilaafada Islaamka. Isla odaygaasi waqti danbe ayuu soo noqday sidii si la mid ah ayuu arkay wiil yar oo ooyaya, markuu weydiiyay wuxuu ka ilmaynayo, wiilkii wuxuu u sheegay inuu waayay gabadh uu

jeclaa. Markaas ayuu sahankii noo sheegay in la gaadhay waqtigii la dumin lahaa khilaafada Islaamka-sidii baana aanu ku burburinay ilaa magaceeda la waayay cid soo qaada.

Wuxuu iigu daray in ay waqti dhawayd koox gaallo ah ay ku sheegeen culimo Islaam ah. Waxay soo mariyeen dhowr wadan oo Islaam ah cid garata ayay waayeen. Markaas ayaanu garanay in ay bakhtiday 'laambadii' dunida muslimka u baxaysay. Hadda, way lacag jecel yihiin oo wax badan oo saamayn ah malaha ee ha u joojin ayuu si cad iigu yidhi.

Waxaan weydiiyay bal inuu kuwii hore iiga waramo. Berg wuxuu igu yidhi waqtiga ayaa igu yare nimankaasi waa xoog aan ku nasan weynay. Waqti ayaaanu doonay in aanu sixir ku soo aasno Masar. Diyaaraddii siday sixirka ayaa si lama filaan ah ugu dhacday Siinaay. Waanu garan waynay waxa soo riday. Soddon

sanno ka dib anagoo dhacdadaa baadhayna ayaa magaalada Sharmasheekh uu nin kuwaa hore ka mid ahaa noogu sheegay inuu diyaaradda soo riday wadaad Soomaali ah oo ducadiisii kaga adkaaday sharkii aanu wadnay.

Wuxuu Berg sidoo kale ii xaqiijiyay in urrurka dhexdiisa ay kor u kacayaan awoodda xubnaha xagjirka ah ee doonaya in aanu Soomaaliya la wareegno 2020. Wuxuu yidhi Ordogan ayaa 2011 shimbir u noqday Soomaalida isagoo si fudud ku kala daadiyay qorshihii degsanaa. Haddase damaca lagu doonayo in Soomaaliya dib loogu qabsado rag cadhaysan baa miiska soo saaray.

Waxay doonayaan in ay dunida tusaan in Soomaalidu soo celin kari wayday amnigii oo ay hanan weyday dawladnimadii. Sidaana lagu qanciyo ummadaha ilbaxa ah in Soomaalidu

isku talin waydee ay haboon tahay in loo taliyo. 60,000 oo askari oo UN-ta ah ayaa hawshaa loo diyaarinayaa marka loo baahdo in qorshahaa la fuliyo waxaa ka qaybqaadanaya Ingiriiska, Maraykanka iyo Faransiiska.

## Qaybtii 8-aad

Waa markii ugu horraysay ee ururku guul la taabto ka gaadho hawlgalladii dhaqan ee aan guddaha ka fuliyay. Madaxii ururku iigu soo hambalyeeyay sida hawlkarnimada iyo nafhurida leh ee aan u dhaqaajiyay hawlo sideetan sanno u taagnaa gacan guddeed. Paul ayaa sidoo kale ii fidiyay casuumad mahadnaq iyo maamuusid isugu jirta oo la iigu qaban doonno jaziirad ku taal Kareebiyaanka.

Annoo farxad iyo qab ii siyaaday ayaan u dhoofay jaziiraddii la igu casuumay. Addis Ababba ayaan sii maray, waxaan muddo saacaddo ah aan ku hakaday Dubai halkaas oo kullan aan kula qaatay ergay uu Berg igu soo xidhay. Ergaygaas oo magaciisu ahaa Sir

William Don ayaa isugu kay sheegay inuu ka tirsan yahay oo uu madaxna ka yahay waaxda dhaqanka Micult oo ah shirkad khubaro ah oo qaadata qandaraasyada lagu dad-gedinayo deegaamada laga helo saliida qaydhiin oo ay Soomaalida qudheedu ay ku tahay hodan.

Sir William wuxuu ii sheegay in ay heleen qandaraas dahabi ah oo la doonayo in laga fuliyo dhulka Soomaalida intaa aan la gaadhin xilliga loo qoondeeyay in la soo saaro shidaalka qorshaysan 2024-ka. Wuxuu ii sheegay in isaga iyo aniga ay na midayso hal yool oo mid ah laakiin inoogu kala suntan mabda' iyo manfac.

Wuxuu igu yidhi, "adiga waxaa kaa shaqaysiinayaa waa mabda aad aaminsantahay ee aad la wadaagto walaalaha Dark Marrow, halka annaga uu na wado damaca saliida qaydhiin ee ceegaagta carrada Soomaalida."

Wuxuu i siiyay aqoonsigiisii waanu iga tagay isagoo ii sheegay in mashruuca qiimaynta wejigiisa hore uu bilaabmayo sannad ka dib markaas uu iiga baahan yahay gacan uu ku guto shaqada uu ka qaban doonno dhulka Soomaalida. Waan ka guddoomay, si kedis ah ayaanu u kala dhaqaaqnay Sir William.

Waxaan sii watay safarkaygii aan ku beegsanayay jaziiradda Barbados. Diyaaraddu waxay ku duulaysay joog sarre oo dhammaa 14,000 ft xawaare sarrena way ku socotaa. Hawada oo adag darteed diyaaraddu gariir ayay samaynaysay taas oo ii diiday in aan si raaxo leh u seexdo iyadoo ay hurdo badan i hayso.

Hadba kursiga anoo iskala bixinaya ayay gabadh qurxoon oo ku labisan dharka hablaha adeegtooyinka ka ah diyaaradda ayaa cod dhedig oo debecsan igu tidhi, 'mudane, adoo

mahadsan u toos hadiyad ay kuu soo direen walaalahaa Dark Marrow.' Markaan madaxa kor u soo qaaday si degdeg ah ayaan arkay gabadha dhoollacadaynaysa oo ila dul taagan xeedho cad oo uu dul yaalo ubax yar oo cas, mindi iyo buug yare madow ah.

Waan ka guddoomay waxaan ku idhi, 'yaa iigu kaa dhiibay', waxay tidhi, 'walaaladaa' waan ku hal celiyay anigoo doonaya in aan ka xaqiijiyo shaqsiga siday, waxay igu tidhi, 'Lawrence', waxaan sii weydiiyay oo waa kuma Lawrence, waxay tidhi, 'waa kaptanka duuliyaha koowaad ka ah diyaaraddan aan saarannahay.' Su'aal danbe ma weydiin ee annoo anfariirsan ayaan ku idhi waad mahadsan tihiin labadiinuba.

Markay tagtay waxaa agtayda soo fadhiistay nin dhar madow iyo muraayad madow xidhan oo ah dhallinyar xooggan oo muuqiisa aanad

garan karin inuu afartan jir yahay iyo inuu ka weyn yahay. Markii hore waxaan keli ku fadhiyay qaybta VIP-da diyaaradda oo badanaa leh afar ilaa lix kursi oo dad khaas ah loogu tallo galay. Ninkan iyo xaaladan igu soo biirtay ba jawigayga ayay beddeleen.

Buuggii ayaan furay annoo cabsi iyo argagax nafseed dareemaya. Bogga koowaad waxaa ku taal magaca ururka 'Dark Marrow' oo ay hoos taal sumadooda maska iyo lafta dhuuxa madow u taagan oo isku talaab ah. Bogga labaad ayaan u dhaafay waxaa ku qoran "blood brothers" oo far cas oo sida dhiig da'aya u qoran. Waxaa sii korodhay cabsidii aan qabay iyadoo ay korodhay neefta iga gurmaysa iyo garaaca wadnayga oo xoog u shaqaynaya.

Ninkii kursiga agtayda fadhiyay ayaa igu yidhi, 'aad baad u neef tuuraysaa ee ma waxaa jira

dhibaato, wuxuu sii raaciyay ii sheeg aan ku caawiyee.' Ta la yaabka lahayd ayaa ah inuu hadalka iigu sii daray, "waxaan agtaada u fadhiyaa in aan ku caawiyo." Weedhaa danbe ayaa iiga dhignayd waran la igu dhuftay. Annoo qarsan kari la' cabsida ayaan ku idhi, 'mudane wax walba way wanaagsan yihiin.'

Wuu sii jeestay, anna buuggii ayaan soo rogay bogga saddexaad oo ay ku qoran tahay Hambalyo. Waxaa maskaxdayda ilbidhiqsigaa ku wareegaya ma waxay kugu hambalyaynayaan guushii aad guddaha ka gaadhay. Waxaan doonay in aan sii ogaado sabbabta si degdeg ah ayaan u soo rogay boggii afraad mise waxaa ku taal derajada 23 ayaa laguu dalacsiiyay ee degdeg u kor salaanka.

## Qaybtii 9-aad

Indhahaygii ayaa galka ka soo baxay iyagoo ay caajis geliyeen la yaabka ku xeeran habeenkan madow ee aan dhex socdo hawada madow ee aan u socdo mustaqbalka madow. Intii aanan ka dhammaan boggaas ayaan qoomameeyay wixii ciyaarta i soo geliyay, waxaa i werwer geliyay halista ku xeeran noloshayda iyo jidka qodxaha badan ee aan qaaday oo aan ogayn waxaan mudan doono.

Waxaan hore u maqli jiray albaabada qaar haddii la isku furo in aan dib looga noqon ee uu midba mid kale kuu sii dhiibayo Ilaa aad gaadho meel aan noqosho jirin. Tii baa hortayda taal oo caawa ii sawiran.

Ninkii igu wehelinayay goobta VIP-da ayaa mar kale igu yidhi aan ku caawiyo anna si asluub leh ayaan uga cudurdaartay in aanan u baahnayn kaalmadiisa. Boggii shanaad ayaan usii gudbay, waxaa igaga soo baxday mahadhadan kooban oo u dhignayd sida tan "waxaa kuu furmi cilmiga maamulka dhulka hoose iyo raadaynta nafta hoose." Kii lixaad ayaan jeedaaliyay waxaa ku xardhan "waxaa lagu siiyay furayaasha wax fududeeya."

Boggii toddobaad ayaan sii akhriyay anigoo xiise yari igu jiro, waxaa igaga soo baxday "afartan habeen ayaad u soomi sirtan oo aad subaga iyo oonta xoolaad ka dheeraan." Naftu jecelaa in ay ogaato waxa laga qariyay. Siddeedaad waxaa ku qoran "kelinnimo ayaad ku korsanaan buur korkeed." Bogga sagaallaad ayaa lagu muujiyay "waxaa kuu yimaad kaalmayso oo ha kurban."

Intaas markaan akhriyay ayaa haddana dareenkaygii kacay oo aan laba bogleeyay. Ninkii ayaa intuu soo jeestay igu yidhi, "waxaan diyaaraddan u saaranahay in aan kugu kaalmeeyo in aad ka gudubto darajada dhexe oo fuusho salaanka sarre ee urrurka waxaan ahay walaal Ben Solomon oo darajadiisu tahay 33 kana tirsan Dark Marrow."

Markaas ayaa wadnihii hoos ii dhacay, isna wuxuu yidhi Paul ayaa iga codsaday in aan ku caawiyo, dartaa ayaan uga imid shaqooyin badan oo aan gacanta ku hayay adiga ayaanan muhiimada koowaad aan ku soo siiyay.

Solomon ayaa igu yidhi, 'is daji, isagoo garabka i haya, ayuu ii raaciyay aayar neefso haddana aayar qaado.' Sidii ayaan sameeyay, waxaan waqti yar guddaheed aan ku helay deganaansho. Wuxuu ii bilaabay sheeko

isagoo buug yarihii madoobaa iga qaaday.

Si fudud ayaad u koraysaa salaanka oo aad ku helaysaa derajada. Solomon wuxuu ii sheegay in buug yarahani ka kooban yahay 13 bog oo bog kastaa farriin kooban xambaarsan yahay. 21-sanno ka hor ayaan derajadaa dhaafay waayo waxaan ka soo jeedaa qoyska aasaasay ururkan. Adna haddii aad doonayso in aad guul nolosha ka gaadho waan kaa caawinaynaa.

Guul kastaana waxay u baahan tahay 'sadqo' in wax loo huro - hurida u weynina waa dhiiggaaga oo aad bixiso.

Markaad ku qanacdo in aad derajadan gaadho mindida ayaad ku saraysaa suulkaaga bidix, dhiigga ka yimaad ayaad ku saxeexaysaa bogga saddex iyo tobbnaad ee buug yarahan adoo dhex dhigaya ubaxa gudduudan oo u taagan 'jiraha qarsoon' ee kuu kaalmayn

doonna. Baddaas markuu ila galay ayuu argagixii mirtay laabtayda. Isna sidii oo uu akhrinayo naftayda ayuu igala hadlaa waxaan hoos isku leeyahay waaba sidii qof igu lamaan.

Beri danbe ayaan ogaan doonnaa inuu ka mid ahaa dadka la hadla qareenka nafta. Iyadoo ay xaajo igu cakirantahay ayuu i siiyay fursad aan kaga badbaaday qoolkii aan madaxa kula jiray. Wuxuu igu yidhi waxaa sharci iyo shuruud noo ah in aan nafna lagu dirqiyin wax aanay diyaar u ahayn. Bartaas ayaan Solomon ka codsaday in aanan ruuxiyan diyaar u ahayn in aan derajadan koro, isna wuxuu iigu bushaareeyay in la sugayo ilaa waqtiga aan is daahirinayo.

Gabadhii cid u yeedhay iyada oo aanay jirin ayay intay soo gashay ay dib u qaaday xeedhadii iyo ubixii, mindidii iyo buug yarahii

saarnaa. Solomon wuxuu igu yidhi iska nafis deeto wuu iska baxay. Halkii iyo keligay ayaan ahaa ilaa aan ka degayo caasimadda dalxiiska iyo raaxada loogu tago Jaziirada Barbados ee Bridgetown.

## Qaybtii 10-aad

Si weyn ayaa la iigu soo dhaweeyay qaybta martida. Waxaa igu sugayay Berg iyo laba dumar ah oo mid ku sawiran tahay maskaxdayda se aanan aqoonsan markii hore. Markay hadashay ayaan aqoonsaday in ay ahayd islaantii Ha'yadda haysatay ee ay gabadhii warbixinta siinaysay. Fajiciso ayay igu noqotay islaantan aan ku ogaa ha'ýaddii ee halkan igu soo dhawaynaysa. Waxay igu tidhi ma i aqoonsatay waxaan ahay Lara, madaxa ayaan ruxay aniga oo aan rabin in ay shakido.

Berg ayaa si weyn iigu bogaadiyay guusha aan soo hooyay, waxaanu ii raaciyay waa sabbabta laguu dalacsiiyay ee adoo ahaa

derajada 21 lagu gaadhsiiyay 23. Waan ku farxay ayaan ku idhi anigoo markii ugu horraysay been ka sheegaya dareenkayga. Wuxuu Berg igu yidhi ma hubtaa, isagoo dareemay in dhoolacadayntayda ay wax ku hoos qarsoon yihiin. Waxaan ku idhi dabcan, waa rag ku tabbabaran akhrinta dareennada qarsoon ee dadka badankoodu gadaal ayaan ka ogaan doonnaa in ay qareenka la hadlaan.

Hudheelka Waves ayaa la ii qaaday, isna si mug leh ayaa la iigu qaabilay. Mid ka mid ah shaqaalaha ayaa ii sheegay in ay habeennimada jirto xaflad qoob ka ciyaar ah oo aniga la igu maamusayo.

Isagoo si weyn ugu faraxsan ayuu yidhi Rihanna ayaa ka heesaysa, haddaan sidaada fursadaa u heli lahaa waxay noqon lahayd taariikh ay iigu han weynaadaan qoyskayagu. Rihanna-da uu la dhacsan yahay aniga agtayda qiimo kama lahayn, isaga se waxay u

tahay xiddig waayo, jaziiraddan waa tii ay ku dhalatay intii aanay caan ka noqon heesaha iyo ciyaaraha qoob ka ciyaarka ee caalamka.

Habeennimadii ayaan hoos usoo dhaadhacay, hudheelku wuxuu leeyahay xeelli badda saaran oo si qurxoon loo diyaariyay. Halkaas ayay Rihanna ka heesaysay. Waxaan is Ag fadhinay Berg oo habeenkaas ii sheekaynayay. Berg ayaa ii sharaxay heesta ay Rihanna qaadayso oo la yidhaa (Man down). Tuducyo ka mid ah ayuu si kale iigu fasiray. Wuxuu yidhi heesaha pop culture-ka intooda badan anagaa samayna waxaanay gudbiyaan fariimahayaga. Maalintaa ka dib si weyn ayaan heesaha waan u fiirsan jiray.

Berg wuxuu iigu calaacalay in ay ku khasaareen dagaalkii ay islaamka ku qaadeen. Wuxuu igu yidhi anagoo doonayna in aanu sawir xun ka faafino dunida islaamka ayaanu

saxaafadda kala dagaallanay. Sidoo kale qaraxii 911 waxaanu ku banaysanay in aanu weerarno 7 dal oo Muslim ah. Waxaan weydiiyay qorshahaas aad ku weerarayseen toddoba dal ma midkii uu fashiliyay baa General Wesley Clark.

Dabcan fashilin lama yidhaa luuqada aanu ku hadalno waxaa loo yaqaan barfaaf oo noogu taagan in aanu qorshayaasha la fulinayo la sii faafiyo si dadka loo baro. Waxaan adeegsanaa filimada, heesaha, buuggaagta, dadka caanka ah oo arrimahaa ka sii hadla.

Toddoba dal ayaanu qorshaynay in la weeraro waa Afghanistan, Ciraaq, Liibiya, Yemen, Lubnaan, Suudaan, Soomaaliya iyo Iran oo ah ta ugu danbaysa ee la weerarayo. Iran markuu Berg ka hadlayay wuxuu adeegsaday intan “Iran is the last nail on the coffin.” Laakiin isku daygaa lagama faa’idin, halkan dadka diinta Islaamka qaadanayaa ayaa boqol jibaarantay.

Guuldarro ka weyn miyaad garanaysaa wixii dadka aad ka doonaysay in ay ka fogaadaan in ay usoo dhawaadaan oo dersaan oo ay galaan diinta Islaamka, wax ka xun ma jirto in dadku qaataan manhajkii aad kala dagaallamaysay.

Waxaan weydiiyay yaa bixiyay amarka lagu weerarayo 7 dal oo Islaam ah. Berg wuxuu igu yidhi waxaa sidaa Na faray 'Big Brother'. Hore uma fahmin wuxuu uga jeedo 'walaalka weyn' mase jeclaysan in aan sii weydiiyo waxaan iska diidayaa inuu iga shakiyo. Waxaan ku idhi siday idiinku suurtogashay in aad Soomaaliya weerartaan.

Berg ayaa ii bilaabay sheekada Soomaaliya, wuxuu yidhi waxaanu ogayn in ay halkaa ka jiraan 'jihaadiyiin jiifa.' Si aanu u toosino CIA-da ayaa qandaraas 121 malyuun oo doolar siisay hoggaamiye kooxeedyadii waxaanay ku

dhawaaqeen in ay la dirirayaan oo ay Maraykanka u dhiibayaan 'argagixisada.' Sidaan doonaynay ayay isku difaacaan oo u dagaallameen kuwii aanu rabnay in ay ka soo baxaan godka, may ahayn qaar yaqaan lahayn aragti fog oo ay ku fuliyaan waxa ay aaminsan yihiin.

Toddoba cisho guddaheed ayay gacanta ku dhigeen dalkii waxanay ku dhawaaqeen Midowga Maxaakiinta Islaamiga. Markaas ayaanu siinay 'go head' Itoobiya oo u dagaallamaysay danahayaga iyo danahooga. Sidaas ayuu ku bilaabmay dagaalku lagamase gaadhin ujeeddooyinkii laga lahaa.

Dunida muslimka guud ahaan waxaa kor u kacay iska caabinta lagala horyimid duulaanka galbeedku soo qaaday. Waxaa ii muuqata in aan guul laga gaadhayn laakiin ma ihi qof tallo laga qaadanayo aniga iyo inta ila aragtida ah lama dhagaysto dardaarannadooda iyo waxay

ka digayaan toonna, ta waxaa lagu socdaa walaalka.

Heestii u danbaysay ayay Rihanna qaaday oo la yidhaa (Fly). Heeskaas ayuu Berg igu yidhi dhegayso oo dhuux. Waan dhegaystay waxaase igu adkaatay in aan wada xasuusto tuducyadeeda. Wuxuu furay khadka tilifoonka waxaanu ku qoray 'Fly Lyrics', heestii ayaa soo baxday, wuu ii dhiibay oo wuxuu igu yidhi maxaad ka fahamtay. Waxba! Ayaan ku idhi, wuxuu bilaabay inuu ii sharaxo.

Heestu waxay falkinaysaa oo ay muujinaysaa guuldarradii walaalaha oo soo dhawaatay iyo iyadoo ka waramaysa werwerka 'Big Brother' haysta.

# Qaybtii 11-aad

Waxaa dhammaanaya saddex qarni iyo sagaal sanno oo dheeraad ku ah oo ay hurdeen ehlu xaqii. Waxaa kor u kacaya dhaqdhaqaaqyada iska caabinta walaalaha. Dunidu markii ugu horraysay muddadaa 309 sanno ah waxay waajahaysaa cabsi ku soo fool leh dumitaanka nidaamkii aannu seeska u taagnay 1717.

Heestu taas ayay ka hadlaysaa, waxay si dadban u sawiraysaa 'Big Brother' oo hadlaya. Dadka qaar ayaan fahmi karin farriimaha tooska ah ee ay gudbinayso jecayl bay kuugu sheegi jecaylka meesha ka muuqdaa muxuu yahay.

Waa tan heestii:

Fly lyrics
Featuring: Rihanna

I came to win, to fight, to conquer, to thrive
I came to win, to survive, to prosper, to rise
to fly
to fly
[Nicki Minaj]
I wish today it will rain all day
maybe that will kinda make the pain go away
trying to forgive you for abandoning me
praying but I think I'm still an angel away
angel away, yeah strange in a way
maybe that is why I chase strangers away
they got their guns out aiming at me
but I become near when they aiming at me
me, me, me against them
me against enemies, me against friends
somehow they both seem to become one

A sea full of sharks and they all smell blood
they start coming and I start rising
must be surprising, I'm just summising
I win, thrive, soar, higher, higher, higher
more fire
[Rihanna - Chorus]
I came to win, to fight, to conquer, to thrive
I came to win, to survive, to prosper, to rise
to fly
to fly
[Nicki Minaj - Verse 2]
Everybody wanna try to box me in
suffocating everytime it locks me in
painting they own pictures than they crop me in
but I will remain where the top begins
cause I am not a word, I am not a line
I am not a girl that can ever be defined
I am not fly, I am levitation
I represent an entire generation
I hear the criticism loud and clear

that is how I know that the time is near
so we become alive in a time of fear
and I aint got no muthaf-cking time to spare
cry my eyes out for days upon days
such a heavy burden placed upon me
but when you go hard your nay's become yay's
Yankee Stadium with Jay's and Kanye's
[Rihanna - Chorus]
I came to win, to fight, to conquer, to thrive
I came to win, to survive, to prosper, to rise
to fly
to fly
[Nicki Minaj - Bridge]
Get ready for it
get ready for it
get ready for it
I came to win
get ready for it
get ready for it
get ready for it
I came to win

[Rihanna - Chorus]
I came to win, to fight, to conquer, to thrive
I came to win, to survive, to prosper, to rise
to fly
to fly

Berg oo ii sharaxaya ayaa yidhi 'Big Brother' wuxuu u yimid inuu guulaysto oo uu dagaal ku dulaysto dadka isagoo gumaysiga dheeftiisa maalaya kuna maamulaya dunida. Markaa heestu waxay cadaynaysaa qolada jihaadiyiinta ee qoriga noo soo qaatay ee doonaya in ay soo celiyaan "khilaafadii Islaamka" waa markaas marka uu soo baxayo 'walaalka weyn' ee aanu u sii gogol xaaadhayno.

They start coming and I start rising

wuxuu beydkani sheegayaa in soo bixistiisii

taagan tahay. Waxaan sii warsaday waa kuma kan soo baxaya, wuxuu iigu jawaabay ninkii noo talin jiray. Waxaan weydiiyay muxuu baydkani ka hadlayaa:

me, me, me against them
me against enemies, me against friends
somehow they both seem to become one

Berg ma jeclaysan inuu ii fasiro baydkaa wuxuu se igu yidhi filo dhiig badan oo daata, mugdi iyo qiiq samada is xidha. Waan fajacsanahay oo waa waqtigii koowaad ee aan gartay jidka khaldan ee aan hayo. Berg wuxuu ii sii sharaxay tuducan hoos ku xusan oo uu iigu fasiray marka culays iyo cadaadis maskaxeed iyo mid jidheed la saaro 'diidmadoodu waxay noqotaa yeelmo'

but when you go hard your nay's become yay's

Waxaan kale oo weydiiyay maxaa loo diyaar garoobayaa, wuxuu Berg yidhi 'maalmihii murugada.' Haddana si degdeg ah ayuu iiga dalbaday in aanu ka baxno masrixii laga heesayay. Waxaanu u kacnay qol hudheelka ka mid ah oo shamac qudha ka shidan yahay. Inta aanu dhexda sii soconay wuxuu ii sheegay sir xaasaasi ah, nasiibdarro se waan ilaabay.

Heesta waxaa ka muuqata Nin ciishoonaya oo maalmo badan xidhnaa oo Aadamaha cadaawad weyn u qaba oo jecel in uu ka aarsado. Nasteexa iyo nacabkaba isku si ayuu u neceb yahay oo uu ula dagaallamayaa. Shaydaan ayaa sifahaas leh laakiin maalintaa ka dib ayaan doonay in aan baadho oo ogaado cidda uu yahay 'Big Brother.'

# Qaybtii 12-naad

Berg wuxuu igu booriyay in aan degdeg ugu diyaar garoobo in aan qaato derajada 23. Wuxuu yidhi waxaa isku xidhan sirta laguu furayo iyo derajadaada, markaa ha dhayalsan in aad marto marxaladaa. Waa afartan cisho oo qudha oo aad ku qaadanayso buur jaziiraddan ku taal oo laguu diyaariyay, haddii aanad ka faa'idaysan fursadan waxay noqonaysaa in aad noqoto oo aannu kuu sii qoondayno bugcad kale oo biyo ku xeeran yihiin.

Saddex cisho ka dib way i soo ambabixiyeen, waxaana la i soo faray in aan toos u booqdo Muqdisho gaar ahaan xerada Xallane oo aan farriin u siday. Farriintu waxay ahayd nooca

aan qof caadi ah furfuri karin (coded message) waxay u baahan tahay cid il-furta (decipher). In aan illo-furo waan xiisaynayay se aqoon uma lahayn, wax ay xambaarsanaydna ilaa hadda maan oggaan laakiin waxaan jeclaa in aan ogaado.

Safar dheer ka dib waxaan soo gaadhay Muqdisho oo burbur iyo dayac badan ka muuqdo. Waa magaalo dunsanayd sannado badan, waxay iin ku tahay kuwa sheegta xadaaradda oo ka gaabiyay in ay gurmad u fidiyaan. Waxay noqotay meel aan nabad ka jirin iyo goob ay ku hirdamaan xooggag damacyo kala duwan ka leh gobolkan geeska.

Muuqaalka guud waxaad ka dhex arkaysaa in aad timid dal la haysto. Marka se aad gasho Xallane oo u dhaqma sida dal ku dhexyaal dal kale goortaas baan annoon is ogayn kor u idhi OCCUPATION IS REAL. Sarkaal lahjadii

Maraykanka ku hadlaya ayaa igu yidhi waa maxay mushkiladaadu, uma jawaabin waxaan isku dhaafiyay kaftan. Ciddii aan u socday ayaan farriintii gaadhsiiyay oo iga gudoontay dhambaalkii.

Waxyaabaha aan ku arkay ee cajabta badan ayaa ahayd goob ay ku jiraan cagafyo D10 ah oo dhulka hoos u qodaya. Waxaan u qaatay kolkii hore in ay diyaarsanayaan dhufayso ciidan laakiin farsamo ahaan way ka duwanaayeen; macdan qodid ayay iigu muuqatay mase hayn wax ii cadeeya. Isha oo qudha ayaan ka arkay waanan iska dhaafay isweydiinteedu se igama hadhin ilaa aan barri danbe oggaaday wixii halkaa ka socday.

Habeennimadii casuumad ayaa la iigu diyaariyay xerada dhexdeeda. Waxaa igu wehelinayay wasiir ka tirsan dawladda ku meel gaadhka ah oo aan magaciiisa liqay. Wuxuu ii

sheegay inuu aaminsan yahay furfurnaanta reer galbeedka oo isagoo laabta garaacanaya ayuu ii sheegtay inuu liberal yahay. Dhaqanka libaraaliyadana waan difaacaynaa, halkana waan ka hirgalinaynaa. Wuxuu ninkaasi ii sheegay in ay jiraan xildhibaanno ka taageeraya in dastuurka si toos ah loogu darro xuquuqda dadka laga tirade badan yahay, xoriyada diinta, fikirka iyo xoriyada jinsiga.

Xoriyada jinsiga markuu leeyahay wuxuu u jeeddaa in khaniisnimada la oggalaysiiyo Soomaalida, halka xorriyada diinta uu iga jeeddo in Soomaaliya aqbasho ilxaadka oo ah kuwa aan qirsanayn jiritaanka Alle, weliba dastuurka qabyada ah in lagu qoro in ay madaxweyne ka noqon karaan dalkan.

Ninkaasi wuxuu ka soo noqday qurbaha kuwa ajendahan dabada kala riixayaana waa qurbojoog. Way adag tahay qofka Soomaaliga nasabka iyo dunta ah inuu fawaaxishkaa

aqbalo.

Wasiirku wuxuu iga balanqaaday inuu ila kulansiiyo xildhibaannadan taageersan in dhaqankan laga hirgeliyo carro Soomaaliyeed. Subaxii aan soo dhoofayay ayaan la qaatay kulan saacad qaatay oo ka dhacay oo na dhex maray.

Xildhibaanku isagoo ii haysta in aan la fikir ahay ayuu afka furtay oo uu wax walba ii sheegay. Wuxuu ku doodayaa in ummaddan ay danbayso oo ay u baahan tahay in la il-bixiyo si ay caalamka ula jaanqaado oo ay u hesho maalgashi iyo aqbalaada bulshada caalamka.

Wuxuu u haystaa in dhaqan burburinta ummadiisa iyo ay isku xidhan yihiin indho sarcaadka dhaqaale ee Reer Yurub gaadheen. Xildhibaan ka mid ah ayaa ku baanay in uu toos ugu difaacay aqlka baarlamaanka

xuquuqahaa diinlaawaha iyo khaniiska. Markiiba uu helay bogaadin badan, lacag badan iyo in la sugay amnigiisa. Wuxuu yidhi hadda waxaa naftayda laga ilaaliyaa dib u socodka.

Wuxuu iigu daray in leeyihiin qorshe ay doonayaan in doorashada soo socota ay ku yeeshaan 30% gollaha baarlamaanka. Isagoo u dhigaya in dadka aaminsan dhaqannada bidix ay ku bataan gollaha, ummadana ay u horseedaan indho-fur dhaqan.

Kullankii markuu dhammaaday ayaan ka soo dhoofay oo aan soo raacay diyaarad UN-tu leedahay oo u socotay Garoowe si aan usoo qabsado hawlo shaqo oo halkaas ii yaalay.

## Qaybtii 12-naad

Garoowe waxaan u imid cilmi baadhis muhiim ahayd oo aan doonaynay in aan ku ogaano ra'yi caamka ama sida bulshadu u fikirayso. Waxa ugu weyn ee aannu daraasaddaa ka rabnay waa in aan oggaano cidda ummadu aaminsan tahay.

NGO maxali ah ayaanu siinay in ay qaadaan daraasadda, inta badan ururada bulshadu ma gaadhsiisna in ay garan karaan khatarta ay leedahay xoggaha bilaashka iyo aqoondarrada ay ku bixiyaan. Intooda badan waxaa u daran lacagta yar misana faro guudkood ah ee ay ka dheefayaan mashruuca loo keeno.

Su'aallo dhowr ah oo aannu dejinay ayay bulshada la dhex marayaan oo soo ururiyeen

jawaabaha ay bixiyeen. Falanqaynta iyo natiijada ka soo baxda jawaabahooga waxaa ku xidhnaa mashaariic waaweyn oo laga fulin doonno laba dal. Waa kuwan su'aallaha muhiimada gaar ah sii lahaa ee aan xiisaynaynay

1. Bulshadu yay aaminsan yihiin
b) wadaada
t) salaadiinta
J) siyaasiyiinta

2. Dacwaddaha yaad ku kalsoon tahay in ay ka garsooraan
b) garsoor dhaqan
t) garsoor dawladeed
j) garsoor culimo

3. Yaad ka qaadataa fasirka nolosha
b) aqoonyahanka
t) culimada
j) abwaannada

4. Yaad ugu kalsooni badan tahay hadalkooda
b) culimada
t) salaadiinta
j) siyaasiyiinta

5. Yaa saamaynta ugu badan ku leh fikirkaaga
b) culimada
t) salaadiinta
j) siyaasiyiinta

Daraasadan waxaanu sidoo kale ka samaynay gobolkan geeska inta Soomaali ku dhaqan tahay oo dhan. Waxyaabaha soo baxay ayaa xiiso gaar ah lahaa. Celcelis ahaan Soomaalidu 80% waxay aaminsan yihiin wadaadka. Way jireen meello faraq yari jiray mase badnayn. Tusaale ahaan Garoowe waxay 65% aaminsan yihiin culimada halka ay salaadiinta aaminsan yihiin 30% siyaasigana 5%. Hargeysa oo kale culimada waxay

aaminsan yihiin 70% halka ay salaadiinta aaminsan yihiin 15% siyaasigana 15%.

Jigjiga way ka duruuf duwanayd Soomaalida kale oo waqtigan daraasadu waxay ku soo beegantay iyadoo cadaadis xoog leh la saaray culimadii haddana dadka jawaabaha bixiyay daraasad si qarsoodi ah loo qaaday waxaa ka soo baxday in reer Jigjiga ay aaminsan yihiin 40% culimada, halka ay 47.5% ay ka noqotay salaadiinta, halka 12.5% ay ka soo baxday siyaasiga.

Jigjiga laguma go'aan qaadan karo maadaama oo uu jiray talis axmaq ah oo cabudhiyay xoriyadii dadka lana dagaalamay culimada. Waxaan isla qaadanay in si xidhan loo qiimeeyo variables-ka cilmi baadhista. Muqdisho 80%, 17%, iyo 3% halka Djibouti ay ka noqotay 75%, 5%, iyo 20%, NFD-Kenya iyaguna sidan ayay noqdeen 70%, 20%, iyo 10%.

Markii aan u diray waxay noqotay daraasad xiiso gelisay rrurka. Waxaa loo saaray khubaro isugu jirta qaar bartay cilmi nafsiga, cilmi bulsho iyo qaar xul ah oo loo yaqaan 'dhisayaasha.' Nalamay wadaagin natiijada iyo siday uga faa'idaysteen. Si weyn ayaa la ii bogaadiyay taas baan ka gartay muhiimada ay u leedahay. Waxaanay ii soo daayeen lacagtii aan dalacday oo dhamayd $35,000.

Kharashka igaga baxay Garoowe iyo Hargeysa Kama badnayn $5,000 ilaa $5,800. Berg ayaa igu booriyay in lacagta aan wada siiyo ururada NGO-yada ee daraasada fuliyay. Markaan u sheegay in aanay lacagta xaq u lahayn ee kharashkooda oo qudha ay leeyihiin ayuu Berg ii bilaabay danta ugu jirta iyo waxay ka damacsan yihiin in ay siiyaan lacagta dheeraadka.

Inta kale ee lacagta soo hadhay waxaanu

ururada u siinaa si aanu laaluushka iyo musuqa u barno. Waxaanu ku nidhaa soo diyaariya warbixintii sida aad lacagta u isticmaasheen markaas bay noo keenaan xisaabtii oo ay isku soo fadhiisiyeen anaga oo og oo raali ka ah in ay cunaan baaqiga.

Marka koowaad waxaanu ku kalifnaa in ay been sheegaan, marka labaadna waxaanu cunsiinaa xaaraan, sidaas ayaanu talaabo talaabo u dilnaa qofnnimadiisa una tirtirnaa wuxuu aaminsanaa ee run iyo xalaal ahayd. Qofka markaas ayuu damiirkiisu doorsamaa iyaguse way moogan yihiin in lacagta aannu siinayno ay tahay dagaal aanu ku burburinayno akhlaaqdooda iyo qiyamkooda.

Ninka dhallinyarta ah ee ka shaqeeya NGO-yadan waxaanu ku barbaarinaa musuqa iyo wax isdaba marinta, markaas waxaan u naqaan madaxdii mustaqbalka ee sumaysnayd. Kuwaa aannu sumaynay markay

madax noqdaan waxay noo sahashaa in ay dalkooda ku hagaasiyaan musuqa anagana ay noo fuliyaan mashaariicda aannu wadano.

Goobahan hawlaha qarsoon lagu hayo dadka NGO-yada lagu barbaariyay waxay ku naanaysaan obedient agents (diranayaal daacadda).

Boqol sanno in ku siman Soomaalidu waxay xoog u aaminsanaayeen salaadiinta. Dhicitaankii khilaafadii Cismaaniyada ka dib waxaa hoos u dhacay saamayntoodii. Ingiriiska oo cuqaal ku sameeyay ayaa diciifiyay, halka dhaawicii u weynaa uu gaadhsiiyay nidaamkii shuuciyada ee dadka qabsaday intii u dhaxaysay 1969-1989. Dark Marrow wuxuu ku taliyay si aaminnaada yar ee ku hadhsan salaadiinta looga maydho waa in la maalgeliyo oo la dhiirigeliyo calaamo saarka salaadiin maqaar Saar ah oo aan cidna metelin.

Bulshadu aakhirka iyagaa iskood ugala noqon aaminnaada ay ku qabaan salaadiinta taa beddelkeeda waa in la aaminsiiyo waxay ugu yeedheen 'liberal elite' oo u noqon doonna indho ay ku socdaan iyo dhego ay wax ku maqlaan. Mashruucaa salaadiinta la iima igman, waxaanse tuhunsannahay in uu meel kale maray oo gacmo kale fuliyeen.

Ururku wuxuu khatar u arkaa halka ay marayso aaminsanaanta culimadu. Waxay soo bixiyeen mashruuc lagula dagaalamayo meeqaamkooda isla markaana lagu kala jarayo aaminnaada dhexdooda taal waa culimada iyo dadka Soomaaliyeede. Waxay soo dajiyeen qorshe fudud oo dib loogu kasbanayo quluubta dhallinyarta soo korayso kaas oo ay ula baxeen (Buy Back Project).

# Qaybtii 14-naad

Hordhaca mashruuca waxay ku soo qoreen "dad meel ku hoggaan xidhan uma jeedin kartid jid kale, kolka u horraysa waa in aad jartaa hoggaankaa." Jarida xadhigu waa inuu u dhacaa hab xirfadiisu sarrayso. Waa in ay ku eedaysnaadaan kuwa laga jarayo dadku, gacanta dhexe ee kala goynaysa dadka iyo culimadu waa in aanay sinaba u muuqan.

Waxaa qarsoon ayaa la ogaaday inuu ka saamayn badan yahay waxa muuqda malaha waa mid ka mid ah sabbabaha Shaydaan ku doorbiday inuu ka qarsoonaado kuwa uu sharka ugu yeedhayo; iyaguna dariiqaas ayay mareen.

Dad culimo ku xidhan way adag tahay in aad

kaxaysato oo aad jihaysaa. Si loo dhiso bulshada cusub ee aynu rabno waa in la helaa dad 'hawadoodu hoggaamiso', halkan waxay u adeegsadaan 'xorriyad'. Xaggooda waxaa isku mid looga yaqaan 'hawada' iyo 'xorriyada'.

Waxaa kale oo ku cad qoraalka nidaamkii shuuciyadu dadka muu qaabayn kareen haddaan laga jarin kuway ku faruur xidhnaayeen oo aan loo saman hoggaan cusub. Shuuciyadu waa agab aynu adeegsano mar walba oo aynu doonayno in bulsho la dooriyo.

Qalabka ugu weyn ee laga dhaxlay tijaabadii shuuciyadu samaysay waxaa kow ka ah awoodda 'dacaayadda.' Dacaayaddu marka la faafiyo waa hub burburin kara aaminnaada dadka. Culimada oo dhowr furimood laga weeraro waxay jaho wareer ku ridaysaa dadka. Kolka koowaad waxaa lagu weerarayaa run dhaliil ku ah, marka xigta run

iyo been isku dhafan iyo ugu danbayn been mutuxan oo aan loo meel dayin.

Waxaa sidaa ku talinaya khubarada mashruuca qortay. Dhinaca kale waxay tixraac ahaan iigu soo direen buugta la kala yidhaa Art of Deception ee uu qoray Max Francisco iyo ka la yidhaa Third Eye: the psychology of submission ee ay wada qoreen lammaanaha Douglas Carrel iyo Martha Carrel.

Buugtani waxay ku barayaan sida loo fuliyo dad doorinta aan la dareemin. Waxaa ku dhex sugan tijaabooyin si qarsoon loogu sameeyay bulshooyin kala gedisan oo caalamka oo dhan ka tirsan. Waana buug la waardiyo oo gacmaha ururka oo qudha ku kooban, looma oggola in uu soo gaadho dadka caadiga ah; waxaana la igu dardaaray in aannu gacantayda ka bixin mar qudha.

Tallaabadii u horraysay mashruucu wuxuu

diyaarinayaa kullanno hoose oo loo qabanayo dadka la dhacsan fikirka ilxaadka, furfurnaanta reer galbeed iyo fufka maanfur bulsho. Kooxahaas ayaa la carinayaa iyagoo laga faa'idaysanayo caadifadooda cusub ee ku dhex gubanaysa. Dooddaha la dhex dhigayo waxaa loogu magac darayaa dabarrada maanka (oo looga jeedo culimada).

Mawduucyada qaar waxaa toos loo cadaynayaa oo waxaa la qorayaa doodda caawa: fahamka nolosha yaa wadaadka u xidhay. Marka caadifadoodu kacdo habeennada hore ayaa marka danbe laga hadlayaa dhaliisha culimada oo run ah.

Halkaa marka ay marayso ayaa baraha bulshada lagu faafinayaa dacaayaddo ka dhan ah culimada oo ay qoreen dad la gunneeyay (paid writers) ama qoraayo been abuur ah oo aan jirin oo aan u naqaan (ghost authors).

Maqaaladii oo daabacan ayaa la soo dhex dhigayaa oo lagu odhanayaa bulshadu waa ay inala aragtaa dabarka inoo muuqda. Intaa ka dib waxaa laga dhex helayaa qaar dhiirran, midhadhkaas ayaa gaar loola baxayaa oo lagu guubaabinayaa in ay hadlaan oo wax ka yidhaahdaan runta ooyaysa.

Muddo yar guddaheed waxaa la helay qaar hadla oo wax qora weliba wax bulshadu berigii hore xeerin jirtay. Waa taa goortuu bilaabmayo dabarfurka bulsho cusub oo dhisan qas iyo fawdo.

Intaa ka dib gadaal ayaan u baxnaa oo daaha dabadiisa ayaanu ka daawanaa silsiladda furantay iyo dacaayaddaha u faafaya sida xawliga ah. Diranayaal badan oo bilaa gunno ah ayaa hawsha qaata oo iskood u qabta shaqo aanay garanayn cid leh iyo cid u diratay toonna. Jahligu qarnigan wuu ka awood badan yahay jahligii hore waayo, waa jahli shahaado

sita. Jaahilku hal aanu ku dhiirran karin ayuu ku dhiirranayaa jaahilka shahaadada dhabarka lagaga qoray ee lagu yidhi 'aqoonyahan' baad tahay - aqoonyahanka sabbankani waa jaahilka runta ah marka looga qiyaas qaato lunsanaanta.

Hawshaa aanu bilownay farahayaga way ka baxdaa waxaanay noqotaa tusbax furtay oo ay cid weliba soo gasho. Ciyaartuna waxay sii dhabaqdaa marka culimada iyo caamadu iska mawjad ka soo galaan.

Dunida aynu ku noolnahay qofka ka gaabiya inuu fahmo sida qayrkii u degaan shaxda way adag tahay inuu isna la dhigo. Midka aan garanayn sida khiyaannada loo gunto miyaa fahmi karaa sida loo furo. Ka aan arkayn tabtuu u dhaqaaqo sharku miyaa raadguri karaa xalka shifadiisa. Qofka aan aqoon sida wax loo lumiyo miyaa fahmi kara tabta wax loo hanuuniyo. Nafta ay Aayad u noqon wayday

gudcurku miyaa ku cibro qaadan kara xujada iftiinka.

Kuwa u nisba sheegta sida loo dhiso bulsho cusub ayaa ka marag kacaya awoodda Qur'aanka ku sugan. Wuxuu mid ii qiray in Aayadda ka hadlaysa Hubinta Warka ee ku cad suuratul Xujuraat ay dawo iyo ka hortagba ka tahay dacaayad iyo idaylkeed.

Bulshada xukunkaa iyo xikmaddaa haysata lagama lib keeni karo, wuxuu se kadabkood go'ay maalintay ka jeesteen. Waana marka ay jabeen ee aannu si fudud uga guulaysanay.

Marka qalbigii dhintay ayay ummadaasi hurdo dheer galeen, mana baraarugi karaan inta badan dadka noocan u seexda in aad toosisaa way adag tahay gargaar Alle oo u yimaad mooyee!

## Qaybtii 15-naad

Wadaadka Soomaaliga ah wuxuu u baahan yahay inuu waaqici noqdo oo uu barto ciyaarta qayrkood ay ciyaaraan iyo shaxda ay dhigaan kuwa sharka faafiyaaa.

Haddii aanay sidaa samayn ma difaaci karaan ummadda ay hormoodka u yihiin iyo manhajka ay u taagan yihiin toonna islaamku waa xigmad ee waa in la helaa cid xambaarsan xigmadaa.

Qur'aanka haddii aan la helin dawlad fulisa oo ku dhaqanta lama helayo nolol quruxsan oo xigmad ku dhisan. Ta la ilaalinayo in aanay dhicin waa taa, waxayse u eeg tahay in waqti dhow aan la joojin karin maadaama oo la toosiyay ehlu xaqii, xaqiina yimid mar labaad.

Waxaa na soo gaadhay qaylo cusub oo ka imanaysa gacanka Cadmeed, Baabul Mandeb iyo badweynta Hindiya oo ay ka dilaacday budhcad baddeed. Arrintaas ayaa xiiso gelisay naftaydii, waxaan raadiyay in aan war ka keeno. Waayo, waxaan oggahay in ay ka mid tahay ciyaar cusub oo la rabo in ciidamo lagu keeno badda Cas.

Si aan usoo xaqiijiyo ayaan tigidh degdeg u goostay Rome (gaar aahan Vatican City). Halkaa waxaa deggan ragga bixiya tallooyinka amniga ee dunida ugu khatarsan. Xoggaha xaasaasiga ahna iyagaa laga helaa.

Vatican City dad baa u haysta in ay tahay magaalo diimeed balse waa meel lagu go'aamiyo siyaasaddaha caalamka, dhaqanka iyo dhaqaalaha. Kaydka dahabka ee ugu badan adduunyadu wuxuu yaalaa halkaas.

Waxaan la kulmay qolo aanu saaxiibo dhow nahay oo la yidhaa Startrek oo ay macmiil u yihiin shirkaddaha amniga ka shaqeeya ee ay ka mid yihiin Blackwater, Saracen, P10bullet iyo qaar kale oo badan. Tom Kawasaki oo ah khabiirka baddaha u qaabilsan shirkadda ayaa igula balamay maqaaxi bun oo la yidhaa Italiano 360.

Waxaan weydiiyay Tom waxa soo galay baddii casayd? Wuu dhoolla cadeeyay, ka dibna si deggan ayuu u yidhi arrimo amni maaha hawshaasi ee waa shaqooyinkii Club of Rome ay ku hawlnaan jirtay, maxaad aniga iga soo raadisay. Waxaan ku idhi waxaan u haystay hawlgallo amni, cabbaar ayaan wada fadhinay waanan ka soo tagay anigoo xog fiican ka soo helay.

Waan isaga dhoofay Taliyaaniga waxaanan hawlo shaqo u tagay Kuwalampur, Malaysia. Hudheelka Seri Pacific ee xaafadda Jalan

Putra ayaan degay. Waxaan la kulmay Chia Zum oo ahaa la taliye dhaqaale oo iga caawinaya sidii aan lacag maalgashi ah uga heli lahaa HSBC Bank.

Lacagtan waxaa ila doonaya ururkayga oo raba in ay isoo geliyaan ganacsiga. Anna raali kama ihi ee iyaga ayuun baan qancinayaa. Berg ayaan habeenkii wada xidhiidhnay oo iga waraystay in aan qaatay lacagtii ay ii qorsheeyeen. Waxaan weydiiyay arrimaha ka soo cusboonaaday badda Cas.

Berg wuxuu yidhi, arrimahaasi way ka sarreeyaan wax aan ka hadli karo. Halkaas ayaan ku dhaafay, kamase hadhin ilaa aan oggaado ciyaarta meesha ka socota iyo cidda wada.

Internetka ayaan baadhitaan ka bilaabay. Markii ba waxaa isoo jiitay Mucamaral Qadaafi oo UN-ta horteeda ka cadaynaya in aanay jirin

budhcad baddeed ee duulaan lagu yahay kheyraadka Soomaalida. Doodda Qadaafi waa suurtogal waana Nin wax badan ka og dunida qarsoon iyo qaabka la isku mu'aamaradeeyo. Hawshuse waa duulaan ka weyn kheyraad. Waxaan doonay in aan wax ka sii oggaado sabbabta ciidamada intan leeg ee weliba heegan sarre ku jira ay u joogaan badda.

Judhiiba waxaa muuqatay in aad loo buunbuuniyay qadiyada budhcad baddeedka. Waxaa wararka ka saari waayay saxaafadda caalamka, waxaa laga qoray in ka badan boqollaal buug oo ay qoreen qoraayadii ugu saamayntaa badnaa: piracy at sea, new laws at sea.

Tiro ma laha buugta laga qoray, UN-ta ayaa qaraar ka soo saartay in ciidamo la geyn karo. Waxaa isoo jiitay oo xiise weyn lahayd arrin ka timid barre ku takhasusay luuqadaha oo la yidhaa Prof Tommy ayaa bartiisa Twitter-ka ku

soo qoray intuu soo qaatay sawir markab dagaal oo weyn iyo laash yar oo Soomaali AK-47 la saaran yihiin ayuu yidhi "waxaan difaacayaa adeegsiga luuqada ee lagu xadgudbayo; kee baa budhcad baddeed ah Markabka weyn iyo laashka yar."

Dunida aynu maanta noolnahay wixii la doono ayaa dadka la aaminsiiyaa. Kama hadhin baadhitaankii waxaan helay General Patonov oo ka tirsan sirddoonka dibedda ee Ruushka (FSB) ayaa warbixin uu siiyay madaxdiisa oo ay daabacday mareegta wikileaks.

Warbixintaa waxaa lagu sheegay in ay halkaas ka soo baxayso "cadow dunida khatar ku ah, taasna ay tahay waxa laga hortagayaa." Waa maxay cadowga la sheegayo ee dunida beddelayaa. Yaab! Malaha waa cadow male-awaal ah oo danno kale ka danbeeyaan.

Hadal tiraduna ma yara waayo, dadyow badan ayaa xiisaynaya in ay oggaadaan sabbabta ciidanka xooggaas leh uu u joogo bad yar oo badda Cas oo kale ah oo ay ku meersan yihiin dawladdo awood ahaan burburay sida Yemen iyo Soomaalida, gaar ahaan Somaliland.

Jaziiradda Soqotra ayaa baadhitaan ka socdaa. Qolo ayaa ku odhanaysa waa stargate, waa portel to another world, qolo kale waxay odhanayaan cadaab ayaa meesha ka soo baxaysa oo waxaa jira dilaac. Mararka qaar ayaa warar badan oo been abuur ah la sameeyaa si loo lumiyo ujeeddada dhabta ah. Waxay tahayba waqtiga ayaan qarin doonin.

1980-kii ciidamada Faransiiska ayaa arkay mawjad xoog badan oo badda hoosteeda ka bilaabmatay. Ka dib markay muddo cilmi baadhis ku wadeen ayay noqotay wax ka baxsan awooddooda cilmi ka dib waxay u qayshadeen ciidamada badda ee Maraykanka

ee Marines-ka loo yaqaan. Isna baadhitaankii ayuu ku bilaabay dilaaca badda hoostiisa ka socda ee Faransiisku u bixiyay Vortex. Waxay leeyihiin waa albaab ka furmay gunta hoose ee badda.

Arrintii ayaa ka qaroweynaatay Maraykanka qudhiisa markaas ayuu ka soo qaybgeliyay Yurub iyo Ruushka. Ruushkuna wuxuu usii yeedhay Shiinaha iyo Japan oo baadhitaanka wax ka bilaabay. Hadda hawlgalkaa midowga Yurub wuxuu u sameeyay ciidan baddeed ooo gaar ah oo ay ugu yeedhaan Atlanta operation.

Ma cadda Sabbabta ay midowga Yurub ku doorteen magaca Atlanta, laga yaabaa in ay ula jeeddaan wadamada ku teedsan badweynta Atlaantiga, waxaase jirta sheekooyin laga soo xigto magaalo dahab ka samaysnayd oo ku qarsoontay badda lana rumaysan yahay in ay mar soo bixi doonto oo

loo yaqaan 'the lost Atlantis.' Atlantis dhanka dunida muslimka marka laga soo akhriyo waxaa loo yaqaan 'Iram' oo Qur'aanka ugu jirta "Irama-daatil cimaad" ama Cimaad dheh. Cimaad oo ahayd magaalo reer Caad ah oo uu dhisay boqorkii reer Caad ee la odhan jiray Shaazid Cimaadudiinkii labaad.

Waxaan dhulka ka dhisayaa ayuu yidhi 'jannadii siddeedaad', markaas ayuu dahab iyo fido ka dhisay magaalo qurux badan. Waxay ku taalay meel u dhaxaysa Maydh iyo Cadan oo waxaa ku sii hakan jiray ganacsiga fooxa, beeyada iyo dahabka ka yimaad Ophir.

Ophir oo la tuhunsan yahay in ay Sanaag tahay.

## Qaybtii 16-naad

Sidii aan baadhitaannadaa u xiisaynayay ayaa la igu soo casuumay shirkii world economic forum ee ka dhacayay magaalada Davos ee Switzerland.

Shirka inta badan waxaa yimaada madaxda caalamka waxaana lagaga hadlaa dhaqaalaha caalamka iyo duruufaha ku gadaaman. Waxaase garab socda shirar doceedyo lagaga hadlo arrimo badan oo aan la rabin in saxaafaddu ogaato ama ay usoo baxdo dibedda.

Waxaan fadhiistay miis lagu gorfaynayay arrin xaasaasi ah. Waxa miiska la soo dhigay in ay jiraan dad adduunka ku nool oo aan qaadan "RIBBADA" sidee bay u dhacday in nidaamkeenu ka hirgeli waayo dhulkaas.

Dadkaas culayska ay nagu hayaan ma qaadi karno, waayo, waa dad samadda laga aqbalo. Waa in aynu kala dagaallano ducadaa laga aqbalayo oo aynu ribadda cunsiinaa. Waxay la isla afgartay in loo wareego miiska siddeedaad.

Miiska siddeedaad ayaanu fiidkii fadhiisanay. Waxaa nagu soo biiray koox cusub oo ka socota Round Table iyo Bilderberg Group. Waxay farta ugu yeedheen World Bank iyo IMF xubno metalayay, concept note la sii qoray ayaa gacanta laga saaray waxaana la amray in lacag badan la geliyo dhulkaas inta ka horaysa 2012-ka.

Waxay ku jawaabeen in dhaqaalaha adduunku khalkhalsan yahay laakiin gobolkaa geeska Afrika in ay tahay 'battle ground' la isku waajihi doonno Shiinaha iyo xulafadiisa oo soo farogeliyay.

Kullankaas ka dib waxaan u dhaafay Djibouti oo la iigu sii diyaariyay gabadh aan ku guursado. Gabadha waxaa sii diyaariyay koox aannu ehel nahay, waxaanu guurkayagu ahaa nooca loo yaqaan (arranged marriage).

Meherkii iyo aqalgalkii wuxuu ka wada dhacay hudheelka Kampiski oo ahaa mid markaa farta laga qaaday oo cusub. Jecaylkaas cabsi baa ku lammaanayd oo kuma niyadsamayn waayo, ma ahayn mid ku yimid dookhayga iyo doorashadayda.

Waxaa ururka dhexdiisa ka caado ah in la isku dhiso xubnaha ka tirsan Dark Marrow ha yeeshee gabadhan iima cadayn in ay ka mid tahay. Shaki ayaa biyo dhigay laabtayda oo noloshaydii guur ee farxadda ahaan lahayd ayaa isu rogtay cidhiidhi. Waxaan bilaabay in aan xidhiidhadayda ka qarsado xaaskayga. Markaan ka soo baxay bishii dahabiga ahayd ee guurka ugu cajiibsan ayan dalkii ku noqday.

Waxaan arkay xildhibaannadii baarlamaanka oo ka dooddaya waa la keeni karaa (baananka ribbada) ku shaqeeya iyo lama keeni karo. Goortaas ayaan dareemay in dhagartii la soo dhigay ay si xawli ah u shaqaynayso. Waxaa la isku hayaa waa nidaamka dhaqaale ee 'ribbada' ku dhisan, halka dadku yihiin muslimiin ay diintoodu xaaraantimaysay ganacsiga 'ribbada' ku sal leh. Wareer horleh ayaa ka bilaabmay.

Wadaaddada ayaa khudbadihii Jimcaha ku duray 'ribbada'. Isku daygaas koowaad ma guulaysan laakiin hirgelinta nidaamka 'ribbadu' waa mid cid kale rabto oo ay dabada ka riixayso.

Waxaan dhex galnay ra'yiga dadku waxa ay ka qabaan. Qolooyin badan way diidan yihiin, qaar dayaysan ayaa odhanaya wadaadku horumarkeena ayuu ka soo horjeeda. Wadaad horumar hortaagan ma jiree cadaab iyo naar

ayuu kaaga digayaa. Fahamka lunsan haddii la sii faafiyo wuxuu keenaa fitan iyo burbur. Dunida muslimka nidaamka dhaqaale ee 'ribbadu' wuu ku faafay si weyna wuu u aafeeyay bulshadii waana waxa burburin kara iimaankooda.

Bilo kooban dabadeedna waxaa guddaha Soomaalida soo galay lacag faro badan oo ay soo daayeen baanka adduunka. Xaddiga lacagtaas ayaa looga gol leeyahay in Soomaalida oo aan jeclayn maalka in la jeclaysiiyo. Si ay hadhow si fudud ugu saxeexaan kheyraadka badan ee ku duugan dhulkooda.

Bilowgii adduun jacaylka ayaa halkan ka furmaysa. Waxaa la taliyayaal iyo mashaariic badan lagu bixiyay dawlad u eekayaasha laga abuuray dhulka Soomaalida dhexdeeda.

Kooxo aan badnayn ayaanu samaynay oo qurbo joog u badan kuwaas oo la siiyay lacago ay ku bilaabaan ganacsiyo yaryar. Ganacsiyada yaryar waa kuwa dhaqan oo la rabo in ay bulshada u qaabeeyaan si ka duwan sida ay u nool yihiin. Waxaanu ganacsiyadaa u naqaanaa Agents of change.

Waana biriijka dhaqan ee u dhaxeeya galbeed iyo waqooyi. Inta badan ganacsiyada la maalgelinayo shuruudaha lagu xulanayo waxaa ka mid ah in ay ugu magac daraan meheradaha reer galbeedka. Magacyada Carabiga iyo Soomaaliga lama soo dhaweeyo lamana aqbalo. Erayada (Al) meherada ay ugu horrayso il gooni ah ayaa la igu eegi jiray.

Waxaan galnay qorshaynta hawlihii dhaqan ee aan hore u waday. Doorkan waxaanu xoogga saarnay in kor loo qaado dhiirrigelinta waxqorista. Qoritaanku waa hub awood badan oo dunida lagu beddelo. Muhiimadu waa waxa

la qorayo ayaa saamayn togan iyo mid tabban ku yeelan kara akhristaha. Waxa ugu weyn ee aannu raadinayno waa in la helo qoraayo qora liberal literature toos uga hadlaya dareennada jinsiga.

Taas oo keenaysa in da'yarta ay sumowdo garashadoodu oo ay wasakhowdo quluubtoodu. Helida cid fulisa iyo hirgelinta mashruucaasi waa mid aannu siinay ahmiyadda koowaad; waxaase noo muuqda in uu yahay mawduuc ay adag tahay in dad sidan u gob ah laga dhex fuliyo.

Qodobkaasi wuu nagu adkaaday waana lagu dhici waayay in loo badheedho. Sidaa darteed waxaa loo wareegay in la xoojiyo heesaha oo ay fududahay in faririmahaas lagu faafiyo.

# Qaybtii 17-naad

Dhallinyar badan ayaa fanka jecel oo ku xidhan. Waana qalabka lagu jihayn karo bulshada, waana middi laba af leh oo siddii la doonno loo adeegsan karo. Soomaaliduna waa ummad asalkeedu ka soo jeedo Carrabta oo jecel fanka iyo suugaanta. Qofka doonaya inuu saamayn weyn ku yeesho qofka Soomaaligaa waa inuu fahmaa inuu u mari karo dareennada fanka.

Fanka Soomaaliguna waa mid akhlaaq ku dhisan marka laga reebo hal meel oo aannu u aragnay in laga geli karo. Waa heesaha oo aan lahayn dhaqan togan oo wanaagsan bulshaduna aanay aragti fiican ka haysan. Anaga oo aan fulin hubaynta fanka ayaan degdeg ugu baxay magaalada Nairobi oo la

igu soo casuumay shir ka hadlaya aayaha qarannimada Soomaalida. Kaas baa ahmiyada la siiyay, sidii ayaanan ku ambobaxay.

Shirka oo ahaa mid 'High Profile' heerkiisu sarreeyo waxaa fadhiyay khubaro badan weliba nooca bulshooyinka qaabeeya. Luuqada Ingiriisida waxaa loogu yeedhaa khubaradaa 'social engineers.' Soomaalida iyo dunida muslimka way ku yaryihiin dad sidan u diyaarsan ama waxaa la odhan karaa maba jiraan qof sidan u hawlgeli kara.

Qof kasta oo ka tirsan xubnnahaa social engineers-ku waxaa la baray aqoonta anthropology, astronomy, astrology, Numerology, history, psychology, sociology, theology, linguistics, politics, economics iyo philosophy. Waa dad muddo badan lagu soo tabcay oo ka soo warami kara qaybaha kala duwan ee cilmiga iyo falaga la xidhiidha. Qoladaasi waxay yidhaahdeen Soomaalidu

tallada qudha ee lagu qaybin karo laguna diciifin karaa waa qabiilka. Qabiilka oo si u ah awood u ilaalisay nasabkooda oo maanta dunida ka tirtirmay ayaa loo adeegsanayaa si xun; si ay hadhow u nacaan qabiilka jiritaankiisa. Waa dhagax laba shimbirood lagu wada dilayo; mid laga qaybinayo iyo midka danbe oo ah in isirkooda iyo nasabkooda lagu burburiyo.

Marka la nacsiiyo si fudud ayaa looga dhaqaajin karaa, marka laga dhaqaajiyana sideena ayay noqonayaan bilaa nasab dad bilaa nasab ahina malaha jiritaan suggan cid kasta oo aan lahayn jiritaan sugan ayaa u nugul in la dhaqan dooriyo.

Taas baa keentay in nidaamka cusub ee fadaraynta (Federal) lagu dhiso qabiil. Tan oo looga dan leeyahay in ay soddon sanno oo kale ku jiraan dawakhaad iyo isdaba wareeg. Ta kale waxay ka fikireen in aan qabiillada isku

abtirsiga ah aan lagu ururin hal maamul goboleed laakiin in mid kasta lagu badhxo dad kala abtirsiin ah oo kala ab duwan. Taas oo keenaysa muran joogto ah oo ka jeedinaya midnimadooda iyo dhismaha awooddooda.

Sidoo kale faa'idada u weyn waa in maamul goboleed kasta gaar looga fushado danaha iyo kheyraadka ku duugan dhulkooda. Mid walba mida ku xigta ayuu ku noqonayaa cadow. Waxay ku danbaynayaan inta ay xusayso heestan aad moodo in ay sii saadaalinaysay suurada danbe ee ay Soomaali yeelan doonto.

golle golle ka duday

Gobol gobol ka go'ay

Geed labada dhinac

Qofba geed hadhsaday

Heestaa Hanuuniye ku luuqeeyo iyo arrinta halkan lagu qorshaynayo ayaa isku kay yimid. Iyagoo eegaya xiddigaha ayay go'aamiyeen in 2016-ka ka hor in la dhammaystiro dhismaha nidaamka federaalka. 2017-ka hadday gaadho ayay aaminsan yihiin inuu dhalanayo xiddigii Soomaalidu. Waa sabbabta wax walba degdeg loogu hawlgalay.

Ma jirin mufekar Soomaali ah oo qaabaynta ummadooda qayb ka ahaa amase wax laga weydiiyay. Waa markii koowaad ee aynu daawadayaal ka noqonayn masiirkeenii mustaqbalka oo horteena lagu wareemayo.

Mar la isla soo qaaday sumadaha la dul sudhayo maamulada la dhisayo ayaa la isla qaatay in buluuga baal laga soo geliyo. Waxay ku dhawaaqayeen 'blue is a magic power.' Dawladda federaalka Soomaaliya calanka u saaran ee buluuga ah ayaa ah sixir ummada dul sudhan. Shirkaas ayaan ka soo fahmay

inuu midabkaasi u taagan yahay barwaaqo sooran (commonwealth) ka dhaxeeya ummadaha adduunka ku uuman. Soomaaliyana ay tahay meel loo haysto in ay tahay kaydkii Aadanaha oo ay ka mamnuuc tahay in ay cid gaar ahi sheegato. Buluugu wuxuu astaan u yahay wax kasta oo la wada leeyahay; UN-ta, FIFA, EUFA, OLYMPIG iyo ha'yaddaha badan ee caalamiga ah.

Damaca in Soomaalidii Talyaanigu gumaystay dib loogu kala daro Itoobiya iyo Kenya rag baa meesha soo dhigay. Waxay yidhaahdeen way shaqaysay aragtida laga dhaxlay aqoonta maamulka ee loo yaqaan change management.

Taas oo qabta fikrada la yidhaa (freezing, de-freezing and re-freezing) oo halkan u taagan gumaysi, gumaysi Ka saar iyo dib u gumaysi (colonization, decolonization and recolonization).

Waxay qabaan oo ay is tuseen in ay shaqayn karto haddii Jubaland lagu daro Kenya in ay u hirgalayso sidii ay u hirgashay NFD 1956. Haddii Itoobiya la siiyo Jubooyinkana ay u shaqaynayso sidii ay u shaqaysay ku wareejintii Hawd iyo reserve area 1954.

Taariikh hore ee dhacday ayay u yaqaanaan tijoobbo guulaysatay, waxaanay aaminsan yihiin haddii mar labaad la hawlgeliyo in ay shaqayn karto. Ha yeeshee aqoonyahannada qaar baa u arka in aanay suurtogal ahayn damacaasi. Waxaa jira sidoo kale rag aaminsan in aanay Kenya lahayn awoodda ay ku fulin karto hawlahaas.

Maraykankana ugu baaqaya in aannu ku eegin dhaxal-wareejinta dhulka Soomaaliyeed Kiiniyada diciifka ah. Maraykanka ayay rabaan inuu toos ula wareego deegaanka Soomaalida waa mid se farsamo ahaan ku adag siyaasadda Maraykanka. Waayo, dunida ayaa

ka qaylin doonta haddii ka weyni uu badheedho inuu ka yar muquuniyo - markaa maaha talaabo uu toos u qaadi karo Maraykanka iyo Ingiriiska iyo cid kale toonni.

Culimo badan oo reer galbeed ah ayaa aaminsan in Soomaalida laga qaado xaqa aayo ka tashiga. Soomaaliduna ay noqoto dadka koowaad ee lagu tijaabinayo in laga xayuubiyo jiritaanka dawladnimo. Sidaa ragga ku dooddaya way badan yihiin laakiin aan soo qaadanno macalin siyaasadda ka dhiga jaamacaddaha Maraykanka oo maqaal uu qoray ku cadeeyay mustaqbalka siyaasaddeed iyo is-maamul ee Soomaalida.

Prof Bill Gardner maqaalkiisa uu ula baxay qorshe-weynaha qaybsiga Soomaalida ayuu intan ku xusay isaga oo qarsan cadaawadiisa:

Grand Strategy: Balkanazation in Somalia. "to take away self determination for the Somali

people is not death but it is dependency". Hadalkan oo u dhacaya in Soomaalida oo laga qaado xaqa aayo-ka-tashigu aanay ahayn dhimasho ee ay tahay ku tiirsanaan ay ku tiirsanaan doonaan beesha caalamka. Waa cadaawad la rabo in la tirtiro nidaamka is-maamul ee Soomaalida oo ah xaq ay Aadamuhu u siman yihiin oo laga qaadi Karin. Soomaalidu waxay noqonaysaa dadkii ugu horreeyay ee xaqaa si toos ah looga xayuubiyo.

# Qaybtii 14-naad

Anoo sariirta hudheelka aan degannahay qadaadka u jiifaa oo feker ku fogaaday ayay farriin ii soo dhacday. Waan soo qaaday koortaydii mise waxaa soo diray Ben Solomon.

Farriintu waa nooca xidhan ee loo yaqaan encrypted message. Waxaan ku soo dajiyay app-ka aan ku furto farriimaha classified-ka ah ee la ilaalinayo in aanay ku dhicin gacan kale ama aan la jabsan.

Farriintu waxay i faraysay in aan ka faa'idaysto habeennada soo socda ee dayaxu yahay saddex iyo tobbnaad, afar iyo tobbnaad iyo shan iyo tobbnaad oo ah saddexda habeen ee awoodda.

Waa habeennada dayaxu ugu tamarta badan yahay. Wuxuu Ben igu boorinayaa in aan habeennadaa aan qaato go'aan kasta oo aan gaadhayo. Talaabo kasta oo muhiim ah waxay qaadi jireen habeennadaa, ma fahmin sirta ku jirta habeennada waase mid raadayn ku yeelatay hab fikirkayga iyo kaydka xusuustaydaba.

Tan uu Ben Solomon danaynayaa waa in aan gaadho go'aanka aan ku qaadanayo derajada 23-naad aniguse iima furna. Derajadaa wax ii diidan mooyee, mar kasta oo aan maqlo cabsi iyo argagax ayaa ku soo dhacaysa laabtayda.

Waxaan ugu jawaabay sarbeeb laakiin isagu wuu fahmayaa. Erayadan ayaan u qoray "the bride is beautiful but she married another man." Intuu qoslay ayuu igu yidhi "rolling stone", oo ula jeeddo ruux rogmanaysa oo aan weli diyaar u ahayn 'initiation.' Ben Solomon

wuxuu ii sheegay in hawlo badan u xaniban yihiin derajada aanan weli gaadhin. Wuxuu igu booriyay in aan nafta ku dirqiyo in ay korto salaankaa oo ay derajadaa qaadato. Tallooyin iga caawinaya ayuu i siiyay mase fullin mid qudha oo ka mid ah waayo, ma jecli in aan noqdo waxay doonayaan in aan noqdo.

Werwer ayaa igu soo xaadiray oo waxaan hiifay waxa aan gacmaha kula jiro. Cod baase ii baxay igu leh “adkayso aad wax badan ogaatide.” Codkan waan garanayaa waa codkii hore iila hadlay ee isla erayadan oo kale hore iigu yidhi waxaa ii sii cadaatay in ay gacmo kale igu shaqaynayaan. Awood aan ku garto ciddaasna ma lihi, waan ka werweray six ad ah, waan yara dawakhay oo hurdo ayaan galay.

Waan riyooday, riyada dhexdeedii ayaa qof dhar cad xidhan igu soo dhawaaday, waan

jeclaystay in aan arko, mase awooddo in aan arko. Wuxuu igu yidhi "ha werwerin hana murugoon uma xumid sida aad is-moodayso, derajadaa ha doonin ma tihid sixiroole ay Alle kala dhinteen." Waxaan ku qayliyay oo haddaa maxaan ahay, maxaan meeshan ka qabanayaa! Iima jawaabin wuu iga tagay. Waxaan hurdadii ka soo booday annoo anfariirsan oo ay ilmadu dhabannadayda qoysay.

Riyadaas aan arkay waxay beddeshay meertadayda nololeed ee aan ku soo qaatay sagaal sanno oo madow. Waxaa ii cadaaday oo riyadu ii fasirtay cabsidii aan ka qabay derajada 23-naad.

Faahfaahin dheeraada se la ima siin. Faham ayaan u baahday, markaas ayaan bilaabay in xog raadiyo. Helida xogtaas oo adag ayaan waqti dheer ku qaatay baadhitaan website iyo YouTube leh, oo buug taariikheed leh,

waxaanse dareemay gaajo xad dhaaf ah.

Waxaan u soo baxay maqaaxida Starbucks oo aan ka fogayn meesha aan deggannahay. Cunto fudud ayaan dalbaday, markaan cabbaar dul fadhiyay ayay agtayda soo fadhiisteen laba qof oo suuradda Oromada leh.

Waan eegayaa, anigoo dareensan in ay aniga ii socdaan waxay bilaabeen in ay Af Soomaali ku hadlaan. Waan yaabay, waan ka shakiyay oo nafta ayaa igu leh adiga ayaa laguu soo diray. Markaan dareenkaygii wada siiyay oo aan si badownimo leh u eegayo ayuu mid ku yidhi kii kale 'iiga warran sida sixirka loo barto'

Cabsi ayaa wadnuhu i garaacay, waa maxay nimankan ka hadlaya waxaad maanta oo dhan baadhaysay. Sirddoon ayaan u qaatay og oo dabagal ku hayay wixii aan ka baadhayay mareegaha internetka. Kii kale ayaa jawaabtii

qaatay, “kitaabka Shamsu macaarif ayaa dhigaya in qofka ka dheeraado duxda iyo oonta xoolaha”, kii kale oo ka guraya ‘haye’, deeto ‘40 maalmood ayaad buur saarnaanaysaa oo aad wax akhriyaysaa’, haye ‘markaas ayuu kuu imanayaa wax suurad aad ka naxdo leh’, haye ‘markaas ayaad gelaysaa heshiiska lagugu barayo sixirka’, cabsi ayaa wadnuhu ii garaacayaa si xoog leh, nafta ayaa haysa.

Waan sii argagaxay, deeto iyagoo hal mar kor u qaadaya codkooda ayuun bay yidhaahdeen ‘waxaa HOOGAY ka SIXIRKA cilmi mooda; saaxir kasta abaalkiisu waa Jahannama.’

Way kaceen oo dhaqaajiyeen. Dhidid waaweyn ayaa iga soo daatay. Waxaan garwaaqsaday in hab kale oo sarre la ii siiyay xog aan orod iyo ayaan ku la’aa. Culayskii ayaa iga dagay waxaanan aqoonsaday in wixii ay aqoonta iigu sheegayeen uu ahaa ‘sixir’.

Qalbigayguna uu ahaa ka mar walba ii digi jiray ee diidanaa in aan dariiqaa qaado haddii aad raacdo waxa qalbigaagu kuu sheegayo ma lumaysid ayaan kor iyo hoos u idhi.

Lacagtii ayaan bixiyay, talaabada ayaan hoosta ka soo xaday annoo baallo daymoonaya oo cabsi yari igu wareegayso. Waxaan soo istaagay reception-kii hudheelka si aan furaha uga qaato.

Mid isna furre lu'laya ayaa ku hadaaqaya "Alle; wuxuu habeen iyo maalin walba uga digaa madowga iyo iftiinka dhexdooda mase arkayaan, addoomihiisa farriimaha tooska ah ee uu usoo diro maaha qaar fahmaya oo ku cibro qaata; laba kastaa digniin bay sidaan!"

## Qaybtii 19-naad

Furihii ma qaadan ee waan kala jeedsaday oo halkii albaabku iga xigay ayaan abbaaray. Waxaan sii maqlayay gabadhii oo soo leh mudane furahaaga, maanse jaleecin. MasterCard kaygii ayaan haabhaabtay oo waxaan kiraystay hudheel kale. Habeenkaa cabsi iyo amakaag ayaa miranayay laabtayda oo hurdo maan ladin. Waxaan aaminsanaa in saacaddii la doonno albaabka la soo jabin karo.

Markaan xasilli waayay ayaan Berg u diray farriin email ah oo aan leeyahay "sir, I need safe exit. Urgent!" La iima soo jawaabin taas oo igu sii kordhisay argagaxii iyo baqdintii. Habeenku dheeraa oo shanqadhu badanaa

marka aad cabsi dareemayso. Waxaan doonay in aan mar ka baxo hudheelka oo aan fadhiga la igu qaban. Go'aan qudha waan ku calool adaygi waayay, laba boglayn ayaa wehel ii noqday, habeen anigoo soo fadhiya ayuu iigu dhammaaday, argagaxna waa ii dheeraa.

Aniga oo rafaaday oo aan waxba ku noolayn ayuu waaggii dilaacay. Naftaydii oo didsan ayaa tilifanka ka balansatay flight. Nasiib xumadayda waa la ii waayay diyaarad baxaysa. Waxaan ku waashay waa Emergency. Cid i dhagaysanaysaa ma jirto, waxaan raadiyay wakiilkii arrimaha socdaalka noo fududayn jiray ee Nairobi fadhiyay.

Wuu iga qaadi waayay tilifoonkii, waan ku celceliyay, lama heli karo markuu yidhi wax igaga xanuun badnaa ma jirto; wuu xidhan yahay markuu yidhi wadnahaa i istaagi gaadhay.

Waxaan u qaatay ciyaar uu igu bilaabay ururkii. Waa habeen cimrigayga ka go'an oo dhaawac u geystay caafimaadkayga. Goor ay xeedho iyo fandhaal kala dhaceen oo aanay naf igu jirin ayaa la ii soo jawaabay. Waxay ii sheegeen in aanay waxba jirin anna waan qariyay dareenkaygii aniga oo aan aaminsanayn dajintooda. Waxay i siiyeen assignment cusub oo Muqdisho ah.

Berg ayaa ii soo sheegay in diyaarad uu wato sir William Don ay iga qaadi doonto madaarka Jommo Kenyaata oo aan la qabto wax kasta oo uu iiga baahdo. Aniga oo aan dharkaygii ka doonnan hudheelkii ayaan qabsaday taxi Uber ah oo i geeya madaarka.

Sir William ayaa si weyn ii soo dhaweeyay, wuxuu ii soo fiiqay koob uu khamri ku shubay waan ka cudurdaartay oo waxaan u sheegay in aanan cabin. Isagoo ila kaftamaya ayuu

yidhi, 'ka aan cabin ka mid maaha dadyowga ilbaxa ah.' Kuma jiro ayaan ku idhi il-baxa.

Waxaan weydiiyay oo aan ku idhi mudane kullankii Dubai shaw sannad baa ka soo wareegay, aniga oo u raaciyay hawlihii shidaalka ma bilaabaysaan.

Sir William ayaa iigu jawaabay, 'dan baa ka soo hormartay' waxaan ku celiyay 'dan ka weyn miyaa tii aad doonayseen', sir William ayaa ku gaabsaday, 'Aadamuhu weli awood uma yeelan fahamka waqtiga sida aynaan u fahmin dumarka.'

Markasta oo aad aragto inuu mawduuca beddelo waxay ka dhigan tahay waxaanu rabin in uu wax kuu sheego, ma sii jeclaysan in aan dirqiyo.

Waxaan ka soo degnay madaar gaar ah oo ku dhexyaal xero si weyn loo ilaalinayay oo ku

taalay Bengazi, Liibiya. Hore uma tagin Liibiya, waxaan ku idhi maxaad halkan inoo keentay, wuxuu ii sheegay in hawlo kooban uu ka qabsanayo ka dibna aanu u baxayno safarkii Muqdisho.

Diyaaradda yar oo laba injiinka leh ee aan saarnayn markaan ka soo degay ayaan hool midigta iga qabtay ku arkay gaadhi booyad ah oo lagu rarayo wax la yaab iigu muuqday. Ilaa intaan ka libdhayay waan sii jaleecayay.

Cabbaar kadib waxaa tilifoonka noogu soo dhacday security alert na faraysa in aanan saacaddaha soo socda tagin suuqyada Bengazi iyadoo laga cabsi qabo in qarax dhaco. Farriintaas amni sideeda ayaa loogu dhaqmayaa, inta badanna sidaa ay u sheegaan ayay u dhacdaa khatarta laga digayo.

Laba saacaddood ka dib waxaa dhacay qarax xooggan oo gilgilay magaalada Bengazi. Wararkii ayaan furay si aan wax uga oggaado waxa dhacay iyo khasaaraha uu geystay. Tacajab ayaan labada dhaban gacmaha saaray, Aljazeera ayaa ka waramaysa qarax ruxay dhisme warshad sifaysa shidaalka oo ay ku qaraxday booyad laga soo buuxiyay waxyaabaha qarxa ee TNT ka mid tahay.

Hadhaagii booyada ayaa iila eekaatay tii la rarayay ee aan ku arkay hoolkii mase xaqiijin karo. Fiidkii markaan isku nimid sir William Don ayaan si sarbeeban u weydiiyay in qarax la sameeyaa dantiina geli karo.

Sir William ayaa igu yidhi, 'weligaa talaabada in kugu filan qaad', madaxa ayaan ruxay annoo u muuqda arday eddeb badan. Markaas ayuu ii furay sheeko gaaban oo badannaa hanaan sarbeeb ah u dhacaysa. Wuxuu igu yidhi, "we create the chaos and then we move

it to capitalize on that chaos." Kolkaas ayaan si toos ah u idhi, 'markaa wixii maanta dhacay faa'ido ayaa ku jirta anigoo si dadban u weydiinaya in ay geysteen qaraxa. Sir William wuxuu iigu yidhi isagoo hanjabaad ka muuqato, 'ha ku hafan badweynta siyaasaddaha danta ku dhisan.' Intuu iga dhaqaaqay ayuu igu soo tuuray waxay dantu kuugu jirtaa inuu afkaagu daboolnaado.

Hees ay Hibbo Maxamed Guddoon (Hibbo-Nuura) qaado ayaa igu soo dhacday:

Ha fekerin naftaydaay

Weligaa ha fududaan

Ha u fiirsan waxa dhacay

Jacaylkana ha farogelin

## Qaybtii 20-naad

Sir William ayaa u cawday Berg oo ku yidhi, 'is he trustworthy agent?' Isna wuu dajiiyay oo wuxuu u sheegay in ay kalsooni buuxda igu qabaan oo aan u fuliyay hawlo muhiim u ahaa Dark Marrow. Subaxii ayuu Berg farriin ii dhaafay oo igu farayo in aan su'aalaha ka yareeyo sir William laakiin aan la qabto hawsha uu iiga baahdo. Waxaan ugu balanqaaday in aan mar danbe la iga soo caban. Sir William Don ayaa ii yeedhay, waxaanan u tagay anigoo is dhowraya oo u diidaya inuu dareen khaldan iga qaato.

Sir William wuxuu igu bilaabay nin wanaagsan ayaad tahay ee mid iska jir, dunidan il qudha ayaa la kala hayaa, adna labadii indhood

ayaad furatay. Hortaada uun eeg oo hareeraha ha eegin hana ka dheerayn waqti aad nooshahay. Waxaan kuu diro sideeda u fuli oo waxba ha iska weydiin, Berg ayaa khaldanaa oo waxay ahayd in ay tan kaa sii reebaan (maskaxda ayuu u jeedaa). Siraha aan kula wadaagno cid ha u furin oo ha kugu dhex dhintaan. Madaxa ayaan ruxayaa anigoo isu muujinaya nin u dhego nugul.

Wuxuu igu yidhi orod soco oo bun inoo soo qaad aynu ku sheekaysanee, markaan dhaqaaq u holaday ayuu ii yeedhay haddana wuxuu igu yidhi, 'maxaan kuu diray?' Bun ayaan ku idhi, 'kuuma diran ee biyo ayaan kuu diray ayuu igu yidhi.'

Waxaan ku idhi, 'ma ihi shaqaale kuu shaqeeya ee aynu kala xishoono.' Wuxuu igu yidhi, 'qofka Soomaliga ah qab ayaa isaga jirta isaga oo aan waxba ahayn.' Waxaan ugu jawaabay, 'ma qaadano liidnimada.' William

ayaa isagoo laabta garaacanay igu yidhi, 'Jarmalka iyo Talyaaniga ma taqaanaa sidii aanu uga adkaanay dagaalkii labaad haddaan shaah u dirsado sidaada isma soo taagee wuxuu igu odhan Yes Sir! Adna adoo cidlo fadhiya ayaad isla hanweyn tahay.'

Deetana sheeko ayuu halkaa iiga bilaabay wuxuu yidhi Soomaalida sida aannu doonay in aan u bahdilno iyo sida ay resilient (geed-adayg) u yihiin isma leh. Maraykanka ayay noogu yimaadeen markaas bay masaajido badan dhiseen waanu la yaabnay.

Yurub sidaa si leeg ayay kiniisadihii baayaceen. Waxaanu isweydiinay waa maxay dadkani? Ta ugu yaabka badnayd waxay tahay Toronto, Kanada ayaa mudaharaad ka dhacay. Soomaali ayaa mudaharaadkii kaga dhex dhawaaqaya "dhulkan waa lagu soo kala horreeyee lama kala laha." Kelmadaas ayaa shock nagu noqotay. Dad qaxoonti ah oo la

soo dhaweeyay waa ciddii ugu horraysay ee waxaa ku hadashay, waxaanu ka baqanay in ay kiciyaan dadyowga hurda ee aanu halkan maamulno.

Shir degdeg ah ayaa laga galay. Waxaa la is tusay haddii aan dadkan wax laga qaban inay dadka soo galootiga ah kicin karaan. Waxaa la isla qaatay in arrintaa laga hortago oo dacaayad lagu furo qoomiyada Soomaalida. Markiiba waxaa la bilaabay in la beegsado Soomaalida oo si gaar ah loo fadeexadeeyo.

Tv-ga ayaa laga furay dacaayadan Soomaalidu waa dad dib u dhacay oo danbiyadu ku badan yihiin, hablaha ayay cadaadiyaan iyo waa cawaan aan integration (falgal) la samayn karin qoomiyadaha kale.

Caruurtoodii ayaa dugsiyadii wanaagsanayd loo diiday qaar lagu eedeeyo waa rabshad badan yihiin iyo qaar maskaxda laga dilo oo si

been abuur ah loogu sheego in ay qabaan xanuunno nafsi ah (post traumatic disorder) oo aanay la jaanqaadi karin waxbarashada. Xaqiiq ahaana Soomaalidu way maskax furan tahay. Dacaayadihii iyo caddaadiskii waxaa ku saaqiday arday badan waxaana batay danbiyada ay galaan dhallinyarta Soomaalidu marka loo eego qaxoontiga kale.

Madaarrada ayaa lagu dhibi jiray qofka loo garto Soomaali, passport kuu doono muu sito waa in la bahdilaa. Waa qorshe aanu u dajinay in lagu wiiqo oo hoos loogu dhigo hanka sare ee qofka Soomaaliga ah oo ah noqotay caqabad.

Sir William intuu sheekadaa iska xidhay ayuu ii bilaabay sheeko kale. Waxa maanta aan halkan u joogaa maaha shidaal ee kheyraad ka weyn ayaan baadhayaa. Wuu sii watay hadalka oo wuxuu yidhi maaha markii koowaad aan halkan imaad waase markii

labaad. Wuxuu yidhi waqtigii UNISOM; ayaa madaarka Baydhabo oo xarun u ahaa shaqaalihii gargaarka waxaa si kadis usoo weeraray General Maxamed Faarax Caydiid. Ciidamadiisu waxay qaateen koombiyuutaradii lagu shaqaynayay. Koombiyuutarada waxaa lahaa shirkaddaha shidaalka iyo macdanaha.

Hal koombiyuutar ayay ku jirtay xog xaasaasi ah oo ka hadlaysa mulkigii Sulayman (Solomon Treasure Mapping). Waa nebbi Sulaymaan (cs) maalkiisa kan uu ka hadlayaa. Waxaan weydiiyay oo maalkaa Sulaymaan miyaydaan Qudus ka helin waqtigii aad qabsateen.

Wuxuu yidhi Qudus caasimaddiisii ayay ahayd laakiin waa laga qaaday maalkii geeridiisii ka dib. Ha ilowsiin intuu yidhi, ayuu ii sii waday hawshii koombiyuutarka. Wuxuu yidhi koombiyuutarkaas iyo xogta ku jirta waa laga seexan waayay. 48 saacadood ka dib ayaa la

qorsheeyay in ciidamo gaar ah loo diro. Waayo, waxaa ku rakiban GPS tracking si fudud loo heli karo halkuu yaalo. Isku daygaas wuu fashilmay oo ciidankaasi xabad badan iyo iska caabin ayay la kulmeen.

Fashilkii dhacay wuxuu keenay fawdo iyo niyadjab horleh. Waxaa la doonay hab kale oo xogta lagu soo furdaamiyo. Xalkii waxaa loo arkay in koombiyuutarkaa lagu soo qaado sixir iyadoo la adeegsanayo jin la diranayo.

Saaxirkii ayaa hawlgalay isna wuu ku rafaaday inuu soo qaado waayo, nin salaad xaafid ah oo weysadu u xidhan tahay ayaa ka ag dhow koombiyuutarka. Jinkii wuu awooddi waayay inuu ka ag dhawaado, way gubanayaan mar kasta oo ay isku dayaan.

Saaxirkii wuxuu yidhi markuu ninkan nagu gudban meesha ka fogaado ayaan soo qaadi karnaa. Markuu salaaddii subax la adimay ee

ninkii saalixa ahaa masaajidka tagay ayay suurtogal noqotay in la soo qaado. Waxaan weydiiyay oo jinku alaab ma soo qaadi karaa, William wuxu iigu jawaabay kuwa aan salaadda tukan wuu ka soo qaadi karaa.

Koombiyuutarkaas hadda anaa gacanta ku haya. Waan yaabay oo waxaan idhi ma kii jinku soo qaaday ayaa gacantaada ku jira. Haa, intuu yidhi ayuu gacanta i qabtay oo ii kaxeeyay dhinaca qolkii uu degganaa.

Markaan guddihii galnay ayuu igu yidhi, 'mar kasta oo la furo koombiyuutarka jin ayaa soo xaadira oo daaqadaas dabayl wareegaysa ayaa ka soo gelaysa ee ha baqan.' Waxaan ku idhi 'Anigu meel jin joogo ma fadhiyi karee, dibedda ayaan u baxayaa markaad xogta ka dhammaysato ii yeedh.'

Waa si wanaagsan intuu yidhi, ayaan anna dibedda usoo baxay. Albaabka ayaan istaagay

inyar ka dibna waxaan maqlay dabayl xooggan oo qolkii wareegaysa iyo ninkii oo cabaadaya oo aad u qaylinaya. Intaan is xajin kari waayay ayaan albaabkii guddaha u galay annoo cabsoonaya.

## Qaybtii 21-naad

Waxaan arkay ninkii oo kor loo qaaday oo cunaha la hayo wax hayana ma arkayo. Isagii ayaa gacantiisa iigu ishaaray bax, dabayshii ayaa intay qolkii ku wareegtay ayaa anoo arkaya ay ka baxday daaqadii, William dhulka ayuu ku dhacay. Cabbaar ayuu nasanayay oo uu neefta iska gurayay, indhuhuna waa casaadeen.

Markii danbe ayuu igu qayliyay maxaad ii dilaysay. Waan ku naxay oo waxaan idhi maxaan galabsaday oo aan dhibay. Wixii igu yidhi anna shuruudihii mid baan ka tagay adna waxbaad akhriday uu ka gubtay. Ka dib wuxuu igu yidhi miyaad i sharqooshay oo maxaad akhriday.

Waan dafiray in aan wax akhriyay laakiin waxaan ka qarinayaa in aan Aayatul Kursi akhristay. Aayaddaas ayaa gubtay jinnkii, maalintaa ka dib ma dayn ilaa aan akhristo. Waxaanan ka dareemay deganaansho iyo xasillooni dheeraad ah.

Aayatul Kursi waxay noqotay hub aan kula dagaalamo cadowgayga iyo sharka qarsoon. Sir William wuxuu igu yidhi, 'iga tag oo habeen danbe isku keen keen.' Waayahay intaan ku idhi ayaan qolkaygii tagay.

Habeenkaa baqdin, cabsi iyo khaakhaayiraad ayaan ku gaadhay habeenka qaybtiisii danbe, daaha dhaqaaqaba waxaan moodayay jinkii; Aayatul Kursi markaan xasuustay ee aan akhriyay ayaan nafisay oon seexday.

Sir William ayaa habeenkii danbe kullan casho ah iigu yeedhay isagoo danaynaya inuu igala

sheekaysto qandaraasyo ay wadaan iyo mustaqbalka dalkan. Wuxuu bilaabay sida adduunyada ay saliidda qaydhiin ugu noqotay wax lagu tiirsan tahay. La'aanteedna dhaqaalahu wuu burburayaa, maadaama oo ay sidaas muhiim u noqotay waxaa la isla gartay in la qorsheeyo isticmaalkeeda.

Qorshuhu waa in barriga dhexe la isticmaalo 80 sanno oo ka soo bilaabmatay 1940 ilaa 2020. Halka 80 sanno ee xiggana la dajiyay in la soo saaro kheyraadka saliidda ee ku kaydsan geeska Afrika oo ay ugu badan tahay ta ku duuggan dhulka Soomaalida, gaar ahaan Somaliland.

Waxaa la gaadhay waqtigii la maali lahaa naaska irmaan ee Soomaalida. Mashaariicda aannu hormoodka u nahay ayaa daarran in dadkan loo bisleeyo sidii ay u aqbali lahaayeen in aannu u beddelno qaabka dadyowga Carrbeed loo qaabeeyay. Sida

dalalka Carrabta waa in loo qaybiyaa Kuwait-yo badan oo mid kasta gaarkeed aannu u baqo-maalno. Qorshayaashaa intooda badan waa la fuliyay ee ka shaqaysiintoodii ayaa noo dhiman. Marka aad aragto Jubaland, Puntland, Hirshabeele, Galmudug iyo Ximin iyo xeeb oo mid kastaa ku dhawaaqdo madaxbanaani, goortaas ayaa qorshahayagu noqonayaa mid midho dhala oo aanu guul weyn ka gaadhno.

Haddase waxaan u socdaa baadhitaan aasaar hore ah, waxaan ku raad joogнaa mulkigii Sulaymaan oo nala soo galay dhulka Soomaalida. Baydhabo waanu ka waynay raad, hadda Muqdisho ayaa baadhitaan ka socdaa weli se cadayn ma hayno. Markaa adiga waxaan kuu dirayaa Qardho ee laba raad ka soo baadh; mid laba doox oo kulmay ayaad goobaysaa haddaad hesho ka ag eeg xabaal kuwii dadkii hore ah oo sagaal mitir dherer leeg.

Waxaan ku idhi, 'meeshii D10 ku jirtay ma maalkaas ayaa laga baadhayay.' Wuxuu iigu jawaabay, 'indhahaaga dabool wixii aan kuu diranana doon, hana arkin wax aadan idan u haysan.'

Warkan uu ii sheegayo wuxuu igu qasbay in aan daraaseeyo boqortooyadii nebbi Sulaymaan (cs) ee cajabta badnayd. Sulaymaan dunida oo dhan ayuu ka taliyay wuxuu maamuli jiray jinka iyo shayaadiinta, dabaysha ayaa u ahayd gaadiid, jinnka nooca Cafaariida ayaa u dhisi jiray qasriyo waaweyn iyo sarro dhaadheer; waxa kale oo ay badda gunteeda uga soo saari jireen macdanta qaaliga ah ee lu'lu'a iyo marjaanka.

Wuxuu ahaa boqor hodan ah oo dahab badan haysta. Awooddaa nebbi Sulaymaan (cs) Rabbi ayaa siiyay, waxaanu ku ducaystay in aan cid ka danbaysa la siin awooddaa culus.

Waxaa igu adkaatay in aan oggaado mulkigii Sulaymaan waxay uga jeeddaan. Ma macdantii xad dhaafka ahayd, mise maamulkii jinnka iyo shayaadiinta, mise tasarufkii Alle siiyay mise intaas oo isku qoofalan ayay raadinayaan. Waa mawduuc culus oo u baahan xog badan iyo lafagur baaxadiisa leh. Markaan baadhitaan kooban sameeyay kolkiiba waxaan la kulmay aragtiyo is-diidan.

Qolo ayaa leh waxay raadinayaan fargalkii nebbi Sulaymaan oo lagu maamuli jiray jinka iyo shayaadiinta madaxa adag, qaar kale ayaa leh waa dahabkii xad dhaafka ahaa iyo qaar qaba inuu jiray buug lagu maamuli jiray boqortooyada.

Kuwa u fog ayaa qaba inuu sixir ku maamuli jiray oo ay iyaguna raadinayaan in ay sixirka bartaan. Arrintaa Qur'aanka ayaa nebbi Sulaymaan (cs) ka bari yeelay, kuwii dadka sixirka baraynа waa jinnka. Intaan cilmi

baadhistan ku fooganaa ayay gaadhay waqtigii aan u dhoofi lahaa Qardho. Garoowe ayaa la iga rabaa markaan tago in aan gaadhi yar kiraysto oo aan gaadho Qardho. Waxaa la baadhayaa waa goddod iyo xabaallo qadiim ah. Jaantus yar ayaan sitaa iyo saacad sheegaysa dhagaxa meesha yaal nooca uu yahay iyo GPS ku siinaya jihooyinka la beegsanayo.

Markaan halkii tagnay ayaannu helnay dhagax, marka la sawirro ay ka dhex muuqanayso Tawxiidku, dhinaca kalena qoraal kale ayaa ku xardhan (Allaahu Akbar).

Waxaan go'aansanay in aanan u bandhigin Sir William. Markaan ku noqonay waannu ka qarinay fajacisadii aanu la kullanay waxaanan ku af-gobaadsanay in dhigaha iyo loolku ay naga khaldameen.

Sir William ayaa doonay inuu la hadlo qareenkayga markii hore waan sii dareensanaa oo hoosta ayaan ka sii akhrisanayay Aayatul Kursi iyo bisinka oo aan qabsaday, wuu awooddi waayay inuu i akhriyo.

Wuxuu igu yidhi, 'sidan aad imika u shaqayso waad qoommamayn.' Isma lurin ee waxaan ugu jawaabay shaqaale hoosaad kuuma ihi ee aynu is ixtiraamno. Wuu iga tagay isagoo cadhaysan oo leh 'May be you are a mole.'

Kelmadda hore uma maqal ee markaan qolkaygii tagay ayaan baadhay mole = counter spy oo u taagan cidda kugu dhex jirta ee lagugu dhex darsaday si laguu basaaso. Waxaan u gartay nin cadho madax martay oo waan iska ilaabay waxna kama soo qaadin.

Toddobaadkii xigayna waxaa la igu soo casuumay shir ka dhacaya New York oo la iigu

soo casuumay in aan uga qayb qaato khabiir ahaan.

## Qaybtii 22-naad

Inta aanan safarkii u ambabixin ayey xaaskaygii ila soo hadashay. Waxay iga codsatay in aan is aragno, anna waan ka cudurdaartay oo waxaan u sheegay in aan shaqo u baxayo. Way ka xumaatay oo waxay igu tidhi, 'noloshii qoyskaaga waxaad kaga mashquushay shaqo.'

Waxaan ku beerlaxowsaday in aan muhiimada koowaad siinayo iyada, markaan ka soo noqdo Maraykanka aan toos ugu tagayo. Waxay igu tidhi, 'xaq ha u dulmiyin xaq; xaaskaagu xaq bay kugu leedahay ee ha u dulmiyin xaqa shaqada kaa saaran.' Hadalkaasi meel buu i taabtay waxaanan dareemayay in aan qofkaa dulmayo.

Markay dhigtay tilifoonkii ayey sawir ii soo dirtay, markaan furay ee aan isha qac ku siiyay waxaan ku sigtay in aan joojiyo safarkii New York. Dareenno igu qarsoon ayay xadantaysay oo meel fog ayay i geysay in aan ka fikiro. Anigoo aan weli fekerkii dhammaysan ayey farriin kale ka soo daba dirtay.

Farriintu mar waa dacwad naftayda ku socota marna waa garnaqsi, intan ayey ii soo qortay "Don't spend all your time waiting for the right moment, sometimes you just have to go for it." Waan ka garaabay in ay gar ku taagan tahay, waxaanan goostay in aan beddelo qaab dhaqankayga ku aadan lammaanahayga nolosha.

Weligay muddo tobban daqiiqo ah tilifoonka kalama sheekaysan laakiin habeenkan saddex saacadood ayaan u sheekaynayey. Jecayl ayaan dareemay aanan dareemi jirin. Subaxii ayaan ka habsaami gaadhay diyaaraddii

waxaan soo gaadhay albaabkii oo xidhmaya. Waa la ii baryay qoladii diyaaradda, sidii ayaan guddihii ku galay. Waan degdegsanaa anigoo waxba u fiirsan ayaan fadhiistay kursi. Kursiga waxaa hoos taal shandad haween, gabadh qurxoon oo maariin madow xigga ah, oo joog wanaagsan leh ayaa usoo dhaqaaqday dhankayga.

Way isoo jiidatay markaan indhaha ka qaaday, annoo daawanaya oo la dhacsan quruxdeeda waayo, waa hablaha dookhayga ah ee aan jecelahay.

Annoo la dhacsan ayay isoo dul istaagtay ilamay hadal ee farta ayey iigu fiiqday shandadeedii gacanta. Waan uga kacay kursigii oo waxaan fadhiistay kii ku xigay. Intay shandadeedii qaadatay ayay dhaqaaqday, waan sii daawanayay ilaa intay iga libdhaysay. Qof aan aragtidii koowaad ka helay waa gabadhii labaad, tii hore Mall Kigali ku yaal

ayay ahayd oo ma calfan in aan barto. Waxay wadaagaan hal sifo oo isoo jiitay.

Midabkoodii dhaladka ahaa ayay ilaashadeen, gabadh kasta oo midabkaa leh si bay ii soo jiidataa, waanan jeclahay in aan la haasaawo oo guursado. Waxaan nasiibxumaantayda ka murugooday in tanna i dhaafto anigoon baran.

Diyaaraddii ayaanu u kacnay oo aan fuulnay, waxaan ku qornaa qaybta economic class-ka oo dirqi la iigu helay. Markaan fadhiistay ee shandadii dhigtay ee aan koodhka la baxay ee is yar kala bixiyay, ayaa qof ka mida shaqaalaha diyaaraddu uu ii sheegay in kursi maamuus la iiga diyaariyay qaybta business class-ka. Waan soo fadhiistay qaybtii la ii soo wareejiyay, si kadis ah ayay u soo gashay gabadhii aan ka helay oo ay agtayda soo fadhiisatay. Waxaan u farxay si aanan weligay u farxin, waan soo hinqaday si aan usoo dhaweeyo. Haddana nafta ayaa igu tidhi ha

degdegin ee gabadha jaanis sii ay ku nafisto, safar dheer baad wada galaysaan oo marlay waad is baranaysaan e'. Dib ayaan u fadhiistay oo fudaydkii ayaa maskaxdayda ka degay.

Waa gabadh sida danabka ii soo jiidanaysa, jinniyad awood badan ayay leedahay oo qofka arkaa aannu ka jeedsanayn. Diyaaraddii ayaa kacday, markaas ayay iska dhigtay foodad yar oo madaxa u saarnayd. Timo dhaadheer oo qurxoon ayay sii daysay, quruxdeedii ayay qurux ku dartay. Waa quruxdii hablaha Soomaaliyeed iyo qabkoodii oo agtayda fadhida. Markaan cabbaar hawadda ku jirnay ayaan salaamay oo aan ku idhi magacaygu waa kan ee magacaa ma is baran karnaa? Intay dhoolla cadaysay ayay AF ingiriisi ku tidhi, 'dhib ma leh haddaanad ii soo dhaafayn.'

Waxaan gartay in ay iska kay xidhayso oo diidan tahay in aan sheeko dheer la galo. Waxaan ku idhi, 'qalbiga ma maamulo laakiin carrabkayga waan ka adagahay.' Waxay iigu jawaabtay, 'and control your heart too.' Waxaan ka codsaday in aan barto iyana way iga aqbashay. Muddo waxay is giijisaba aakhirkii saaxiga ayaan isla keenay.

Waan waraystay, waxay ii sheegtay in ay dedgan tahay Brooklyn oo ay shaqo fiican halkaa ku haysato. Waxay tidhi waxaan xoghayn u ahay qolo ka shaqaysata Stock-traders oo la yidhaa istock. Maxaad u timid ayaan weydiiyay Nayroobi, waxay ii cadaysay in ay fasax ku timid oo ay raadinaysay calaf.

Waxaan weydiiyay anigoo ka naxsan in la guursaday, oo hadda miyaa lagu qabaa? Waxay tidhi, 'he married my soul not my body.' Waan fahmi waayay waxay ka wado, way ii

sharaxday oo waxay tidhi, 'nin aannu is jeclayn ayaa jira, waxaan ku balanay in aan is guursano markuu jaamacadda dhammeeyo. Markuu qalin jabiyay waan faraxsanaa ilaa xad ma qiyaasi karin farxadaydda. Gaadhiga anigaa gacantayda ku waday si aanan cabbiri karin hadda ayaan shil u galay...' way ilmaysay, waan ka naxay oo waxaan ku idhi waa ka xumahay in aan ku xasuusiyo noloshaa murugada badan. Way aamusi wayday, deeto intaan laabta geliyay ayaan dajiyay.

Muddo ayay laabtayda ku jirtay, markay aamustay ayay igu tidhi, 'who are you?' Waxaan ku idhi, 'maxaad ka wadaa?' Waxay igu tidhi, waxaad tahay qofkii ugu horreeyay ee muddo sidaa u gaaban kasbada quluubtayda. Waxaan dareemayaa inaad tahay qofkaygii iyo dookhaygii aan nolol la wadaagi lahaa.

Culayskii iyo murugadii aan la noolaa 3 sanno ayaad igu ilowsiisay intaa yar ee aad laabta i gelisay. Rabitaan weyn ayaa ku abuurmay laabtayda, waxaanse ka baqayaa in aan adna ku waayo. Cabsi ayay igu abuurtay in aanan ku aqoon. Waan ku farxay in ay iga heshay anna si fudud ayaan u idhi dhici mayso taasi ee ha ka werwerin. Iyana waxay igu tidhi, "ii balanqaad in aanan ku waayin haddaan iskaa siiyo." Waxaan ku idhi waa ballan waa ballan ee ha ka werwerin, waan kula jiraa marwalba gacaliso.

Waan isa siiyay, iyana gacmahayga ayay ku dhex jirtaa oo sidii laba is yaqaanay sannawaad ayaanu isku dhexgalnay. Cuntada ayaan afka isugu guraynaa, gabadhii xidhxidhnayd qosol iyo farxad ayaa ka soo hadhay.

Anagoo ilownay safarkii dheeraa ayaa codka diyaaradu nagu baraarujiyay in aan soo

gaadhnay John F. Kennedy international airport. Xiisihii iyo rabitaankii aan isku haynay ayaa na dhaafisay in aan oggaano culayska safarka. Waxay iga codsatay in aanan hudheel deggin ee aan u raaco guriga ay deggan tahay. Waan ka aqbalay dalabkeedii, waxaanan dhaafay qofkii ii sii taagnaa madaarka si uu ii geeyo hudheelkii aan sii booking garaystay. Taxi ayaan wada qaadanay, waxaanay i geysay guri qurux badan oo saddex qol ka kooban, oo deyrka hore beer yar oo si qurxoon oo beeray loogana shaqeeyay.

## Qaybtii 23-naad

Si fiican oo gobbanimo leh ayay ii soo dhawaysay. Waxaan dareemay jecayl xad dhaaf ah oo aanan xakamayn karin. Waxay gabadhani noqonaysaa qofkii labaad ee aan si niyad ah u jeclaado.

Waxaan go'aan hoose ku gaadhay in aan nolol la wadaago iyada se uma bandhigin. Iyadana waan ka dareemayaa rabitaan xoog ah, waxaan u noqday rejo mar labaad soo noolaysay ruuxdeeda oo raacday qofkii ay jeclayd ee shilka galay.

Subaxdii labaad annoo si kal iyo lab ah u dhagaysanaya oo erayadeeda dhuuxaya ayay igu tidhi, 'isma lahayn qof baad mar labaad jeclaan doontaa, show fursad baa ii laabnayd.

Bog baan laabtayda kaaga furee ku soo biir, caashaq baa beerkayga galee ha baylihin, naf baa kuu baahatee ha baal marin.'

Ballan baan ka qaaday in aanan kaga bixi doonin jecaylka. Waxaanse maalintii saddexaad ka bixi waayay gurigii, shirkiina waan ka habsaamay maalintaa. Maalintii labaad ayaan xaadiray madashii shirka.

Shirka waxaa soo agaasimay koox la yidhaa shadow council oo u xilsaaran waxbarashada dadban ee caalamka. Shadow council qaybtooda Yurub ka hawlgasha waxaa loo yaqaan shadow factory. Waxaa aasaasay 1818 nin filasuuf ahaa oo la odhan jiray Graham Nordic. Graham wuxuu aaminsanaa hubka ugu culus ee Aadane lagu burburin karaa inuu yahay waxbarashada oo si khaldan loo isticmaalo dadkana laga leexiyo jidka toosan.

Halhayskiisii caanka noqday waxaa ka mid ahaa:

"Si aad ummad u burburisid uma baahnid inaad u qaadato xabbad. Keliya waxaad u baahan tahay inaad manhaj khaldan u dhigto oo aad oggolaato qishka iyo khiyaanada. Markaas bukaanku wuxuu ku dhimanayaa gacanta dhakhtarka, guryuhu waxay ku dumayaan gacanta injineerka, lacagtu waxay ku lumaysaa gacanta xisaabiyaha, cadaaladdu waxay ku burburaysaa gacanta siyaasiyiinta, xaqu wuxuu ku qarsoomayaa gacanta culimada."

Waxa kale oo ka mid ahayd mahadhadiisii odhaahdan:

"Ka caba sixirkayagan (waxbarashada khaldan) dadkiisa wuu caayi doonnaa, anagana wuu na ammaani doonnaa. Wuxuu

jeclaan doonnaa nacabkiisa, nasteexiisana wuu colaadin doonnaa. Waxba ma qabsan karo, farsamo uu wax ku soo saaro ma yeelan karo, iskii uma istaagi karo ilaa uu anaga nagu tiirsado mooyee. Jahliga iyo aqoonta wuxuu ku kala saari doonnaa miqiyaaskayaga. Ka noo eeg aqoon ayuu ku tuhmi doonnaa, ka naga duwan jahli ayuu u nisbayn doonnaa. Waxaanu ka dhigaynaa jire aan jirin."

Shirka waxaa lagu soo qaaday in Soomaalida loo sameeyo 'liberal schools', dugsiyo ay ka soo baxaan arday quumoluudnimada oggol oo ku doodi doona waa doorasho qofeed oo u baahan in lagu ixtiraamo, ilxaadka aan dhib u arag, qabatima dhaqan kasta oo bidix.

Kooxdaasi waxay u hanweynaayeen in la dhiso dugsiyada noocaas ah. Waxa kale oo ay aaminsanaayeen in jiilka cusub ee soo koraya ay ku yar tahay raadaynta fikir ee ay kuwii hore ku lahaayeen, qaar baa ku celcelinayay

“waa in ay da’ yarta ku beernaa maskaxdooda in ay qabatimaan dhaqannadeena.” Dedaalkan oo u taagan in dhallinyarta Soomaalida la dooran siiyo in ay door moodaan dhaqannada bidix.

Maalintii labaad ee shirku intaas ayuu noogu soo xidhmay. Waxaan u soo baxay oo weliba xoog u xiisaynayaa in aan gaadho tii aan hawada ku caashaqay. Gurigii garaac markaan isidhi mise wuu dacal furan yahay.

Waan naxay oo guddaha ayaan usii galay, caraf udgoon ayaa i saaqday, sanka ayaan la sii raacay. Qolkii fadhiga ayaan dhex taagannahay waxaan maqlayaa cod deggan oo baxaya; waa hees jecayl oo Maraykan ah. Dhankay ka baxaysay ayaan u dhaqaaqay waxaan dareemay inuu yahay qolka hurdada. Nafta ayaa igu qasbaysa in aan guddaha u galo, damiirku se wuu diidan yahay inuu hore usii socdo oo wuu ka xishoonayaa xadgudub.

Anoo qof ahaan u murmaya oo albaabka hurdada marna soo jeedsanaya marna jeedaalinaya oo isku haya gunta ma ugu dhacdaa ayay qurux badantii igu soo baxday. Waan ku naxay annoo bahdilaad yara dareemaya ayaan hadal hako hako leh ku boobay, waxaan mooday in cadow guriga soo galay.

Intay i hor dhaqaaqday ayay igu tidhi fadhiga inoo soo fadhiisi, anna waan ajiibay. Way kacday oo macmacaan iyo bun aan jecelahay ayey ii keentay. Waxay igu tidhi jacaylkaan kuu hayaa waa sida gurri qurux badan oo hal albaab laga soo galo. Qaali si aad albaabkaa uga soo gasho maxaad samayn lahayd.

Waxaan ku idhi furrihiisa ayaan u soo qaadan lahaa. Waxay igu tidhi maxaad usoo qaadan wayday? Madaxa ayaan yara meermeeriyay, horena waan u jawaabi waayay. Waxa igu wareegaysa furraha aad sheegtay ma

oggolaanshaheedaa. Waxaan ku idhi furruhu waa aqbalkaaga. Waxay igu tidhi anigu waan ku aqbalay ee hal aqbal ayaa inaga dhiman.

Ninkaygii weynaa waxaa igu adkaatay in aan fahmo aqbalka dhiman ee ay sheegayso. Anigoo xishoonaya ayaan ku idhi bal ii sheeg aqbalka dhiman ee la iga rabo si aan u dhamaystiro.

Intay dhoolla cadaysay ayay tidhi waxaa inaga dhiman "aqbalkii Rabbi." Falaadh ayay igu noqotay hadalkaasi, dhinacna jecayl saa'id ah ayay igu abuurtay oo waxaan dareemay dunnimadeeda iyo dhowrsanaanteeda.

Waxaan ku idhi farxad bay ii tahay in aan is mehersano ee ii balami waligaagii waan ku soo doonayaaye. Si xad dhaaf ah ayay ugu faraxday, markii koowaad ayay madaxa iga dhunkatay. Habeenkii farxad, caways, heeso iyo haasaawe wanaagsan ayaan ku qaadanay.

Si weyn ayay ii taabatay farxada inantaa ka muuqato, waxaan isu sheegay in aan naf noolaynayo anna aan nasiib guranayo.

Waxay igu tidhi qaali ii seexo shirku markuu soo dhammaado ayaynu ḥawshaas geli doonaaye. Waa si wanaagsan ayaan ku idhi, deeto hurdo ayaan holladay. Dhowr fariimood ayaan is weydaarsanay oo ay erayo macaan ay ku jiraan. Waxay ii soo qortay intan "love can touch us one time and last for a lifetime and never go till we are gone; love is when I loved you."

Xaaskaygii ayaa iyana farriimo ii soo dirtay, niyad aan kaga jawaabo se uma hayo. Erayo niyadjab iyo beerqaad ah ayay soo qoraysaa; waxay ii soo qoraysaa, 'waad i dayrisee anaan kaa calool go'in, marbaadse nabsigayga durduuran.'

Haddana kaan akhriyaa ka kale wuu igaga saamayn badan yahay, kan wuu i dhibay. Waxay soo qortay, 'waxaan nolosha kula wadaagay annoo rejo weyn, haddana maalinba habeenka xigga waxaan sii dareemayaa in mustaqbalkayga ay hadheeyeen daruuro madow oo aanan garanayn waxay sidaan; cabsida u badan ee i haysaa waa adiga.'

Midba mid ka culus oo ka saamayn badan, waxay farriin kale ku qortay "How you seem to be good or bad, I just smile. I have a lot to be thankful for." Habeenkii hurdo ma seexan waxaan dareemayay in aan dhex dabaalanayo badweyn macaan iyo qadhaadh leh, waxaa igu dhex loollamayay mugdi iyo iftiin. Noloshayda waxaa hadheeyay cabsi iyo caashaq, waxaa igu adag in aan go'aan qaato. At last, I felt guilty and never be happy back then.

## Qaybtii 24-naad

Subaxii ayaan madashii shirka ku jarmaaday annoo cago jiidaya oo jidh ahaan tabcaan u ah. Inta badan shirarka noocan ah kelmadaadu muhiim maaha, sabbabtuna waxay tahay ajandaha hore ayaa loo soo diyaariyay fulintiisana meel buu sii yaal. Keliya isku imaatinka kullannada noocan waxaa loo jideeyay oo ay u yaqaanaan maamuus-marin.

Waxaa subaxaa i qabatay in aan isaga baxo oo aan gurigii ku noqdo. Ha yeeshee markaan dibedda usoo booday ayuu iga soo daba baxay sarkaal madasha fadhiyay. Wuu i salaaamay, deeto wuxuu iga codsaday in aan cabitaan wada cabno. Waan ka aqbalay, waanu wada fadhiisanay sharaab ayuu

dalbaday anna bun laatto ah ayaan dalbaday.

Sheeko ayuu ii bilaabay oo wuxuu igu yidhi, ‘in aannu mashruuca helno fulintiisa ayaa laga yaabaa markaa waad nala shaqayn.’ Waan oggolahay ayaan idhi anigoo madaxa ruxaya.

Hadalkii intuu la wareegay ayuu bilaabay qorshaha uu wato iyo siduu uu u yahay mid waxtar leh oo iibin Kara dhaqanka bidix ee reer galbeedka. Arrimo yaab leh ayuu sheekada iigu soo daray oo caajiskii iga duuliyay. Wuxuu ergaygani igu yidhi, ‘ummada aanu doorinaynaa maaha cawaan ee waa ummada haysata xigmad koonkan taal ta ugu sarraysa ee ugu mucjisada weyn; QUR’AANKA.’

Wuu arkay in aan ka gaabinayo faham ahaan, markaas ayuu kor u yidhi waa QUR’AANKA. Umatul Qur’aan ayaynu doonaynaa in aynu qalibno, haddaynu guulaysano waxay

noqonaysaa taariikh weyn oo qoranta oo jiilasha danbe ku faanaan. Weliba isagu wuxuu adeegsaday hadal macno ahaan kan ka duwan oo u dhigan sidan (the greatest hack of human soul). Kama dhexgelin ee hadalkiisii wuu sii watay, wuxuu yidhi, "Qur'aanka dadkayagan ilbaxa ah waxaan u naqaan isha ugu saraysa ee sharci laga qaato (Koran is the greatest law giver). Laakiin waan qarinaa ma sheegno sirtan weyn ee ay ka fooraraan."

Sharci kasta oo Aadane u baahan yahay Qur'aanka wuu ku jiraa laakiin ujeeddkeenu waa in aan muslimiinta ku qancinaa in ay anaga sharciga naga qaataan. Isagoo adeegsanaya erayga secular laws, wuu sii waday isagoo mid mid ii tusaya shuruucda aan Aadame dejin karin hadday dejiyaana aanay caddaalad ku salayn karin.

Tusaale ahaan, Qur'aanka waxaa ku sugan sharciga dhaxalka (inheritance law) oo si

faahfaahsan u sharxaya sida dhaxalka loo kala helayo. Anigu sharciyaqaan ayaan ahay waan tacajabaa qaabka uu u qaybiyay. Anagu waanu keeni waynay oo dhaxalku waa waxa ugu weyn ee dulmiga iyo caddaalad darradu ka jirto nidaamkayaga reer galbeed dajiyay.

Markaan sharciga Qur'aanka dersayo marbay igu soo dhacdaa ma islaamtaa haddana waxaan ka baqaa in aan lumiyo danahayga dhaqaale. Xaggayaga sharciga ugu saamaynta badan ee aannu soo xiganaa ama lagu dhaataa waa kii Xumaraabi (Humarabi code of laws). Markaan Qur'aanka deristo ayaad oggaanaysaa in caddaalada u saraysa ay ku suggan tahay xukunka Qur'aanka bal eeg masaladan al cayn bil cayn, al udun bil udun, al anfi bil anfi.

Halkan ayuu Xumuraabi ka soo dheegtay markuu odhanayo eye on eye, nose on nose, hand on hand. Haddana Qur'aanka uma qirno

saraynta iyo xigmadda sharcigiisa. Markaan ku leeyahay ka soo xigtay uma jeedo in ay isku waqti ahaayeen laakiin waa in ay isku il ka soo baxayaan; xaq! waad arkaysaa xigmadda halka ay ka soo burqanayso oo ah awood sarre.

Waxaynu doonaynaa in jiilasha soo socdaa ay ka jeestaan in ay bartaan, ku fikiraan, dersaan, kuna dhaqmaan Qur'aanka. Taas beddelkeeda waa in ay ku faanaan oo ku fikiraan sidan aan u fekerno oo kale. Wuu sii waday oo wuxuu ii soo bandhigay siraha iyo xeeldheerida Qur'aanka. Wuxuu yidhi currinta iyo sheeko samaynta ugu saraysa ee aan Aadame keeni karin waxay ku suggan tahay Qur'aanka. Suurada 12 isagu wuxuu u yaqaan

Chapter 12 Joseph story ayuu ku dul istaagay. Wuxuu yidhi, 'bal u fiirso qisadaasi waxay ku bilaabmaysaa riyo cajiib ah oo sir, waxaanay ku dhammaanaysaa fasirka riyadaii Yuusuf.'

Sheekadaas tu la mid ah, la dhigaal ah, la farshaxan ah, Aadame ma keenin. Waxay ku baraysaa mucjisada iyo xeeldheeraanta Qur'aanka. Tan kale waxay carinaysaa currinta, hal-abuurka sheeko samaynta oo ah awoodda ugu weyn ee Aadamuhu ku gudbiyo farriimaha.

Waan aqaan inta ay gaadhsiisan yihiin dadka sheekooyinka alifaa halkaa Qur'aanku dhigay weligeed may gaadhsiin mana gaadhsiin karaan taas ayaa cadanaysa xaqnimada Qur'aanka. Inta laga baranayo Suuratul Yuusuf adigaa arki doona ee bal waqti sii oo deris oo hoos u eeg waxa xigmad ku duugan suuraddaas.

Waa markii ugu horraysay ee annoo muslim sheeganaya la igu tirtirsiyay in Qur'aanka Kariimka ah aan akhriyo oo fahmo. Waxaan dareemay sida aan u liito, waan isla yaraaday, murugooday, hoos u ooyay, isla markaana aan

dareemay sida aan nolosha ugu khasaaray waxaanse ka sii xumaaday sida ay umutul Maxamed (sallawaatuLaah calayhi wa Salaam) ay u dayacday xigmaddii iyo xukunkii loo soo dejiyay ee ay fadli iyo dheeraad ku lahaayeen. Waxaan nafta hoos u weydiiyay miyaan la nala weydiin doonin, miyaanan u eekaan doonin dameerkii culayska siday oo kale.

Waxaan hoos ugu celceliyay annoo ciishooonaya "waxaa muuqoodu xumaaday kuwa ka jeesta mucjisada Alle."

Hadalkii ayuu ku soo noqday ninkii isagoo baanaya oo leh, "leexinay oo ka leexinay muslimiinta Qur'aankii weynaa."

Digashadiisu way i damaqday waa markaas kolkaan doonay in aan noqdo Muslim dhab ah, Muslim ku dheggan Qur'aanka, Muslim ku dhaqma diintiisa oo Tusaale ka dhigta

Rasuulkiisa NNKH. Wuu sii waday oo wuxuu igu yidhi, 'Qur'aanka ayay ku sugan tahay taariikhda dhabta ah ee Aadame laga qori karaa, anagu taariikhda Aadamaha waxaan u dhignaa si aannu u dhaabadayno garashada. "We evolutionised History." Taasna waxaan ku luminaynaa runta.

Waxaan sheegaynaa in dadkii hore oo dhammi ay cawaan ahaayeen oo duniduna ay hadda ilbaxday; taas oo aan ahayn xaqiiq jirta, xaqiiqdu se way ka duwan tahay sida aan u muujino.'

Taariikhda hoggaaminta tolmoon ayaa ku suggan Qur'aanka. Waxaa dadka taariikhda ay ka baran karaan si ay u noqdaan ama loo saaro hoggaamiyayaal nolosha saamayn weyn kaga taga. Hal Aayad oo guusha cilmiga inta ugu badan laga dhaxlay ayaa jirta oo muslimiinta akhris mooyee aanay fahmin faa'idada Aadamaha ugu jirta. Waa Aayada ka

waramaysa Qaabiil oo walaalkii Haabiil dilay oo garan waayay si uu ka yeelo maydka walaalkii. Waxaa loo soo diray 'quraab', quraabkii ayaa baray sida uu walaalkii uu aasi lahaa. Kuwa ka caajisa in ay fikiraan ayaa noolaha tusaale looga dhigay in ay ku fikiraan.

Wuxuu ku calaacalay ma waxaan ka caajisay inta quraabku gartay. Wuxuu i weydiiyay Aayadaasi ma qiso keliya ayay u soo aroortay mise waxbaa laga baranayaa. Waxaan ugu jawaabay cilmi uma lihi weligayna Kama fekerin. Wuxuu igu yidhi Aayadaasi waxaa laga baranayaa in xayawaanka loo fiirsado oo wax laga barto.

Cilmiga daraasaynta xayawaanku wuxuu Maraykanka ka dhex ahaa sir aad loo ilaaliyo oo qiimo weyn uga fadhida qaranka Maraykan. Madaxweyne Roosevelt ayaa 1940 oggalaaday in dadka lala wadaago cilmiga laga dhaxlay u fiirsiga xayawaanka. Suurtogal

noomay noqoteen in aanu diyaarad samayno haddii aanaan dersin shimbiraha gaar ahaan gorgorka, diiradda manaan samayn karneen haddii aanan baaska dersin, internet maanu farsamayneen Haddaanan xuubka caarrada u fiirsan, wax badan ayaanu ka baranay oo aanan halkan ku soo koobi karin.

Qur'aanka waxaa ku suggan inspirational stories qofka dhiirrigelinaya dhinac kasta oo nolosha ah, ha noqoto rejada, hanka, guusha, hodantinimada, currinta, go'aanqaadashada, waajaha cabsida, xigmada, farxadda, iyo wax kasta oo qofka dhiirrigelinaya. Aan hal hal kuu tuso dhiirrigelinta ku dhex suggan ee weliba cajabta badan ee quus oo dhan kaa dheeraynaysa. Haddii aad ubad la'aaan ka cabanayso oo aad dhakhtar walba soo martay oo weliba lagu yidhaa waxaad tahay madhalays, kolkaas aad noqoto rejo dhig; Qur'aanku waa ka rejadaada soo celinaya.

Qur'aanku wuxuu soo noolaynayaa rejadaada akhri qisada Ibraahim iyo Sakariye isagu wuxuu u akhriyaa Abraham and Zachariah - iyagoo gaboobay oo 90 jir dhaafay ayaa labadaas ba la siiyay ubad (Isaxaaq iyo Yaxye). Kuwa ubadkan Rabbi siinayay oo rasuul ahaa ayay ku adkaatay culayska arrintaasi oo waanu gabownay anaga iyo islaamahayagu ayey yidhaahdeen haddana waa ay dhaleen ubad.

Ma qiso ka rejo gelin weyn ayuu heli karaa qofka ka cabanaya dhalmo la'aan. Maya, ayaan ku waashay anoo dhabanka gacmaha saaray.

Kama daalin in aan dhageysto ninkaas xigmadda ka burqunaysa afkiisa ee anigii ka xigay aan ka oomanahay kana qatannahay. Haddana wuxuu igu yidhi, 'oo siduu qof uga rejo dhigi karaa Rabbiga siduu doono wax u

bixiya.' Mar baan is idhi malaha kan baa kaa iimaan badan, markalena waxaa ii soo baxday liidnimadayda.

# Qaybtii 25-naad

Wuxuu kale oo uu rejo gelinayaa qofka dhex fadhiya mushkilada ugu adag ee u baqaya naftiisu in ay haliganto. Qof aaminsan in albaab walba ka soo xidhmay ayuu Qur'aanku jid u furayaa oo uu rejo gelinayaa. Bal u fiirso qisada Johannas (wuxuu u jeedaa Yuunis) isaga oo xuud liqay oo caloosha ku jira ayuu Alle u yeedhay Rabbina wuu aqbalay baryadiisii oo wuu badbaadiyay.

Waa kee qofka khatarta Yuunis khatar ka weyni ay soo waajahday. Qof kasta oo qisadaas akhriya nafta ayaa dib ugu soo noqonaysa. Haddii aannu qisooyinka Qur'aanka u qorno dadkayagan reer galbeedka waxaan ka baqaynaa in ay wada islaamaan.

Dunidayadan reer galbeedka waxaa xoog loo akhristaa buugta dhiirigelinta dadka ee ay ugu caansan yihiin how to influence people, how to inspire millions, how to be rich, how to be happy, how to attract success iyo kuwa la midka ah. Trillions dollars ayaa ka soo xerooda, way yar tahay qofka aan sidan buug oo aanay labaatan kale oo dhiirrigelin ka hadlayaa u oolin gurigiisa.

Dalabka ugu badan ee dadku rabaan waa dhiirrigelin waayo, badeecada u weyn ee suuqa taal ayaa ah quus, cabsi, baqdin, murugo, guuldarro, iyo wixii la halmaala.

Waxaan ku farxaa markaan arko manhajkayagii oo ay ahmiyada koowaad siinayaan, halka Qur'aankii weynaa aanu ahmiyad u lahayn. Guushan dhaqaale badan kumaanu bixin ee waa fursad ay noo hibeeyeen doqmuhu. Marka ay carruurtooda

subixii u diraan dugsiyada manhajkayaga bidix lagu dhigo, ubadkoodii oo daalan oo tabcaan ah ayay qaarkood galabtii ku qasbaan in ay soo dhigtaan Qur'aanka carruurtuna way karhaan ileen waa ilmo daalane.

Markaas buu Qur'aankii weynaa ku yaraaday laabahoodii waana sabbabta uu soo bixi waayay raggii markay Qur'aanka xambaaraan nuurka isku beddeli jiray ee dunida shirkiga ka sifayn jiray, ee caddaalada ooggi jiray, ee dhulka socon jiray iyagoo han weyn, ee qofka ay Qur'aanka ku tufaan uu caafimaadi jiray, ee quwada iyo karaamada xambaarsanaa.

Hadalkaas ayaa madaxayga ku weynaaday. Waan arki jiray carruurta oo malcaamadda loo diro gelinka danbe, weligay se isma weydiin khatarta ay leedahay dhaqankani. Anigoo yaaban ayuu iigu sii daray, hadda cabsida u weyni waxay nagaga imanaysaa gaallada diinta islaamka qaadanaysa. Waayo, si dhab

ah ayay u xambaarayaan Qur'aanka kuwaas ayaanu shaki ka qabnaa in ay helaan awoodda iyo gargaarka Alle - kuwa gargaarka Alle hela cid loodin kartaa ma jirto. Isma odhan qof diinta ku cusub ayaa diinta u gargaari.

Waxaan ku idhi haddii ay muslimiintu Qur'aanka qaataan oo ay ku dhaqmaan ka warran. Wuxuu iigu jawaabay, 'haddaad Qur'aanka usoo noqotaan gargaarkii Alle waa soo noqon, qoomna Alle ma beddelo iyagoon isbeddelin.'

Anigoo xoog u xiisaynaya in aan la sii sheekaysto ayuu waqtigii dhacay. Kullankiina sidaas ayuu guul ku soo dhammaaday oo ujeeddadii laga lahaa looga gaadhay. Waxaan ka codsaday in uu ila sii sheekaysto, wuxuu se iigu jawaabay 'waqtigu halkayaga waa ka qaali, waxaanan ku bixinaa Wax kasta oo anfac noo leh, idinkase waqtigu qiimo idiinma leh.' Wuu sii watay oo wuxuu igu yidhi, 'waxa

innoo qoran ma xakamayn karno ilaa aan si wanaagsan u maamulno waqtigeena, waqtigana ma maamuli karno ilaa aynu ognahay muhiimada uu innoo leeyahay mooyee.'

Haddana wuxuu iga aqbalay inuu cabbaar ila sii sheekaysto. Warbixin ayuu ii bilaabay, wuxuu yidhi wadaad la odhan jiray Nostradamus oo loo yaqaanay ninkii arkay mustaqbalka (the man who sees the future) ayaa ka waramay in mustaqbalka ay ka dhalan doonto geeska Afrika iyo barriga dhexe dawladdo awood badan.

Buuggiisa waan ka saarnay labadaa qodob; qolada barriga dhexe dawladda adag ka samaynaysaa waa Israa'iil waana sabbabta aanu Ciraaq meesha uga saarnay, waxaanan wiiqi doonnaa dawladdaha Suuriya, Liibiya, Yeman, Lubnaan, Masar, Iiran iyo ugu danbayn Sucuudiga. Dawladda geeska Afrika

ka dhalanaysaa waa mid weyn oo Islaamku sal u yahay markaa cidda qudha ee dhisi kartaa waa Soomaalida oo la midowda Oromada.

Waxaan ku idhi intan aad sheegayso waligii Sheekh Cabdi Ayuub ayaa isna noo sii sheegay, weliba wuxuu dheeraa inuu sii ishaaray in Ruushka iyo Kuuba ay islaami doonaan. Wuxuu beyd gabaygiisa ka mid ah ku xusay muddo ku siman ilaa horaantii 1920:

Giddigii inuu Ruushkii muslimay uunka maqashiiya.
Madiixii Rasuuulkay hayaan magaca Kuubaan dheh.
Kuwii Mulxidiinta lagu yiqiin baa Diinta maamuli dheh.

Wuxuu igu yidhi 'Waan ka war haynaa ragga sirta leh iyo warkooda.' Dawladdaha aan ka baqaynaa maaha dawladdo caadi ah, waa kuwa u dhalanaya xoriyada Aadamaha. Waxay xoraynayaan dhaqaalaha aannu xakamaynay (economic controls). Taasna waa werwerka u weyn ee aannu qabno, bal u fiirso sida dhaqaalaha adduunka noogu shaqeeyo si dantayada ku dhisan.

Tusaale, tamarta ilayska ee ku dhisan shidaalka annaga ayay faa'ido noogu jirtaa oo dadku ay noo cabiidsan yihiin, dawladda dhalanaysa addoonimadaa dadka way ka xoraynaysaa oo waxay abuurayaan laydh bilaash ah oo tamarta qoraxda iyo dayaxa laga dhalinayo markaas shidaalka waa laga maarmayaa.

Waxaan weydiiyay in 1901 uu saynisyahan Nicola Tesla uu hindisay tamarta laydhka oo bilaash ah, dadka oo dhan ay ka faa'idaysan

lahaayeen. Wuxuu iigu jawaabay, 'hadday dadka oo dhammi faa'idaan anaga maxaa dan noogu jirta, Tesla xaqiiq wuxuu ahaa nin caqli badan hindisihiisaa wanaagsan ee uu la yimid waa kii galaaftay noloshiisa waana sabbabta aan u dilnay; in shirkadahayagu xidhmaan ma aqbali karno, hal qof waan u dilli karnaa hal malyuunna waan u sadqayn karnaa.'

Wuu sii waday hadalka isagoo ii sharaxaya dawladdaa xoriyada Aadamaha u dhalanaysaa waxay qaban doonto ee hammigeedu yahay. Waxa kale oo ay dabarka ka furayaan mawhibooyinka dadka oo qof walba wuxuu u dhashay ayuu ku meel marayaa. Halkan annagu waanu xakamaynay oo dadka dabaqada sarre oo qudha ayaa isticmaala hibooyinkooda, dadka faqriga ahna faqrinimada ayaanu ku haynaa oo looma ogola hodantinimada; faqri curineed, faqri maskaxeed, faqri muruqeed, faqri maal ayay la

deris yihiin. Sideen u aqbali karnaa in cadaaladda la ooggo marka aanu ku faa'idno caddaalad-darrada nidaamiga ah. Waxaanu dadka ugu baaqnaa caddaalad annaga oo dulmi wadna, waxaanu ku baaqnaa xoriyada dumarka annaga oo addoonsi wadna; xoriyada dumarka waxaan u naqaan in la qaawiyo halka aannu asturaada u muujino in ay tahay gumaysi.

Macalinkayagu (Big Brother) wuxuu na baray in aannu isticmaalno saddexda awooddood ee la'aantood aanu dhismeen nidaamka kala saraynta caalamku. Saddexda awooddood ee aan ku tamarinaa sidan ayay noogu kala muhiimsan yihiin marka aanu waxtarkooda ku xisaabtamayno:

sixirka,

Beenta

Iyo khiyaanada

Saddexdaas awooddood weligayo kamaanu tagin, cilmiga u weyn aanu aaminsannahay waa sixirka. Dal maanu qabsan ilaa sixir baan adeegsanay, dersi maanu dejin ilaa sixir baan adeegsanay, talaabo maanu qaadin ilaa faal baanu dhignay. Beentu waxay noo sahashay in dadka daacadda ah aannu hodno oo ku hubsano dabinka aan u dhignay. Beentu waxay na siisay awoodda aanu runta ku muquunino caalamkana aanu ku madiidayno.

Khiyaanadu waa hubkayaga ugu weyn ee aannu ku guulaysano. Khiyaano la'aanteed dunida maanan qaabayn karneen, dad wada dhashay xuduuddo maanu kala dhex dhigi karneen, heshiisyo iyo axdiyo anaga noo eexanaya maanaan geli karneen, ha'yaddo caalami oo dantayda u addeega maanu samayn karneen. Waxa u weyn ee cibbaado

noo ah waa sixirka, beenta iyo khiyaanada.

## Qaybtii 26-naad

Waxaan la yaabay xaqiiqda dadka ka qarsoon ee uu ila wadaagay. Waxaanan aqaan dad daacad ah oo aan isla weyni ku jirin oo iyaga ka mid ah, markaas ayaan weydiiyay dadka oo dhammi ma sidanaa? Wuxuu iigu jawaabay maya, qaar baa jira Kiniisada ku xidhan oo dhaqankan weli xumaan u yaqaan, kuwaasina cidlo ayay fadhiyaan oo nolosha adduunyo waxba Kama taraan. Waxaan adiga kuugu qirtay naga mid baad tahay oo waxaan doonayaa in aad guulaysato.

Derajada 23 markaad fuusho ayaa lagugu tabbabari doonnaa, waxaan hoos u idhi ma anaa doonayaba in aan fuulo; guusha sixir

gashay ha iga maqnaato oo geerida ayaa dhaanta.

Waxay gaadhay xilli danbe waanu iga baxay, anna markaan hudheelkii ka soo baxay ayaan la kulmay nin la toogtay oo hor yaal Hilton Hotel oo nagu xigay. Waan iska dhaafay oo meeshan Maraykanka lama sii dul istaago qof la dilay. Meesha dilku ka dhacay waa Manhattan oo ah xarunta ganacsi ee Maraykanka iyo adduunkaba.

Tagsiile ayaan u baaqay wuu soo istaagay oo yidhi halkeen ku geeyaa, anna idhi Brooklyn deeto yidhi soo gal. Waxaa watay nin madow, wuxuu igu bilaabay waad argagaxsan tahay ee sow caadi maaha, waxaan ku idhi dilka dhacay sow ma arkaysid, isna isma dhibin ee wuxuu iigu jawaabay 'business as usual.'

Dilku agtooda wuxuu ka noqday caadi, intuu soo jeestay ayuu yidhi Brooklyn xaafadda

madowga ayaa ka dil badan halkan Manhattan.

Brooklyn hore waxay u ahaan jirtay xaafad madow haddase badankeeda waxaa iibsaday Yuhuuda oo dhulkii ka riixday madowgii; dilka u badan taas baa sabbabtay. Habeenkii markaan tagay xaafaddii ayaan CNN-ta daawaday, waxay ka sheekaynaysay ninka la dilay oo ay ku sheegtay Marco Sanchez. Sanchez waa nin ka soo jeeda Latinos waana dealer ka shaqaysan jiray kala iibinta saamiyada ee suuqa ganacsiga caalamka. Waxay wirarku yara faaleeyeen in loo dilay saamiyo uu shirkado u kala iibiyay oo qolo lagu dhacay, qolo kalena ay ka heleen faa'ido badan.

Sanchez dilkiisa waqti badan lagama sheekayn ee hadduu cadaan ahaan lahaa wuxuu noqon lahaa war xoog loo qaadaa

dhigo. Waxaa isoo jiitay xog CNN-tu habeenkaa soo hadalqaaday oo ku saabsanaa in New York soddankii sanno ee u danbeeyay uu habeen walba dil ka dhacayay. Waxaan la yaabay magaaladan dhaqaalaha ku suntan iyo dilkan joogtada ah. Subaxdii ayaan nin New Yorker ah ku idhi si aad u noolaataan waxaad u baahan tihiin in aad fulisaan xukunka 'qisaasta' ah. Wuxuu iigu jawaabay waa runtaa oo gobollada weli sii haysta xukunka 'death penalty' wuu ka ammni badan yahay New York, crime rate kiisuna wuu ka hooseeyaa.

Wuu sii waday oo wuxuu ku doodday in dadka caqliga leh garanayaan in qofka qof dila in loo dilaa in ay nolol iyo ammni ugu jirto ka doonaya inuu noolaado. Waxaase diidan sidan 1% noloshayada maamula oo dilka inuu u socdo u arka faa'ido iyaga u dan ah.

Waxay dilka ku baqomaalaan cid kasta oo dantooda fulin wayda ama damacooda ka

horyimaad. Dilka waxaa dhibane u ah dadka danyarta ah iyo dabaqada hoose. 1% na maamula iyaga dil kuma dhaco, muddo ku siman 51 sanno hal qof ayaa dil qorshaysan ku dhintay waa John F. Kennedy oo iyaga dhexdoodu ay ku dileen xabbad dheemman ka samaysan ilaa haddana dilka ninkaa lama ilaabin laakiin malaayiinka kale ee maalin walba dhinta agtooda qiimo kama laha.

Waxaan ku idhi maxay sidan oo dhan ugu yihiin axmaqiinta. Wuxuu igu soo kordhiyay in ay aaminsan yihiin fikrad aad xagjir u ah oo odhanaysa ninka xoogga leh ayaa dunida u hadhaya diciifkana waa la dabar jarayaa (fittest survive). Sidaa waxay u daliishadaan oo ay qabaan in ay qasbayso waxay ugu yeedhaan natural selection oo iyada qudheedu noqonaysa aragti argagixiso ah oo uu keenay Charles Darwin. Darwin wuxuu dhisay aragtida tadawurka (Evolution theory) isaga oo ahaa

wiil yar oo badmareen ah cimrigiisa inta u badana ku qaatay badda. Aragtida Darwin waa ta dhiigga badan ku dul daadisay caalamka.

Magaaladan Manhattan ee dhaqaalaha adduunka lagu maamullo waxaa astaan u ah sac. Dhaqaalaha adduunka ee casrigana waxaa loo yaqaan dhaqaalihii saca (cow economy). Sacu waa dahabi waxaanay u yaqaanaan golden calf. Sacani wuxuu u taagan yahay sacii uu sameeyay Muuse Saamiri ee reer binu Israa'iil caabudeen waqtigii nebbi Muuse (cs) uu ku maqnaa kitaabkii Tawraad.

Maraykanka qudhiisa waxaa lagu naanaysaa Uncle Sam (US), Sam oo ah Saamiri. Waxaa xidhiidh xooggan ka dhaxeeyaa Saamiri iyo Dajaal, culimo badan ayaa qaba in Saamiri yahay Dajaalka imanaya ee dadka fitanka gelinaya aakhira sabbanka iyo xilliga dagaallada.

Nebbi Muuse (cs) xukunkii uu ku riday dadkii saca caabuday waxay noqotay in ay naftooda dilaan, walaalkii Haaruuna wuu gilgilay. Saamiri si deggan intuu ula hadlay ayuu ku yidhi 'waxaa kuu sugnaaday ballan aanad dhaafayn', markaa umuu haysan awood uu ku dilo. Ballankaas danbe ayay culimada qaar ku dooddaan inuu ninkaasi Dajaal ahaa.

Maraykanka markaad eegto waxaad moodaa inuu dhaqankii Saamiri ka shaqeeyo ama uu yahay dawladda uu Saamiri u eekuhu ka soo bixi karo, waa sida Fircoon uu madaxda ugu ahaa.

Halkan dadka waxaa diin looga dhigay hawadooda, waxaanay isugu yeedhaan dhulkii xorriyada hawada. Waxaad ku arkaysaa dhaqan kasta oo Aadamaha ku foolxun. Dadka khaniisiinta noqday ee ay ugu yeedhaan LGBTQ community waxay qiyaas ahaan ku

dhow yihiin 23% inkasta oo deraasadaha qaar muujinayaan marka lagu daro dadkan dhaqanka qarsadaa in ay 30% ka badan yihiin. Waxaa ku nool dad tiradoodu ka badan tahay 5 malyuun oo ruux oo shaydaanka caabuda si toos ah inta si dadban u caabudaa tiradaa way ka badan tahay. Dadka ugu badan ee ilxaadka ah waxay ku nool yihiin Maraykanka. Iyaguna waxaa ku nool dad tiradoodu aanay xad lahayn oo aaminsan Dajaal sugayana soo bixistiisa ama sii dhisay nidaamkiisii.

Inkasta oo sunnada aynu ku naqaanno qof maqan in aan la sii dhisin nidaamkiisa ilaa isagu la yimaad mooyee - marka aynu sunnahaas eegno waxaad is odhan kartaa dunida wuu joogaa Dajaalkii cawarnaa ee sharka badnaa; dhaqanka bidixna hoggaamiyaha ka ahaa ama madaxda u ahaa.

Waxaan xasuustaa mar aan Berg kala sheekaystay arrinta cimilada adduunka ee sii

xumaanaysa werwerka badana laga qabo. Wuxuu igu kordhiyay in ay dadka jidka ka habaabinayaan iyagoo si jihayn u isticmaala baaqa climate change. Wuxuu igu yidhi waqtigii ayaa naga dhammaaday cabsi weyna way nagu dhacday. Dadka waxaa ku socda ciqaab weyn oo xagga Alle ka timid markii dadku ka jeesteen xaqa.

Si aanay dadku dib ugu noqon xaqa ayey u shideen cajalada la yidhaa climate change; dadkiina sida xoolaha ayay iska daba galeen kuwa beenta ku jihaynaya halkii ay ku waanno qaadan lahaayeen dhul gariirada tiro beelay, duufaanada xoogga weyn, gubashada kaymaha ee xad dhaafay, dhalaalka barafka oo badan, buuraha dhaqaaqay, fulkaanaha qarxaya, dabaysha iyo daadadka dal walba galay.

Annoo hudheel keligay ku fekeraya oo xasuustaa cimilada beenaadka isaga jira ayay

qurux badantii aan jeclaaday isoo wacday, waxay tidhi iyadoo aad u faraxsan ‘gurriga hore u kaalay waxaan kuu hayaa war farxad leh.’

## Qaybtii 27-naad

Annoo degdegsan ayaan gurrigii soo galay oo doonaya in aan oggaado warka farxadda leh ee ay iigu yeedhay. Judhii aan aqalka irridiisa furay waxaan arkay laba oday oo fadhiga fadhiya; waan ku naxay oo salaan ayaan ku boobay. Iyadii madbakha ayay ku jirtaa oo cunto ayay diyaarinaysaa, martida waxay hor dhigtay macmacaan iyo sharaab badan. Darbiyada fadhiga waxaa loo sharaxay si weyn oo qurux badan.

Macmacaan kale ayay soo dhigtay haddana dib ayay ugu jeedsatay dhankii madbakha. Aan idiin soo noqdo intaan idhi ayaan ka daba kacay qurux badantii oo madbakha ku sii socota. Intaan gacanta qabtay ayaan ku idhi,

'siday wax u jiraan xabiibti qaali quruxeey.'

Afbuuxa ayay igu tidhi waa oday ehelka ah iyo sheekh aan ka soo casuumay Seattle, Washington. Anoon weydiin ayay ii raacisay waxaan ugu yeedhay in ay isku keen meheriyaan. Af kala qaad ayay igu noqotay, waxaan ku canaantay in ay iga qarisay. Waxaan ku idhi, 'ma gacalka ayaad igu ceebaynaysaa sow lacag accountka kamaan soo saareen, maxaad ii sii ogaysiin wayday.'

Waxay igu tidhi iyadoo dhoolacadaynaysa xabiibi kadis ayaan rabay in aan farxaddeena iyo midowgeena ka dhigo. Markay dhoola cadaysay ayuu culayskiiba iga degay, gabadhaa markay kuu qososho naxariis iyo jecayl ayaa qalbigaaga gelaya.

Waxaan ku idhi haddaba xayaati waan baxayaa oo lacag baan baanka uga soo saarayaaye ha sii fadhiyaan oo waxay cunaan

sii. Haddana waxaan ku kalsoonaan waayay in wax wanaagsan ay u karinwaydo intaan iyada dhaafay ayaan madbakhii hoomaadiyay. Way iga farxisay, ileyn neef adhi ah ayay soo iibisay oo ay u moofaynaysaa.

Intaan madaxa ka dhunkaday ayaan ku idhi waad i asturtay, sharaftaydiina waad ilaalisay, martidiina waad inaga hagaajisay. Iyagiiina intaan sii maray ayaan si gobbannimo leh ula hadlay oo aan u mahadnaqay. Waanan u cudurdaartay in ay i sugaan saacad aan suuqa ka soo noqonayo, igana raali ahaada ayaan ku dhahay.

Barclays Bank oo xisaab furran aan kulahaa ayaan tagay, waxaan kala soo baxay lacagtaan u baahnaa. Tagsiilihii ayaan ka codsaday inuu isii mariyo meherad carbeed oo dharka iyo cadarrada lagu iibiyo. Nasiib wanaag waan helnay, ha'ddiyad ayaan uga soo qaaday labadii oday, gurrigii ayaan soo

abaarnay si aan u guddoonsiiyo gabaatiga iyo ha'ddiyadaba. Meherkii wuu noo dhacay, odayadii sooryadii iyo sahayba waan siinay. Waxaanan si lama filaan hadda ku yeeshay xaaskii labaad ee noloshayda soo gala; waan se ku faraxsanahay guurkan cusub iyo noloshan.

Laba cisho ka dib waxaan u baxnay toddoba bax aannu qorshaynay in aannu ku soo marno dhowr magaallo oo ka tirsan gobolka ugu weyn Maraykanka ee California. Waxaan dooranay Los Angeles, Houston, Dallas iyo San Francisco.

Gabadhaydu waxay doorbidaysay in aan Miami ka bilowno dalxiiska guurkayaga. Waxaan si asluub leh uga codsaday magaaladaa Miami ee ku taal gobolkaas Florida in ay tahay meel aanan ku niyadsamayn iyana si wanaagsan ayay iiga aqbashay. Markaa waxaan u duulnay

magaalada Los Angeles oo ay ku taalo Hollywood. Waa magaalo soo jiidata dalxiisayaal badan oo dunida ka kala yimaad. Waxaanu ku qaadanay waqti qurux badan, farxad badan oo raaxo badan.

Hal farriin ayaa jewigaygii macaanaa u beddeshay murugo. Anagoo sawir isaga qaadayna buurta ay saaran tahay magaca HOLLYWOOD ayay farriin dheer ii soo dhacday, waan jaleecay mise waxaa ku dul qoran FURNIIN. Waan sii furay waxaan ugu tagay xaaskaygii oo iga dalbanaysa in aan warqadeeda siiyo. Waxay ii soo qortay, 'adna waad iska kay xidhay raggiina waad xidhay.

Waxaan u muuqdaa qof lammaane nolosha ku haysta, runtuse waxay tahay in aan weligayba Keli ahaa. Xaqii aan kugu lahaa maad gudin naftaadiina waad ku xadgudubtay. Waxaan ku jiraa xabsi aanan garanayn cid igu xukuntay. Waxaan kaa dalbanayaa furiin, haddaad

oggolaan waydana waan aqaan sida la isku fasaqo ee aan noloshaada uga baxayo. Way adag tahay in aad jeclaato qof ku dhibay, aniguse waan ku jeclaan doonaa adoo i dhibay.

Laakiin mid baan kuu balanqaadayaa in aan noloshaada ka dheeraan doono oo aanad dib ii arki doonin. Waxaan isku dayayaa in aanan ku iloobin, waxaanse doonayaa in aan kaa fogaado; ugu danbayn se xiskayga kama bixi doontid. Dhaawaca aad i gaadhsiisay ilmada uu iga keenay waxay u rogmaysay sida wabiga.

Haddaan damco in aan wabigaa ilmada ah aan biriish ka dul samaysto waan ku soo gaadhi lahaa laakiin waxaan oggahay in aanad ii oggolaanayn. Haddaad ii dhawdahay waxaan kuu sheegi lahaa sida aan kuugu baahnaa ee kuugu baholyoobay iyo sida maalin kastaa iigu adkayd intaad iga maqnayd.

Gabadha wanaagsani ma habboona in ay eegato maalka iyo mansabka ninkeedu leeyahay, anigana iguma banaana in aan indhahaa kugu eego. Waxa aan kaa doonayay waxay ahayd in aad waqti ila qaadato, jecayl ii muujiso, daacad ii ahaato, kalsooni i siiso, agtaadana aan ka noqdo qof aad ku faraxsan tahay intiina waan kaa waayay.

Kama qoomamayn doonno in aan nolol kula wadaagay, waxaanse la noolaan doonnaa sida aad nolosha iila fahmi wayday. Haddii maalmuhu ina kala fogeeyeen waxaa ina kulmin doonna nabsiga habeenkiisa. Ma ogid waxaan ku sugganahay haddase waxaan ka fogaanayaa dhulkii aan ku dhashay, wax kasta oo igu dhacayna waxaan ku dhaafayaa adkaysi, samir iyo rejo.

Farxaddu kama dhammaato wejigaaga, nolol-san ku noolow, haddii aan hal kaa codsan lahaa waxaan abaal kuugu hayn lahaa in aad

xusuustayda la noolaato. nooli kullantee."

Waan ka murugooday warqadaa, xaaskii cusbaana way dareentay in wejigaygu is beddelay. Dalxiiskii Los Angeles waxaa hadheeyay caloolyowga uu igu hayo qoyska dartay u buruburaya ee aanan waxba ka qaban karin.

Tilifan ayaan ka garaacay iyana igama qaban. Hore ayaanu isaga sii wadanay dalxiiskayagii aniga oo aan niyad u hayn ayaan Houston ku qaadanay laba habeen. Waxaan ka codsaday in aan soo gaabino safarka, waxayse ku adkaysatay in jadwalkii hore aanu ku socono. Waan la qaatay inaan sii wadano dalxiiskii arooskayga cusub wax niyad ah se uma hayn.

Waxay soo iibsatay taaj qurux badan anna waxaan xidhay suudh madow, San Fransisco beer jacayl oo ku taal oo lagu magaacabay SkiLove ayaanu sawirro aroos ku galnay.

Anigoo beertaas ku suggan ayuu ila soo hadlay Berg, wuxuu iga codsaday innaan kala hadlo secure line. Waayo, tilifanka gacanta ammni ahaan looma adeegsado in xog la isku waydaarsado. Siddii baan yeelay oo waxaan furay tilifankaygii satellite-ka ku xidhnaa, waanan sheekaysanay cabbaar.

Waxaa la yaabka lahaa waxay ahayd inuu oggaa guurkayga cusub oo aanan anigu ku wargelin. Tilifanka aad sidato ayaa si fiican looga oggaan karaa xaalad walba oo aad ku sugan tahay. Wuxuu iga codsaday in mashruuc dhalmada lagu yaraynayo oo la bilaabay aan soo kormeero soona indho indheeyo siduu u socdo iyo habka loo fulinayo.

# Qaybtii 28-naad

Waxaa igu wareegaysa in aan oggaado sida loola dagaallamayo taranta badanaysa ee Soomaalida. Arrintaas in aan ka gun gaadho ayaa xamaasad weyn igu haysa, waxaad naftayda moodaa in ay wardoon tahay sida ay u jeceshahay in wax walba ka war keento. Mar waxaan xasuustaa in ay jirto cid kale oo warkan xiise u qabta oo meesha igu soo dhex darsatay.

Waxaa maskaxdayda ka guuxaya codkii igu odhan jiray, "adkayso aad wax badan ogaatide." Waxaan niyada iska weydiiyay yay xogtani wax taraysaa ee u baahan, yaase dadka la wadaagaya oo gaadhsiinaya ileen aniga igama suurto gasho in aan bixiyo xog sidan oo dhan xaasaasi u ah.

Mar kale waxaan ku fikiraa in aan oggaado ciddan igu shaqaysanaysa. Mar walba oo aan dhankaa u dhaqaaqo oo raadi is idhaa waxaa jiray awood kale oo i ilowsiinaysay. Haddase wuu igu soo badanayaa rabitaanka aan ku doonayo in qoladaa wax ka oggaado. Waxaan ku soo guryo noqonayn New York, way ku faraxsan tahay toddobaadkaa aannu ku soo qaadanay gobolka California magaalooyinkiisa bilicda san.

Qudhaydu waan ka helay safarkaas, inkasta oo dareenno hoose ay ku loollamayaan gudahayga; xaaskii aan xumeeyay iyo xaaladan aan ku sugganahay ee dhalmotirka Soomaalida ayaa ah waxa ugu weyn ee ii diiday in farxadda la qaato jecaylkayga cusub.

Markaan safarkii laba cisho ka nasanay ayaan habeen is helnay Berg si aan ugala sheekaysto mashruuca aan soo kormeeri

doonno ee yaraynta dhalmada Soomaalida iyo sida farsamo ahaan loo dajiyay. Wuu ii bilaabay hadalkii isagoo si kor ka xaadis ah iigu sharaxaya qaabka loo waajahayo dhalmada Soomaalida ee xad ka baxa ah. Wuxuu yidhi Soomaalidu wax walba ha la yidhaahdo way kaga danbeeyaan adduunyada kale laakiin hal ayay hoggaamiyaan ayaa jirta waana taranta iyagoo ah wadanka calanka u sida.

Qoyska Soomaaligu wuxuu celcelis ahaan soo saarayaa 7 qof oo beddela halka Yurub oo dhan markaad isku darto ay xadiga tarantoodu ka hoosaynayso 2. Matalan Germany waa 1.1 (xadkan haddii la gaadho waa irreversible bulshadaasi way ka baxaysaa jiritaanka waa matter of time in la tafiir go'aa), Ingiriiska 1.8, Fransiiska 2.4. Waxay Reer Yurub ku socdaan heer ay tafiir go'aan. Laakiin bulshadu in ay ku korto 2.0 waa xal badbaado u noqon kara

caalamka aynu ku nool nahay. Dunida ayay khatar ku tahay tirada dadka ee sida macno la'aanta ah isaga koraysaa. Ma qaadi karo Ecosystem-ka aynu ku nool nahay sagaal bilyan oo qof. Waa in tiradaa hoos loo dhigaa inta aan la gaadhin 2050 oo la xakameeyaa.

Niyada ayaan ka idhi oo isagu ma wuxuu iska dhigayaa kii arsaaqda u hayay xagguu dadka dunida masiibo ugu arkaa. Maan weydiin, waxaanse oggahay in aan arrinku sidaa uu iigu sheegay aannu ahayn ee xaqiiqdu ka duwan tahay. Waxay ka baqayaan in tarantu tahay hub ciidan oo dunidu ku kala adkaan doonto maalin ay noqotaba.

Waxaan weydiiyay markaa Soomalida xadkee ayaad ka fikiraysaa in tarantoodu noqoto, wuxuu iigu jawaabay 2.0 sida dadka caadiga ah oo kale. Muddo intee leeg ayaa lagu gaadhayaa in taranta Soomaalida xadkaa la gaadhsiiyo, wuxuu ku doodday in haddii si

fiican looga shaqeeyo ay qaadan doonto wax aan ka badnayn labaatan sanno. 2030 ayaanu rejaynayaa in Soomaali taranteedu ay taayada la simanto oo qoyska kasta ay usoo hadho laba.

Waxaan ho'ga tusaaleeyay in Soomaalidu leedahay natural birth control, wuxuu iga warsaday maxaad uga jeeddaa. Berg i dhagayso ayaan ku idhi, 'toddobada qof ee Soomaalidu ma wada hanoqaado, badh dagaallo ayaa laaya, inna xanuun iyo faqri markaas uma baahna in lagu bixiyo mashruuc dhashooda lagu xakamaynayo.'

Berg ayaa hadalkii qaatay isagoo cadho ka muuqato wuxuu yidhi taas ma in aan ka war la'anahay ayaad moodaysaa, inta soo hadhaysa ayaan rabnaa in ay tirtiranto. Waan ka xumaaday cadaawadda intaa leeg ee uu u qabo ummad aan iyadu wax colaad ah u hayn isaga.

Berg ku soo dhawow ayaan idhi mashruuca oo iiga warran farsamo ahaan halka laga gelayo. Isma dhibin ee isagoo qoslaya ayuu yidhi, "waxaan ka faa'idaysan doonnaa markay ugu nugul yihiin." Maan fahmin ayaan idhi ee ii balbalaadhi, Berg wuxuu afka soo mariyay in qaliinka hooyooyinka uurka leh uu noqon doonno wax aanu ku gaadhno ujeeddadayada.

Marka aanu hooyo walba qalno waxaan gaadhi doonaa hadafka aanu ku joojinayno taranta badan. Sidee ayaad ku gaadhi kartaan ayaan ku celiyay aniga oo kula dooddaya in qaliinku muhiim u yahay intii hooyadu ay isku go'i lahayd ama ay khatar ku geli lahayd uurka.

Waxa kale oo aan usii raaciyay qaliinku in uu xal u yahay hooyada uurku ku dhibtooda sida kuwa ilmuhu is-gudbo, kuwa biyuha dhalmadu ka dhammaaday ee aan haysan wax ilmaha

soo riixa, hooyada miskaha yar ee looga baqo in ay khatar ku gasho -kuwaas oo dhan ayaa caafimaad ahaan ugu baahan ee aduu sideed ujeedo uga gaadhaysaa ayaan ku idhi. Berg isaga oo ay ka muuqato qab weynaan ayuu igu yidhi, "hooyooyinka duruufahaas ay haleelaan way ka yar yihiin 5%, laakiin anagu waxaan doonaynaa in 95% badbaadi lahaa ee sida fiican u samayn lahaa delivery-ga in la qalo."

Waxaan ku idhi markaa qorshahaagu waa in hooyo kastaa ay qaliin martaa. Wuxuu igu yidhi, 'dabcan, waa dantayada in hooyo kasta marto.'

Berg ma ii sheegi kartaa faa'idada iyo halka dantu kaga jirto. Wuxuu yidhi, "hooyo kasta mar laba ilaa saddex jeer la qalo, waanu ka joojinaynaa dhasha iyadoo oggol iyo iyadoon war ka hayn toonna." Hooyada Soomaaliyeedna dhasha way nici doontaa

marka ay saddex jeer la dhaawaco ee mindi ku dhacdo. Hawlgalka noocan ah wuxuu qayb ka yahay in la xakameeeyo taranta faraha badan ee Soomaalida. Fajiciso ayay igu noqotay xogta uu ila wadaagay ee ku aadan dadka gobta ah ee Soomaalida. Waan isa macasalaamaynay khadkiina waan jaray.

Cabbaar ayaan akhrisanayay jariirada the economist oo qortay maqaal ka waramaya kheyraadka shidaalka Soomaalida oo ah kaydka ugu balaadhan ee ilaa hadda la og yahay.

Jecaylkaygii ayaa qolka kale iiga yeedhay iyadoo ku dhawaaqaysa, "Darling, waan kuu xiisay, iska laab computer-ka oo ii kaalay." Hore ayaan ugu dul kici waayay, intay soo kacday oo ay iga laabtay laptop-kii ayay gacanta i qabatay. Waxaan isku raacnay miiska cuntada oo ay casho udgoon ku diyaarisay. Cabbaar ayaan cuntadii ku dul

sheekaysanay oo aan iska waraysanay mustaqbalka iyo in aannu meel xeeb ah ka iibsano gurri. Waxaan u sheegay in aan laba toddobaad ka dib aan ku noqon doonno dalkii oo aan hawlo dhowr ah ka soo dhammaysanayo. Way ka xumaatay, aakhirkii way igu ayiday, waxaanse ka balanqaaday in aan hore ugu soo noqonayo ee ay ii samirto.

# Qaybtii 29-naad

Waxaan u soo dhoofay Djibouti si aan u bilaabo kormeerkii mashruuca, waxa kale oo i lurayay in aan hore u gaadho xaaskii iga cadhootay. Markii ba waxaan abbaaray gurigii ay ka degganayd xaafadda lixaad, nasiib darro waan ka waayay oo waxaa la ii sheegay in ay fiise heshay oo ay London u guurtay.

Waxaan doonay in xidhiidh ka helo waase laga cudurdaartay oo waxay ku andacoodeen in inanta aan xumeeyay oo aanay gar ahayn in aan helo. Iyadaa sidaa ku dardaarantay, anna kama quusan in aan raadiyo.

Waxaanse nasasho u tagay hudheelkii aan ku soo degi jiray markaan Djibouti imaado.

Habeenkii ayaan raadsaday gabadh ay saaxiib ahaayeen. Gurigoodii ayaan ka soo helay, guudka ayaan u casho tagnay. Waxaan ka codsaday in ay saaxiibadeed ku qanciso in aan isku noqono anna wax aan balanqaaday in aan ka xaalmariyo dhibta ay iga tirsanayso isla markaasna aan beddeli doonno dhaqankayga.

Way iga balanqaaday in ay isku dayayso in ay soo maslaxdo, laakiin waxay ku calaacashay in aan xumeeyay saaxiibadeed. Hadda la hadal ayaan ku idhi, markay garaacday way ka qabatay markay in door ah is waraysteen ayay u sheektay in aan la joogo, iyana ma dhageysan ee tilifankii ayay jartay. Waxaan u sheegay in ay cadhaysan tahay ee ay la soo hadasho oo dajiso una sheegto in aan qiraal ahay.

Galabtii danbe ayay saaxiibadeed ila soo

hadashay oo ay ii sheegtay in ay gabadhaasi iga calool go'day oo aanay waxba iigu hadhin. Waxa kale oo ay igaga nixisay oo ii quus gooyay in ay nin kale heshay oo ay guursanayso oo aan iska iloobo. Waa si wanaagsan ayaan ku idhi ee hal arrin afkeeda iiga soo qaad in ay i cafiso. Dib danbe iilama soo hadal saaxiibadeed anna weli ilaa waqtigan ma hubo in ay i cafisay iyo inkale.

Laba maalmood ka dib ayaan habeen booqday gurigoodii waxaan gaadhsiiyay warqadii, meherkii iyo ha'ddiyado aan u qaaday gabadhoodii. Waan ka xumaaday in qoyskaasi uu u burburay sabbab aniga iga timi, waxaan dareemayaa in aan nolosha qaybtii u muhiimsanayd aan ku guuldaraystay.

Saddex cisho oo xidhiidh ah ayaan niyad jabsanaa oo aanan hudheelka ka soo bixin. Maalintii afraad ayaan annoo cago jiid ah doonay in aan bilaabo hawshii kormeerka ee

la ii soo igmaday. Markaan tagay cisbitaalkii guud si aan xog u helo ayaan hawshii niyad aan ku wado waayay. Waan iska noqday oo waxaan u baahday in aan jewiga beddelo si aan u helo nafsad aan hawsha ku galo. Waxaan goostay in aan afar maalmood aan nafta ka saaro jewiga nabsiga ee i geliyay cidhiidhiga. Habeenkii waxaan tagi jiray xeelliga badda oo aan ku cabi jiray shiishad iyo kooke. Halkaas ayaan laydha ku qaadan jiray.

Waan ku cashayn jiray, heeso macaan ayaan ku dhegaysan jiray si aan ugu nafiso. Habeenkii saqbadhka ayaan ka soo kici jiray laakiin waan ka heli waayay deganaantii aan ka raadinayay.

Ruuxdaydii way sii gubanaysay oo wax kasta oo aan nafta ku dayo way isii gubaan. Waxaan bilaabay in aan habeenkii seexan waayo oo aan ku dhibtoodo hurdada. Habeenada qaar

kiniinka hurdada ayaan nafta ku seexiyaa. Cidhiidhigii wuu igu sii batay, waxaanan dareemayaa in aan ruuxiyan u dumayo.

Annoo cabsi, werwer iyo madow hadheeyay noloshayda oo habeen fadhiya xeelligii oo si fog u jiidaya badeecada, haddana daawanaya qiiqa afkayga ka baxaya oo sawiranaya in ay noloshaydu qaaday jidkii dhimashada ayaa mar qudha aan maqlay eedaan.

Waan soo booday hareerahaan eeg eegay, waxba waan waayay halkana kama maqli jirin eedaan oo hal masaajid kama dhawa. Waan soo kacay si aan u arka halka uu ka soo baxayo codka eedaanka ee ruuxdayda u yeedh yeedhaya. Waxaan ku dhaadhacay xagga badda oo meeshu kaabad malahee siliga ayaan ka talaabsaday oo aan dhagaxaanta ka daadegay si aan hoos u gaadho.

Nin keligii eedaamaya ayaan u tagay, markuu dhammaystay ayuu wayso uu sitay ii ishaaray isagoon ila hadal. Waan soo waysaystay, salaaddii cishe ayaan halkii kula tukaday. Intii aan saladda ku guddo jiray waxaan haysan kari waayay ilmada, waan ooyay xoog. Salaad waxaa iigu danbaysay dhowr iyo tobban sanno ka hor.

Waxaad moodaysay markaan dhammaystay salaaddii in culayskii naftayda saarnaa oo dhan laga siibay. Waxaan dareemay farxad xad dhaaf ah, markaan soo noqday lacagtii ayaan dhiibay in aan meeshaa dib usii eegana ma jeclaysanayn. Salaaddii ayaan jeclaystay, subbixii waan tukaday waxaanan ka sii qaaday farxad dheeraad ah, xasilooni iyo degannaansho.

Subbaxdii ayuu Berg ii dhaafay farriin kooban oo aniga macno weyn iigu fadhida. Wuxuu ii soo qoray, "jihadii ayaad beddeshay." Waxaan

u fahmay in ay markiiba dhibayso salaadda aan ooggay. Inuu oggaado talaabooyinkayga nololleed ayaan ka xumaaday si aan isaga xijaabi lahaana ma aqaan. Si aan qareenkayga uga xidho jinka la soo xidhiidhaya aqoon uma lihi.

Waxaa maskaxdayda ku soo dhacday in Berg mar igala sheekaystay dadka aan lala hadli karin qareenkooda. Xusuuso ayaan is idhaa, waan awooddi waayay in ay maskaxdaydu keento. Waan iska baxay oo aan iska iloobay lurkii iyo kurbadii arrintaas iga haysay.

Marar badan ayaan arkay oo cid wax i farta iyo farriimo kale oo noloshayda muhiim u ah ay siyaabo kala duwan ii soo mareen. Farriimihii ayaan niyada ka doonay se hore uma helin. Waxaan guddogalay kormeerkii aan u imid, annoo booqday cisbitaalka dhalmada. Maalintii waxaan dareemay baaxada ay leeg tahay dumarka qaliinka lagu fulinayaa. Waan ka

naxay oo waxaan weydiiyay sabbabta keentay in dumarka la qalo. Waxay iigu jawaabeen gabadh kasta oo reer Djibouti ah waa la qalaa mana jirto mid ka badbaadaa. Annoo ka naxsan dhibtaa loo geysanayo nugulkii ummadda ayaan sariirtii hudheelka ku soo dhacay.

Subaxdii danbe ayaan soo kalahay si aan usii wato qiimayntaydii. Waxaa ii soo kordhay xog cusub, gabadh kasta oo laba jeer ama saddex jeer la qalo dhalmada ayaa laga xidhay. Taas oo keenaysa kobaca dad ee dalkaasi inuu hoos u dhaci doono tobbanka sanno ee soo socda. Warbixintii ayaan la wadaagay Berg, isna wuu ku farxay oo wuxuu igu yidhi sidii aanu u qorshaynay ayay u shaqaysay.

Sidoo kale wuxuu iga codsaday in aan Hargeysa usii dhaafo, isbeddelka ruuxeed ee kaa muuqda sidii hore ku soo celi ayuu ku sii ladhay hadalkiisa. Waxa aan ugu jawaabay in

aanay jirin wax iska kay beddelay oo aan weli ku sugganahay jidkii aan ku heshiinay. Wuxuu igu macasalaameeyay in aan isku noqdo, waan ka war hayaa dareenkiisa iyo dhaqannada wanaagsan ee igu soo kordhay oo uu diidan yahay wax u sheegayba waa dareemay.

## Qaybtii 30-naad

Habeenkaas ayaan go'aansaday in aan xogtan idinla wadaago oo aanan la god gelin. Geesigu mar buu dhintaa, fulaygu mar walba wuu dhintaa, qofka xogta qariyaa laba jeer ayuu dhintaa, anigu waxaan doortay in aad wax oggaataan. Fikirkaas oo laabtayda ku loollamaya ayaa farriin la ii soo diray. Waan ka naxay farriintaas deeto waan iska soo baxay oo waxaan doontay xeelligii in aan maskaxda ku soo nasiyo.

Ninkii ayaa si kedis ah u eedaamay, waan u dhaadhacay markan wuu ila hadlay wuxuu igu yidhi waxaad u furan tahay in cid walba ku akhrisato ee maxaad u xidhan wayday laabtaada.

Waxaan ku idhi sideen u xidhaa qalbigayga. Wuxuu iigu jawaabay qalbiga lama xidhee si aad xijaab u hesho waxaad akhridaa Aayada 45-naad ee Suuratul Isra. Waxaan ku idhi oo Qur'aankaba ma akhriyee, ilama hadal ee wuu iga tagay.

Waan is canaantay, hudheelkii ayaan tagay kitaab Qur'aan ah ayaan raadsaday waanse ka waayay hudheelka dhan kitaab ma oolin. Subaxdii Ayaan kitaab Qur'aana soo furtay oo aan bilaabay akhriskiisa, sidoo is kale in aan habeen walba akhriyo suuratul Isra.

Qofka akhriya ayaa sirteeda hela, kuwa sirta helaana waa dad sarre. Intii aan bilaabay in aan Qur'aanka akhriyo waxaan helay xijaab, xasillooni iyo xigmad –ruuxiyana waan u noolaaday.

Mar kasta oo aan ku sii durko wanaaga waxaanu sii kala fogaanaynay walaalaha madow. Barrigii hore way dareemi jireen wax aan qabanayo oo qareenka ayay la hadli jireen, intan se bilaabay digriga waan xafidanahay oo awood uma laha in ay oggaadaan dhaqdhaqaaqayga.

Berg ayaa ila soo xidhiidhay oo ii sheegay in madaxa ururka Dark Marrow mudane Paul McMillan uu soo rogay sharci cusub oo xubbnaha ururka dhammaantood lagu talaalayo aalad casri oo ammnigooda lagu difaacayo.

Waxaan weydiiyay maxay tahay aaladaasi, wuxuu iigu jawaabay waa micro chip adeegsanaya biometric technology oo xubnuhu haddii ay khatar galaan loogu gurman karo, amnigoodana lagu suggi karo.

Wuu sii waday oo wuxuu yidhi waxaa ku xidhan GPS tracker lagu oggaanayo halkaad ku suggan tahay iyo xaaladaad ku suggan tahay. Markaa shuruud ayay noqotay in la qaato. Berg wuxuu i faray in aan qaadan doono markaan Landhan imaado. Waan dareemayaa in ay durtaba ururkii uu shaki weyn ka qaaday isbeddelkayga ruuxeed. Uma socdo Landhan raallina kama ihi in jidhkayga la geliyo aalad lagu basaaso marka ay qareenkii war ka waayeen.

Waxaan dareensanahay in aanay dheerayn goorta aannu ururka iska hor iman doonnaa, sidaa darteed taxadar weyn ayaan muujiyay oo talaabo kasta halka aan dhigayo waan u fiirsan jiray, markaan socdo hareeraha ayaan iska eegi jiray, gaadhiga inta aanan kaxaysan hoostiisa ayaan eegi jiray bal in lagu xidhay wax qarxa ama wax la igu basaasayo iyo in kale.

Waxaan bilaabay in aan xogtan reebo, habeenkii niska danbe ayaan u kici jiray in qoraal sameeyo si aan u dhaxal uga tago jiilka hurda ee dushooda ay ka socota ciyaaraha qarsoon. Maalintii hawlahayga kale ayaan dhex socon jiray, si kasta oo aan u jeclaa in xog badan ka oggaado mashaariicda qarsoon ee ururku wado iima suurtogelin.

Doonistayda waxaa ku lammaanaa in aannu ururka sii kala fogaanno, xogta in aan helo waa la iga ilaalin jiray. Anna intaa ka dib aad ayaan isku ilaalin jiray, inkasta oo aanan cabsi qabin oo digrigu wehel ii ahaa naftayduna ku degtay.

Hargeysa ayaan usoo baxay, markii ugu horaysay ayaan ku soo safray dhulka. Dhinacayga waxaa fadhiyay oday waayeel ah, wuxuu muddo iiga sheekeeyay taariikh aan jeclaystay in aan maqlo. Wuxuu odaygii ila wadaagay xog isagu iigu sheegay in ay tahay

mudaakiro Wali saalixa sheegay oo uu ka soo gaadhay wali kale oo wanaagsan oo uu ku xidhnaa. Mudaakiradaa ma fahmin wuxuu uga jeeddo, warka aan ka helay ayaa ahaa in odaygaasi ii sheegay in ay mar midoobi doonaan Djibouti, Somaliland, Soomaaliya, Soomaalida Itoobiya iyo Soomaalida Kiiniya oo ay hal calan oo Tawxiid leh yeelan doonaan. Waxaan ku idhi Tawxiidku ma kan Somaliland u sudhan baa.

Haa ayuu igu yidhi weliba Hargeysa ayaa looga talin doonnaa oo barwaaqo ayay Soomaalidu geli doontaa. Waxaan ku celiyay sowtii lagu hungoobay raadinta shanta Soomaaliyeed. Odaygii ayaa igu yidhi, "awalkii haddaynu ku hungownay aakhirka waa la inagu abaalmarinayaa, sidaas ayay dhigaysaa sunnadu."

Yaab! Ma Hargeysa tii ay ka talin jireen ragga hanka yar ee guryaha quruxda badan ka

dhistay cashuurta ummadda iyadoo wadooyinkeedu burbursan yihiin, ma kuwii gawaadhida cad iibsan jiray iyagoo cisbitaalladoodu dayacan yihiin. Aniga la yaab ayay igu noqotay ee hadday jiraan dad hankaa leh waxay ka soo dhex bixi karaan jiilka danbe. Bal u fiirso kuwa madaxda innoo ah riyada uu odaygaasi xambaarsan yahay miyuu ku jiraa mid qaadi karaa. Ilama aha laakiin waxaan rejo ka qabaa in da'yarta dhalatay wixii ka danbaysay 1400 Hijriga ay riyadaas weyn xambaari karaan.

Waa jiilka labaad oo xor ka noqon doonna hanyarida, musuqa, xatooyada xoolaha ummadda, qaraaba-kiilka, eexda iyo xumaha oo dhan, jiilkaas ayaa ummada badbaadin kara.

Warkiisa ma rumaysan laakiin waan xiiseeyay oo waxaan is weydiiyay dagaalkan baaxada leh ee ku socdaa kolay wax ay oggyihiin ayaa

jira. Waxaan xasuustay qisadii nebbi Muuse (cs) iyo Fircoon dhexmartay. Fircoon waxaa wax laga ogaysiiyay soo bixista Muuse isna wuxuu sii bilaabay in uu la dagaallamo. Arrinta xiisaha leh ayaa ah inuu isagii koriyay oo wixii uu la dagaallamayay haddana uu gurigiisa la keenay. Miyaanay taariikhda cashar ka baran ayaan is idhi, haddana sharku mar walba waa isku aragti. Garasho badan ma leh ehlu sharku, kumana waantoobaan taariikhda iyo marageeda.

Hargeysa markaan soo galay kormeerkii ayaan hore ka bilaabay. Waan naxay markaan arkay xadiga hablaha uurka leh ee la qalay, inkasta oo aanay weli gaadhin sida Djibouti dhashii looga joojiyay inanta marka saddex jeer la qalo. Waxaan waraystay hooyo ilmaha lagu qalay, waxay ii sheegtay in argagax lagu beeray oo la yidhi waad isku dhimanaysaa haddii aan degdeg laguu qalin.

Hooyooyinka aan arkay ee la qalay raalli kumay ahayn in la qalo waxaase ku qasbay cadaadis maskaxeed. Qaarkood ayaa la siiyay kiniin iyo irbad ka foolisa iyagoon sidkoodii go'in oo aan helin fooshii caadiga ahayd. Hooyada uurka leh waa ka xaaraan in laga nixiyo xaalada ay fooshu hayso, waana argagixisnimo in laga nixiyaa, haa waa axmaqnimo.

Waxa u weyn ee dhakhaatiirtu danayanayaan waa lacag, haddii aan la xakamayn maalin aan fogayn waxay ummadda Soomaaliyeed ay cidhibtirayaan tarantooda, hooyada Soomaaliyeed-na waxay ka dhigayaan xanuun la nool. Waxaan raadiyay in ay jirto lacag ay ha'yad siiso, waxaan soo oggaaday inuu jiro mashruuc yar oo bixiya $500 muu se ahayn mid weyn.

Ha yeeshee hooyo kasta oo ay qalaan waxay ka helaan $500, halka Djibouti ay ka qaataan

50,000 fran. Hooyo si caadiya u dhasha lacag uguma jirto markaa waxay ku dedaalaan in ay ilma kasta oo ay hooyadii calooshii mindi intay ku dooxaan ay kala soo baxaan waxay ku helayaan $500, naxariistii halkay ka martay tallow.

Mid kastaa markaa wuxuu dhistay fooq shan dabaq ah oo cad, hooyo kastaana waxay la dhiban tahay mindidii ay ku dhufteen. Imisa hooyo ayaa intay culays qaadeen ay calooshii furantay, imisa hooyo ayaa ka bixi waayay dhabar xanuun irbadii dhabarka lagaga muday dartii, imisa hooyo ayaa mindidaasi dhaawacday niyadii ay ku qaadi lahayd ilmo kale.

Hooyo aan iyana waraystay waxay ii sheegtay in ay isticmaalaan erayo beerqaad ah oo xataa sabbab u noqon kara in qoysas badan dumo, waxay ku yidhaahdaan ninka ku qabaa dan kaama laha, haddii uu dan kaa leeyahay wuu

ku dul joogi lahaa markaas bay dumarku maroora dilaacaan oo ay qalbi jabaan. Waxaa run ah in raggu dayacay masuuliyadoodii laakiin adeegsiga dhakhtarada ee cudurdaarkaasi waa jariimad bina-aadanimo iyo burburin qof xaalad adag ku jira oo wejehaya xanuunkii foosha un baahan in culayskasta loo sikhro oo ka gadaal si kale loo maareeyo.

## Qaybtii 31-naad

Xaaskaygii ayaa ila soo hadashay oo ii sheegtay in ay ii baholyowday, degdeg in aan New York ugu soo duulayo ayaan ka balanqaaday. Ururka ayaa iga codsaday in Garoowe ku daro kormeerka waanse ka diiday oo waxaan u sheegay in aanan waqti u hayn. Berg ayaa ila balamay oo yidhi caawa 12:00 saacadda Landhan oo xaggayaga noqonaysa abbaaro 2:00-da habeenimo in aan soo galo khadka xog si uu ii siiyo xog xaasaasi ah.

Waan ka aqbalay, anigoo fadhiga bun ku cabaya oo isticmaalaya Internet-ka ayuu Ben Solomon ila soo hadlay. Wuxuu iigu goobaabiyey in aan koro bisha soo socota derajada 23-naad haddii kale ururku uu wax

iska weydiinayo daacadnimadayda iyo heshiiskaygii.

Waxaan u sharraxay sida ilaa hadda aanan diyaarka ugu ahayn in aan qaato derajadaa, in la is qasbaana ay ka soo horjeedo mabaadiida ururka. Ben ayaa si cad iigu sheegay in aanu ururku lahayn qiyam uu ilaaliyo ee qofkii ka hor yimaad amarada uu mutaysan doono ciqaab.

Waxa kale oo Ben carrabka uu ku dhuftay in tuhunkii Don uu rumoobayo haddii aanan aqbalin dalabkooda. Waxa aan is idhi uguma tallogelin in hadalkaas uu sheego ee afka ayaa ka xaday. Waxaan dareemay in ururku uu u dhego nuglaaday tuhunkii Don ee uu maalintii muqdisho igu lahaa waxaad tahay mole (basaas).

Ben waan u carrab laalaadiyay oo waxaan ku beerlaxowsaday in waqti aan ku fekaro la i siiyo, waanu iga aqbalay. Waxa aan doonayaa

in aan waqtigaa ka faa'idaysto si aan u helo xogta xaasaasiga ah ee Berg caawa ii furi doonno. Waxaa markii ugu horraysay niyadayda ku soo dhacday in ururka ka baxsado oo naftayda badbaadsado. Waxaanse ii cadayn jidka aan ka baxsan doonno iyo jihada aan u baxsan, waxaan mudan doono iyo waxa mustaqbalkaygu noqon doonno.

Habeenkaa waxaan ku wareeray talaabada ila gudboon ee aan ka qaadan karo noloshayda. Anigoo isku buuqsan oo xoog u fikiraya ayay gaadhay saacaddii balanta. Berg farriin ayuu ii soo diray uu iga codsanayo in hal saac aan sugo oo uu galay shir aan caadi ahayn oo lagu gorfaynayo xaalad soo korodhay.

Balanta way ku fiicnaayeene maxaa is beddelay. Cabsi ayaan dareemay waxaan u qaatay in arrintayda laga wada hadlayo. Tallaa igu cadaatay, ma baxsataa ayay naftu igu

tidhi. Haddana codkii aan maqli jiray ayaa isagoo ii dhow si xoog ah iigu dhawaaqaya, "adkayso aad xog badan ogaatide." Waxaan noqday qof ay ciyaaro dushiisa ka socdaan, waan qayliyay oo ku qayliyay kumaad tahay. Maxaad iga rabtaan, maxaa sidan la iigu dooray.

Cid ii jawaabaysa ma arko, ma maqlo iimana muuqdaan. Baadhitaan kooban ayaan galay si aan wax uga oggaado gacmaha igu shaqaynaya. Dunida wax aan ka war helay in ay jiraan dad awooddo qarsoon la siiyay; qaar ku helay hanaan togan iyo qaar ku hantay hanaan taban.

Kuwa danbe naar ayay ka dab qaataan oo jin ayay wali ka dhigteen, halka qolada hore ay nuur ku socdaan oo ay yihiin awliyaa'u Raxmaan. Kuwa cilmiga yar ayaa ku dhex dawakha labadan kooxood, waqtigan labada qolaba si qarsoon ayay u shaqeeyaan. Kuwa

qareenka la hadlaa waa ehlu sharka kuwa qalbiga la hadlaana waa ehlu xaqa; dagaalna wuu ka dhaxeeyaa labadaa kooxeed.

Anigoo akhriyaya buugga la yidhaa cadceedii galbeed oo uu qoray Muxiyadiin ibnu Carabi oo ahaa suufi weyn oo degganaa Andulus, markii danbena Shaam usoo cilmi doontay. Buuggu wuxuu xambaarsan yahay sirta aan raadinayay qayb ka mid ah; qaybta nuurka.

Bog xiise leh ayaan marayaa, ibnu Carrabi wuxuu ku dooddayaa "siday wax u qiyaasi karaan iyagoon garanayn. Iyagu qalbiga ayey xukunka ka gaadhi doonaan oo Rabbi ayaa ku ilhaaminaya." Annoo macaansanaya ayuu Berg ila soo hadlay, waxaan jeclaysanayay in uu hal saac oo kale maqnaan lahaa. Berg wuxuu igu bilaabay in uu iga raalligeliyo saacaddaas uu dib u dhacay.

Waxaan weydiiyay maxaa soo cusboonaaday, jawaab aan ka yaabay ayuu i siiyay. Wuxuu yidhi waxaa ururka laga xaday apocalyptic virus ahaa hanti si weyn loo ilaalin jiray. Waxaan ka baqayanay in uu gacan khaldan ku dhaco, waanu ku dhacay lamina hubo si loo addeegsan.

Berg markii wuu beddelay hadalkii oo wuxuu ii bilaabay inuu iiga waramo mawduuc kale oo uu xiisaynayay anna aan xiiseeyay. Wuxuu yidhi dunidu waxay ku shaqaysaa waa tamar, waxaan ku dedaalnay in aannu dunida ku badino tamarta taban si sharku uu u shaqeeyo oo uu awood iyo gacanta sarre u yeesho.

Halkaa aad joogto ee geeska Afrika ah waxaa ka soo baxaysa awood tamareed oo togan oo khalkhal ku haysa awoodddii sharku lahaa. Waxaan ku idhi ii fahamsii tamartaas iyo sida ay u shaqayso. Berg wuxuu qabaa in geeska Afrika ay ka socoto digri badan oo awooddiisu

sarayso oo beddelaysa jihada caalamka. Digriga maxaad ka wadaa ayaan sii weydiiyay inuu ii sheego, mase jeclaysan inuu ka sii hadlo oo wuxuu igu yidhi, "Waan seexanayaa waa inoo mar kale." Khadkii ayuu degdeg uga baxay.

Waxay ka baqayaan salliga nebiga (scw), istiqfaarta, tasbiixda, taxmiida ay dadku wadaan. Waxaan idhi tallow dadku may ka sii badiyaan xadiga ay akhriyaan. Maalintii 1,000 salliga nebbiga ah, 1,000 istiqfaar, 1,000 tasbiiix ah, 1,000 taxmiid ah waxay beddeli lahayd awoodda dunida.

Waxa kale oo aan oggaaday in tasbiixdu ay awoodda jirta ay awood ku darto qaran waa lagu awooddayn karaa tasbiixda oo la badiyo. Kelmada lagu hadlaa waa awood, sixirka ay awoodda u yaqaanaan waa kelmado lagu dhawaaqo. Aakhirka hubka dunidu ku dagaalllami doontaa waa awoodda

kelmadaha.

Waxa kale oo ay ku farxaan in ay ummadda muslimiinta ay kala dagaallameen saddex awooddood;

salliga

Bisinka

Iyo ducada

Qolo waxaa soo baxday odhanaysa yaan salliga rasuulka (scw) aan kor loo qaadin. Marka kasta oo salliga kor loo qaado cid kasta oo maqlaysa waxaa waajib ku ah in ay ku sallido, taasina waxay badinaysaa salligii oo ay ku jirto barako, awood iyo siro badan oo Alle yaqaan. Awooddaa muslimiinta waa lagala dagaallamay. Awoodda labaad waa bisinka, awooddaasna waa lagala dagaallamay ummadda. Wax kasta oo la

bilaabayo waxaa lagu bilaabaa bisinka, dadkana awoodda bisinka way aaminsanaayeen oo yaqaaneen maantase waa lagala dagaallamay oo hoos ha loo dhigo ayaa soo baxday. Maaha masalo cilmi ah waxa aan ka dooddayaa waase in quluubtii lagu yareeyey awooddii bisinka.

Ducada oo ahayd awood kale ayaa la bilaabay in la yidhaa nin walba gaarkiisa ha u ducaysto waa awood kale oo lala dagaallamay Illaahay baa awood oo dhan leh, Illaahay ayaa awooddaha noo geliya asmaadiisa, digrigiisa, ducadayada, bisinka iyo salliga taas baa ah fadliga Rabbi ku galaday addoomadiisa muuminiinta.

Ben Solomon ayaa ii soo diray waqti go'an ee la iga rabo in aan go'aan qaato. Wuxuu ii soo qoray "11. 11 waa in aad isku diyaariso, South Hall, London." Waxaa iga xigga bil iyo saddex iyo tobban cisho. 11 waa tirada sixirka ee ay

aamminsan yihiin, waxaa qalbigayga ku soo dhacday in aan ka sii tashado oo aanan weligay qoortayda dhigin meesha la iigu tashaday. Waxaan ka fikiray sidii aan lacagta badan ee ii taal Barclays bank aan ku heli lahaa. Khidad ayaa igu soo dhacday markiiba waanan u bogay in aan New York tago oo aan halkaas kala baxo lacagta xaaskaygana aan usoo raro dhulka Soomaalida. Waxaan isku qanciyay in ay fikradaasi shaqaynayso, waanan ku calool adaygay in aan ku dhaqaaqo.

# Qaybtii 32-naad

Waxaan u xadhko xidhay in aan New York u baxo, safarkayga waxaa hadheeyay cabsi, werwer iyo naxdin. Ma hubo waxa aan mudan doono, waxaanse u dhaqaaqay khamaar. Si lama filaan ah ayaan uga degay New York si aan u yaab geliyo xaaskayga oo aanan ku wargelin in aan soo baxayo. Xaafaddii Brooklyn markaan tagay nasiib xumo waan ka waayay oo way ka sii guurtay.

Cabbaar ayaan fikiray wax aan sameeyo, mar waxaan is idhi ku raadi GPS-ka tilifankeeda oo ii furnaa maadaama oo aan ninkeedii ahay, markale waxaan is idhi ma wacdaa oo ma weydiisaa halka ay u guurtay. Waxaan go'aan ku gaadhay in aan GPS-kii ku raadiyo, wuxuu

ii sheegayaa in ay Manhattan joogto, waa goobta ay ka shaqayso. Waan la hadlay, si weyn ayay ugu faraxday in New York joogo. Waxay igu tidhi, “darling maxaad iigu soo sheegi wayday sow kumaan soo dhaweeyeen.”

Waxaan u sheegay in aan rabay in kadis kaga dhigo farxadda imaatinkayga, gurigii se ay ka sii guurtay. Waxay tidhi darling gurri ka wacan ayaan inooga helay Delaware halkaas ayaan u wareegay. Addresskii ayay ii sheegtay oo waxay tidhi waan kugu soo gaadhayaa darling halkaa ha ku keeno taxi-gu.

Gurigii ayaan ka hor tagay, iyana way iga habsaantay. Dantu waxay i baday in aan kaabada hor fadhiisto, dhaqanka reer galbeedkana qofka cusub cabsi ayey ka qabaan. Cid booliiska war gelisayba laba askari ayaa iigu yimid halkii. Waxay i weydiiyeen maxaad ka qabanaysaa gurriga,

waa lagaa shakiyay oo jaarka ayaa na soo wargeliyay. Waxaan u sheegay in aan xaaskayga u imid, waxay yidhaahdeen maxaad guddaha u geli wayday. Waan u sheegay in aanan furihii haysan oo aan sugayo, waxay igu yidhaahdeen waanu ku xidhaynaa ee na soo raac. Anigoo dooddaya ayay nasiib wanaag xaaskaygii timid, way la hadashay oo ID geedii ayay tustay sidaa ayay nooga tageen, neef qabow ayaan dareemay anna.

Waxaan guddoonsiiyay xaaskaygii ha'ddiyado aan u waday oo aan dalkii uga soo iibiyay. Waxay aad ugu farxday dharka hiddaha iyo dhaqanka, madaxa ayay iga dhunkatay waanay ii mahadnaqday.

Qolkii hurdada ayay gashay waanay ku soo labisatay, waad yaabaysay sida qurxoon ee ay ugu soo baxday. Laba toddobaad ayaa tagay, waqtigii la ii qabtayna waan ku sii durkayaa.

Niyada waxaan ku hayaa in aan ka tabaabushaysto meesha, lacagtana waxaan doonayaa in la baxo maalmaha u danbaysa ee aan dhoofayo. Haddana, waxaa igu soo dhacday in la iga shakiyo haddii aan xilligaa danbe la baxo lacagta xadigaa leeg.

Markaas waxaan goostay in aan hadda la soo baxo lacagta ii taala marka laga reebo inyar oo aan sharciga baanku ii oggalayn in aan ka saari karo xisaabtayda bangiga oo shuruuc u xaniban.

Intaan shandad maas ah sii qaatay, gaadhigii xaaskana kaxaystay ayaan subaxdii ku kalahay Barclays bank, New York. Lacagtii ayaan codsaday in aan kala baxo, waxaa la ii geeyay maamulihii waaxda. Cabbaar ayuu i waraystay maxaad lacagta nooga wada saaraysaa ma waxaanad ku qancin adeegyada aanu bixino. Waxaan u sheegay in maalgashi gelinayo oo aan lacagta u

baahanahay. Wuu soo ansixiyay, waanan la soo baxay lacagtii. Markaan gurrigii imid lacagta waxaan dhigay basement-ka hoose si aan uga qariyo xaaskayga oo aanay u arag.

Farriin ayuu Berg ii soo diray uu igu sheegayo inuu ka war hayo in aan New York joogo, dhanka kalena uu igu farayo in la igu celinayo 'initiation' oo aanan hore u buuxin shuruudihiisii sidaa ay tahay go'aan ay isla qaateen madaxda ururku. Waxaan ka dareemay in ay bilaabeen qorshe ay dabinka igu soo gelinayaan, marka horena waan ka taxadirnaa.

Habeenimadii ayaan tagay meelahan buugta qadiimka ah lagu iibiyo, waxaanan ka soo helay buug xiiso badan oo ay ku duugan yihiin waxyaabaha uu maro qofka derajada 23 qaadanayaa. Buugga Babylon Codes ayaa si fiican u sharaxaya cilmiga sixirka iyo waxa la xidhiidha dunida qarsoon ee ay ku

shaqeeyaan walaalaha madow ee ururkan Dark Marrow ka tirsan yahay iyo kuwa la haya hawlaha.

Meeshii ugu horraysay ee sixirku ka soo bilaabmaana waxay ahayd Baabiil (Babylon). Waa meesha ay yimaadeen labadii malag ee Haaruut iyo Maaruud. Waxyaabaha cajabta badan ee buugga ku jira waxaa ka mid ah qofka derjadaa sixirka qaadanaya waxa madaxiisa ka baxaya nuur cad iyadoo ay dhegaha ka soo gelayaan qiiq madow.

Nuurka madaxa ka baxayaa waa "imaankii", qiiqa madowna waa mugdigii iyo imaan la'aan tii. Markaad sii akhrido wuxuu hanaankaa ku sheegayaa in loo yaqaan "initiation", markaas baa argagax kale igu sii dhacay. Habeenkaas dareenka naftayda miranayay darteed waxaan jeclaystay in aan isaga baxo inta aanu waagu baryin.

Subaxdii ayaan xawaaladaha Soomaalida lacago badan ku soo dirsaday oo aan iska soo hormariyay. Duhurkii markaan soo noqday ayay xaaskii iigu bushaaraysay in ay uur ii leedahay oo ay ilmo caloosha iigu sido. Waan ku farxay in aan aabbo noqonayo, waxaanse ka naxsanahay in aanan ilmahaygaa arki doonin wejiga noloshayda u qarsoon oo aan ii saamaxayn awgeed.

Iyadu aad bay u faraxsan tahay, indhaheeda ayaan eegayaa mustaqbalka quruxda badan ee aan ka burburinayo ayaan ka murugooday markaas bay ilin tif ka tidhi dhabanayda. Waxay igu tidhi darling miyaadan ku faraxsanayn uurka, waxaan ku idhi waan farxad ooyayaa aniga dareenkayga been ka sheegaya. Waan la qoslayaa, iyana waxaa yiddidiilo wanaagsan geliyay in ay hooyo noqonayso.

Habeenkii ayaan suuqa u baxay iyana ballan

ayay lahayd oo ima raacin. Waxaan usoo iibiyay dahab aan doonayay in aan uga dhigo ha'ddiyad kadis ah oo ay ku faraxdo, maadaama oo ay uur ii qaaday. Guriga hore ayaan u imid, waxaanan doonay in aan ha'ddiyada ku qariyo meel kabadhka ka mid ah si aan hadhow kadis ugu xidho qoorta iyadoo muraayada hortaagan.

Kabadhkii markaan soo furay ayaan maryaha hoostooda kor u qaaday si aan u geliyo, fargal ayaan ku arkay. Naxdin baan qaaday oo wadnaha ayaa i gariiray. Waxaan ku arkay fargal ay gaar u leeyihiin ururkii dark marrow oo ay ku sawiran tahay mas iyo dhuux.

Waan baqay oo waxaan ka shakiyay in aan ku jiro guri abeeso. Waxaan is weydiiyay ma ururka ay ka tirsan tahay, haddana waxaan ogahay in aan ururka dumar loo oggalayn. Haddaba sidee bay fargalkan labada kun ee doolar ururka dhexdiisa laga siiyaa siduu ku

soo gaadhay gacanteeda. Mise sifo kale ayuu ku soo galay oo iyadu aqoon umalaha sida hablaha Soomaalida ee isha isk qabta sawirada arooskooda iyagoon garanayn macnaha waxa ay samaynayaan.

Ma haysto cid ii xaqiijisa malahayga iyo shakigayga. Waxaanse goostay in aan berri ka dhoofo, khad toos ah ayaan raadiyay New York ilaa Adis Abbaba waanse waayay, waxaan helay duulimaad John F Kennedy - Arlanda - Boli. Kii baan goostay waxaanse cabsi ka qabaa in transitka Sweden ay ururkii jaanis iga helaan.

Habeenkii markay timid ha'ddiyadii oo aan jeebka ku haysto ayaan hor geeyay muraayadii kabadhka sariirta. Waan ammaanay deeto qoorta ayaan silsilad qurux badan aan ugu qabtay, Way ku faraxday si xad dhaaf ah, waxaanay ii sheegtay in ay i jeceshahay oo ay ha'ddiyadana ka heshay.

Habeenkaa farxad weyn ayaan wada qaadanay, subaxdii markay shaqo tagtay ayaan waraaq qoraal ah u qoray sariirta ayaan dul saaray lacag badana waan ag dhigay; waanan ka soo dhoofay. Warqadda waxaan ku qoray:

"Waxaa laga yaabaa in aanan mar danbe indhahaaga arag, nasiib na aanan u yeelan in aan dunida ku soo dhaweeyo ilmaha aan aabbaha u noqonayo. Waxaan ku noolahay nolol adag oo aan ii saamaxayn in aan si xorriyad ah kuula noolaado.

Go'aanka aan qaatay maaha wax aan xukumo, waa mid ka baxsan awooddayda. Waxaan la cararayaa naftayda, waxaanan kaala cararayaa cadaawad. Markaad farriintan hesho waxaan kaa codsanayaa si naxariis leh in aad bedesho addresskaaga, tilifanadaada iyo wax kasta oo laguu soo raaci karo. Waayo, waxaan yeelan doonaa cadow ku soo raadsan

doonna, si aad u badbaado oo aad ilmaheena u badbaadiso waa in aad ka guurtaa New York. Haddii maalin ii laaban tahay way dhici kartaa in aynu dib isku aragno. Waan ku jecelahay laakiin duruuf baa igu qasbaysa in aan fogaado. Ballan baan kaa qaaday ahayd in aanan ka dheeraan doonin, waxaan kuu qiranayaa in aan fulin kari waayay ballantii aan kaa qaaday. Cadceedi way soo baxaysaa mar labaad, cisi ku noolow oo guulayso labada daarood."

## Qaybtii 33-naad

Hawada New York markaan dul marayo ee aan magaaalada hoos usoo eegayo ayaan dareemay caloolyow iyo murugo. Ilmada ayaa dhabankayga qoysay, waxaan ka xumaaday in noloshu ii oggalaan wayday in aan ku xasillo. Waxaan galay safar nololleed oo cusub oo aanan garanayn meel uu ku dhammaan doonno.

Mustaqbalkaygu uma soo qurux badna sidaan ku riyoon jiray umana eeka sidaan niyaysan jiray. Ilmaha caloosha la iigu sido ayaan sawiranayaa siduu mustaqbalkiisu noqon doonno.

Kama werwerayo inuu noolaan doonno oo ilmo kastaaba nasiibkiisa ayuu ka qaadayaa

dunida, waxaanse ka baqayaa inuu iga cafin waayo danbiga aan ka galay iyo waajibkii aabbonimada ee aan ka baxsaday.

Waxaa maskaxdayda ku soo dhacaya sawiradii quruxda badnaa, madaarkii Jomo Kenyatta ee aan isku baranay, soo dhawayntii Brooklyn, xiisihii toddobaadkii dalxiiska ee gobolka California. Weli waxaa hortayda imanaysa awooddii qosolkeeda iyo farxaddeedu ku lahaayeen qalbigayga.

Nolosha aan la qaatay waqtigaa yar tayada ay lahaayeen ayaanan marnaba iloobi doonin. Xusuusaha ay abuurtay iyo jawiyadii aan la qaatay ayaan si dhib yar uga tirmi doonin maankayga. Erayadeedii macaanaa, daryeelkeedii iyo jecaylkii ay ii qabtay ayaa daqiiqad walba i dacwaynaya. Waxay i siisay nolol, anna waxaan ka qoomamaynayaa sida aan ugu abaalguday ee aan u xumeeyay qofkii wanaagsanaa.

Anigoo waalalowgaa ku jira ayay diyaaraddii soo cago dhigatay Arlanda, Sweden oo aanu saacaddo kooban ku ahaan doonno transit. Markaas ayay cabsidii ururku igu soo xaadirtay waayo, waxaan joogaa carro Yurub oo meel kasta oo aad far ka dhigto ay ka soo gaadhayaan. Waxaan bilaabay in aan akhristo Aayatu Kursi, waan ku celcelinayay ilaa aan ka soo duulayay Arlanda.

Nasiib wanaag waan ka soo badbaaday cabsi kasta oo Sweden aan ku dareemay. Habeennimo ayaan ka soo degnay madaarka Boli international airport. Hudheel ayaa lana geeyay, qofkii isoo dhawaynayay ayaa igu yidhi, "ku soo dhawow nolosha xaqa ah."

Waxaan is moodsiiyay in aan maqlay kelmad kale, waxaan ku idhi maxaad tidhi bal ku celi. Wuxuu igu yidhi,"ku soo dhawow nolosha xaqa ah." Wuxuu sii raaciyay, "...mugdigii wuu kaa dhammaaday ee ku soo dhawow nuurka." Ta

cajab, kooxna waan ka soo baxsaday kooxna waan ku baxsaday. Hore ayaan u dhaafay waxaan dareemay in wareeg kale halkan iiga bilaabmayo. Kooxdani tallow ma kuwii adkayso ku odhan jiray baa ee kugu shaqayn jiray. Waxaan jeclaa in aan kuwaa oggaado, markaan alaabtii qolka dhigtay ayaan ku noqday ninkii si aan u waraysto.

Markaan albaabkii soo istaagay ayaan ninkii waayay, qoladii kale ee dadka soo dhawaynaysay ayaan weydiiyay mee ninkii casaa ee Soomaaliga u eekaa ee halkan igu soo dhaweeyay. Waxay ii sheegeen in nin sifahaas leh aanu u shaqaynba hudheelka.

Hareeraha ayaan eeg eegay waddadii ayaan labada dhinac u cararay bal in aan arko inuu jidka sii socdo. Waxba ma arag, jawigii ayaa iga xumaaday. Waxaan is weydiiyay maxaa nolosha lagaa imtixaamayaa, maxaa noloshaada cidhiidhigan geliyay. Hudheelkii

ayaan isaga noqday anoo sidii qof waalan isla hadlaya.

Kelmad baa si weyn iigu soo noqnoqatay oo maskaxdayda ka bixi wayday, "ku soo dhawow nuurka." Waxaan ka dhex dareemay rejo hor leh, waan ku degay sidii baan ku soo dhoofay 9:30-kii barqanimo.

Saacad ka dib ayaan furay tilifankii, waxaa isoo gashay farriin ka timid Berg oo hanjabaad ahayd, "Waan ognahay in aad Hargeysa tagtay oo aad ballantii ka baxday "We will chase you, capture you and hunt you down." Markaas waxaan noqday fugitive la baacsanayo.

Degdeg ayaan u booqday guryihii aan ku shaqayn jiray oo aan doonayo in aan ka soo qaato document iga yaalay. Masalaha ayaan ku horreeyay gurigii markaan is idhi fur, ayuu ii shaqayn waayay furihii waxaa la beddelay

daakhiligii.

Waxaan la hadlay ninkii iga kireeyay, luuqada uu igula hadlay ayaan gartay in ururkii soo dhex maray gacmo kale oo aan khatar ku sugganahay. SIM cardkii ayaan ka tuuray tilifankii, waan soo dhaqaajiyay markaan meel dhexe marayo ayaan mobilkiina daaqada ka tuuray. Gaadhigii ayaan macdaar dhigay, gaadhi kale ayaan ingaydh ahaan ku kiraystay.

Gaadhigii ayaan ku baxsaday markuu magaaladii iga saaray ee uu i geeyay tuulada saddexaad ayaan ku idhi halkan aynu hilib ka cunno. Waan degnay hudheel ayaan fadhiisanay, kaadi ayaa i haysa intaan ku idhi ayaan xagga suuliga oo meel danbe ku yaala u kacay. Waan dhaqaajiyay anigoo hareeraha iska ilaalinaya oo baaladaymoonaya tallaabadana hoosta ka xadaya.

Waqooyi iyo xeeb ayaan afka saaray si aan badda xeeligeeda u raaco oo aan ka gaadhayo meel aan la iga soo gaadhayn. Guban markaan ku dhaadhacay ayaan arkay biyo durdur ah oo buur ka soo rogmanaya. Waan cabay, ku maydhay ku raaxaystay, anigoo biyaha agtooda ku nastay ayay laba nin iigu yimaadeen. Waan is waraysanay, markaan doonay in aan dhaqaajiyo ayay igu tuureen hadal.

Waar hadda waxaa la noo soo diray in aan ku soo galbino. Maad aamintaa ayaan is idhi, waxbaa igu leh aamin, casharkii ugu horreeyay ee aan ururka bartayna wuxuu dhigayay in aanan cidna aaminin noloshayda. Raali ahaada intaan ku tuuray ayaan ka dhaqaajiyay.

Markaan in door ah socdaba gadaal ayaan soo jaleecayay si aan u hubiyo in la i raad gurayo iyo inkale. Anigoo dhaqaaq joogsigaa

ku jira oo weliba markan xaggan danbe iska eegaya ayaan sheeda ka arkay buur soo qurux badan oo aan buuraha la mid ahayn. Waxaan niyaystay in aan ku nasto buurtaas oo aan caawa seexdo hadday ii suurtogasho. Markaan buurtii ku soo dhawaaday ayaan meel aanan ka filayn ay saddex nin igaga soo baxeen. Waan ku naxay, markay arkeen in aan naxsanahay ayuu nin dhar cad ku labisan oo ay haybad ka muuqato ayaa igu yidhi, "waa lagu nabadgeliyay ee ha baqan."

Intaanan hadalka ka celin ayuu raacsaday xogtii aan kuu dirsanay sideedii ayaad u keentay. Waxaan ku idhi, "oo yaad ahayd adigu." Wuxuu iigu jawaabay isagoo dhoollacadaynaya waxaan ahay qofkii ku odhan jiray "adkayso aad wax badan ogaatide."

Aqoonta nuurka waxa arka kuwa nuurka u saaxiibka ah, waana kuwa nuurka ruuxda hela. Waa qoraal durugsan oo dhumucdiisu aad u baaxad weyntahay. Waa farriin waxtar u ah jiilka gama'san ee waqtigan loo hashiiyay ee wali reernimo taagan. Marna waa hiil kuwa maskaxda furan quud u ah. Weynuhu ha ku barakeeyo.

Muuse Xaaji Cabaydh

Dhiganahan Mashruucii La dagaalanka nuurku, waxa uu baraarujin u yahay ummada Soomaalida sida diintooda iyo dhaqankooda duulaanka loogu yahay ee la doonayo in la burburiyo.

Cadnaan Nuux Gahayr

Akhriska buuganni waxa uu ku bari doonaa sida ay dunidu u shaqayso, waxa uuna Si la yaab leh kuu daawadsiin doonaa dunida kaa qarsoon, maskaxdaadana wax uu kaga taggi doonaa xusuuso iyo raadad ma guuraan ah.

Cabdirashiid Cabdilaahi Yuusuf

HIIL PRESS

Madbacadda Hiil Press
contact@hiilpress.com

9 781648 263996